# Caqiidada fudud

## Laga soo qaatay kitaabka iyo sunnada

Dr Axmad C/raxmaan Alqaadi

العقيدة الميسرة

من الكتاب العزيز والسنة المطهرة

أ. د. أحمد بن عبدالرحمن القاضي

الجمعية العلمية السعودية للدراسات الإسلامية
Saudi Association for Islamic Studies

# Caqiidada fudud

## Laga soo qaatay kitaabka iyo sunnada

Dr Axmad C/raxmaan Alqaadi

بسم الله الرحمن الرحيم

**© Cooperative Office for Islamic Propagation in Rabwah , 2017**

**King Fahd National Library Cataloging-in-Publication Data**

AL Gadi, Ahamed

The Islamic faith- A simplified presentation. / Ahmed

AL Gadi .- Riyadh , 2017

88p ; 16x23cm

ISBN: 978-603-8229-21-7

1-Faith (Isalm)  2- Islam - Theology

I- Tile  241 dc  1439/97

**L.D. no.  1439/977**

**ISBN: 978-603-8229-21-7**

Hordhac 7

Caqiidada fudud ee laga soo qaatay kitaabka iyo sunnada 13

Rumaynta Ilaaheey 15

Rumaynta malaa'igta 65

Rumaynta kutubta 75

Rumaynta rususha 83

Rumaynta maalinta aakhiro 91

Rumaynta qadarta 99

Qur'aanka 105

Arkida Ilaaheey 109

Xaqiiqada iimaanka 111

U talinta muslimiinta oo dhan iyo jamaacada 119

Asaxaabta 121

Awliyada 127

Usuul aan waxba ka tegaynin oo la xiriirta xagga aasaas u jeexida iyo wax daliisashada 129

Waxaa ka mid ah waxyaabaha dhamaystira caqiidada 131

Diinta iyo dariiqa 135

# Hordhac

Waxaa mahad oo dhan leh Ilaaheey. Isaga Ayaan kaalmo waydiisanaynaa, dembidhaaf waydiisanaynaa, waxaana aan ka magan gelaynaa wixii shar iyo dhibaato ah oo ay nafteenu gaysato iyo acmaasheena kuwooda xun. Qofkii uu Alle hanuuniyo cid baadiyayn kartaa ma jirto, qofkii uu baadiyoobid u qorana cid hanuunin kartaa ma jirto.

Waxaan yaqiinsanahay in uusan jirin ilaah xaq lagu caabudo oo aan Allaah ahayn, isaga oo kaligiis ah, wax cibaadada iyo maamulka uunka la wadaagaana aysan jirin. Wuxuuna yiri (c.n.k):"Waa Allihii  u soo diray dadka carbeed oo aan wax qorin waxna aqrin Rasuul ay isku dad yihiin oo u aqriya aayadaha Ilaheey, kana daahiriya xumaanta iyo shirkiga, oo baraya kitaabka iyo xikmada, intaan loo soo dirina waxay dadkaasi ku jireen jaahilnimo iyo lunsanaan cad" [Aalu cimraan:164].

Intaas ka dib,waxaa Ilaaheey soo diray rasuulkiisa Muxamad ah isagoo wada hanuun iyo diin xaq ah, si uu dadka uga saaro mugdiga una bixiyo iftiinka, oo ka saaraaro baadinimada cad una saaro hanuunka dhamayska tiran ee laabtu waasic ku noqoto, qalbiguna ku dego. Hanuunku waa cilmiga naafica ah, diinta xaqqa ahina waa camalka suuban. Labadaas arrimood ayey ku qotontaa nolosha wanaagsani.

Ilaaheey wuxuu kitaabkiisa dhexgeliyey wax walba oo adoomadu u baahan yihiin xagga caqiidadooda, cibaadadooda, akhlaaqda iyo mucaamalaadkooda (sida wax kala gadashada iyo guurka).

Sunnada Nabiga ee daahirka ahi waxay u timid ooloogu talogalay in ay noqoto mid faahfaahisa wixii Quraanku uu duuduub u sheegay, ayna fasirto wixii uusan macnahoodu aad u cadayn, ayna kala dhigdhigto wixii si guud loo sheegay, sida uu Miqdaam ka soo wariyeyba Nabiga (n.n.k.h) inuu yiri "Waxaa la I siiyey kitaabka iyadoo ay la socdaan wax isaga oo kale ah (waa sunnada)"[abuu Daawuud: 4604 ].

Caqiidada islaamku waa lafdhabarka diinta islaamkaiyo aasaaskiisa, waa sababta uu u yahay mid awood badan, kana sarreeya diimaha oo dhan, maadaama ay leedahay waxyaabo u gaar ah, oo ay ka mid yihiin:

1. In cibaadada lagu koobo Alle , raacistana lagu koobo Nabiga (n.n.k.h).
2. Waa mid salkeedu yahay Ilaaheey, sidaa awgeed lama dhaafi karo lag-amana tilaabsan karo kitaabka iyo sunnada, man aka shidaal qaadato ra'yi iyo qiyaas (waa arrin ku salaysan in wixii aan aayad iyo xadiis lahayn laga mid dhigo xukun ahaan wixii iyaga oo kale ah laakiin iyagu aayad iyo xadiis leh).
3. Waxay waafaqsan tahay sidii uu Alle ku abuuray aadanaha intii aysan duufsan shayaadiintu.
4. Waxay waafaqsan tahay caqliga ka fayoow waxa ay naftu jeceshahay iyo fekradaha aan saxda ahayn.
5. Waa mid ay wax walbaaba ku dhan yihiin, sidaa awgeed waxay caday-say dhinac walba oo la xiriira koonka (uunka), nolosha iyo insaanka.
6. Waa mid isku wada eg, oo qaarkeedba uu rumaynayo oo sii xoojinayo qaarka kale, sidas awgeed laguma arko wax isdiidan oo iska hor imaa-naya oo ka mid ah qaybaheeda.
7. Waa mid dhexdhexaad ah, sidaas awgeedna waa miisaanka iyo hal-beega isku dheeli tirnaanta xagga xad-dhaafida iyo gabood-falka, waana miisaanka guud ahaan wararka isqilaafsan.

Waxaa ka dhashay waxyaabahaas aan soo sheegnay miraha soo socda:

b) Sugidda iyo xaqiijinta in adoon loo noqdo rabbiga uunka oo dhan,lagana xoroobo in adoon loo noqdo khalqiga.

t) Sugidda in la raaco Rasuulkii uu soo dirsaday Rabbil caalamiinku, lagana xoroobo bidcada iyo bidcooleyaalkaba.

j) In la helo nafta oo uu qanacsan iyo qalbiga oo ku degan ku xirnaanta Allihii uunka abuuray, iskana lahaa maamulka, ahaana midka xikmada badan.

x) In la helo qancsanaan xagga fekerka ah, toosnaan xagga caqliga ah iyo ka badbaadid khuraafaadka iyo hadba gebi ku dhaca.

Kh) In la helo in la buuxiyo danihii iyo baahiyihii naftu lahayd, kuwii jirka iyo inay is dhamaystiraan caqiidada iyo camal-falku.

Culummada islaamku waxy weligood ahaayeen kuwo aad ugu dadaala caqiidada, sidaas awgeed waxay dadaal xoog leh gelin jireen inay caqiidada dadka baraan, in ay qoraan oo allifaan kubub la soo koobay iyo sharaxyo balaaran iyagoo mar mar cadaynaya caqiidadii salafka, mar marna cadaynaya mas'lo gaar ah, mar mar kalena meesha ka saaraya ahlu bidcada iyo bidcooyinka dadka lumiyaba.

Maadaama sidaasi kirto Ayaan waxaan go'aansaday soo dhoweeyo oo fududeeyo mas'alooyinka caqiidada anigoo u kala hormarinaya qaabkii uu Nabigu (n.n.k.h) u tixay arkaanta iimaanka ee lixda ah oo ku jirtay xadiiskii Jibriil ee caanka ahaa. Waxaanan ka shidaal qaadan doonaa oo aan ka soo dhuran doonaa kitaabka iyo sunnada, anigoo tiir walbaba hoostiisa uga hadlidoona waxyabaha iyo qaybaha hoos imaanaya, gadaalna karaacsiin doona inaan cadeeyo cidda garab martay tiirkaas, qaladkoodana aan cadayn doonaa anigoo aan ku fogaanaynin.

Sidaas awgeed ayaa kitaabkaan caqiidada ahi wuxuu noqday mid u dhexeeya kutubka aadka u balaaran iyo kuwa aadka u kooban, isagoo ku tilmaaman inuu cad yahay isla markaasna uu sahlan yahay, si dadadka muslimiinta ahi ay awood ugu yeeshaan inay wax ku dheefaan oo ku intifaacaan, sidoo kalena u suurto gasho in lagu gaaro dantii laga lahaa oo ahayd in ay dadku si guud u bartaan caqiidadii salafka iyadoo lagu soo bandhigayo qaab sahlan, si macquul ahna loo nidaaminayo.Waxaana aan u bixiyey kitaabkaan "***Caqiidada fudud ee laga soo qaatay kitaabka iyo sunnada"***.

Allaah Ayaan waxan waydiisanayaa inuu ka dhigo mid isaga oo kali ah loola jeedo oo aysan cidna la wadaagin, uuna ka dhigomid anfaca adoomadiisa. Ilaaheey ha ku salliyo oo salaamo Nabigeena Muxamad ah iyo ehelkiisa iyo asaxaabtiisa oo dhan.

W/Q

*Dr Axmad bin C/raxmaan Alqaadi*

Kuliyada shareecada iyo daraasaatka islaamka-qaybta caqiidada

Jaamicadda *Al qasiim*

E-mail:______E-mail:

P.o.box 246 51911 Unaizah

# Caqiidada fudud ee laga soo qaatay kitaabka iyo sunnada

Caqiidada islaamka waxaa aasaas u ah in la rumeeyo Ilaaheey, malaa'igtiisa, kutubtiisa, rusushiisa, maalinta qiyaamaha iyo qaddarta shar iyo khayr wixii ay noqotaba.

Alle wuxuu yiri:

{وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالْكِتَابِ وَالنَّبِيِّينَ} البقرة:١٧٧

"Qofka samafalkiisu balaaran yahay khayrkiisuna kaamilka yahay waa qofka rumeeyey Ilaaheey, qiyaamaha, malaa'igta, kutubta iyo nabiyada" (Al Baqarah:177).

Waxaa kale oo uu yiri:

{آمَنَ الرَّسُولُ بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْهِ مِنْ رَبِّهِ وَالْمُؤْمِنُونَ كُلٌّ آمَنَ بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ} البقرة:٢٨٥

"Rasuulku wuxuu rumeeyey wixii lagu soo dejiyey oo uga yimid xagga Alle, mu'miniintuna way rumeeyeen, mid walba oo ka mid ahi wuxuu rumeeyey Ilaaheey, malaa'igtiisa, kutubtiisa iyo rusushiisa" (Al Baqarah:285).

Sidoo kalena wuxuu yiri:

{يا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا آمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَالْكِتابِ الَّذِي نَزَّلَ عَلى رَسُولِهِ وَالْكِتابِ الَّذِي أَنْزَلَ مِنْ قَبْلُ وَمَنْ يَكْفُرْ بِاللَّهِ وَمَلائِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلالاً بَعِيداً} النساء:١٣٦.

"Kuwa xaqqa rumeeyayoow, ku sugnaada rumaynta Ilaaheey, rasuulkiisa, kitaabkii uu kusoo dejiyey iyo kutubtii uu hortiis soo dejiyey. Qofkii kukufriya Ilaaheey, malaa'igtiisa, kutubtiisa, rusushiisa iyo maalinta qiyaame, qofkaasi wuxuu lumay oo wadada saxda ah ka leexday lumid aad u fog" (Alnisaa:136).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ إِنَّا كُلَّ شَيْءٍ خَلَقْنَاهُ بِقَدَرٍ}القمر: ٤٩.

“wax walba waxaan abuurnay isagoo ah midla sii qorsheeyey oo ku qoran lawxul-maxfuudka” (Al Qamar:49).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu Jibriil ugu jawaabay markii uu iimaanka wax ka waydiiyeyb sida uu soo wariyeyba C/hi bin Cumar (a.k.n) :”waa inaad rumay-do Ilaaheey, malaa’igtiisa, kutubtiisa, rusushiisa,yawmul qiyaamaha,aadna rumayso qadarta khayrkeeda iyo sharteedaba” (w.w.Muslim).

# Rumaynta Ilaaheey

Ilaaheey in la rumeeyaa waa in si aan labolabayn lahayn loo citiqaadiyo jiritaanka Ilaaheey (c.n.k),uuna yahay rabbiga wax walba, ee mudan in kaligiis la caabudo iyada oo aan cid kale lala caabudaynin, uuna leeyahay tilmaamaha kaamil-nimada, kana hufan tilmaamaha nusqaanta.

Rumaynta Ilaaheey waxay ka kooban tahay afar arrimood:

1.**Jiritaanka Ilaaheey** oo ah waxa jira midka ugu sugan oo aan weligiis suulaynin. Alle (c.n.k) wuxuu yiri:

{ ذَلِكَ بِأَنَّ اللهَ هُوَ الْحَقُّ وَأَنَّ مَا يَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ هُوَ الْبَاطِلُ وَأَنَّ اللَّهَ هُوَ الْعَلِيُّ الْكَبِيرُ } الحج:٦٢

“ lahaanshaha awoodda iyo cilmiga dhamayska tiran sababteedu waa in Alle uu yahay midka sugan oo isbedel ku dhicin, iskiisna u jira.waxa aad caabudaysaan oo aan isaga ahyna waa wax kama jiraan oo waa baadil, Ilaaheeyna waa mid ka sareeya wax walba, kana wayn wax walba” (Alxaj:62).

Ka shakinta jiritaanka Ilaaheey waa been-abuur iyo munkar. Ilaaheey wuxuu yiri:

{قَالَتْ رُسُلُهُمْ أَفِي اللَّهِ شَكٌّ فَاطِرِ السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضِ يَدْعُوكُمْ لِيَغْفِرَ لَكُمْ مِنْ ذُنُوبِكُمْ وَيُؤَخِّرَكُمْ إِلَى أَجَلٍ مُسَمًّى} إبراهيم:١٠

“Rusushii ayaa umadahoodii waxay ku yiraahdeen:ma shaki ayaa wuxuu ka jiraa Ilaaheey iyo tawxiidkiisa, isagoo ah Alla abuuray circa iyo dhulka, wuxuu idinkugu yeerayaa inaaad adeecdaan si uu idinkugu dembidhaafo, uuna idiin kaadiyo ilaa muddo cayiman” (Ibraahiim:10).

In jiritaankiisa la diidaana waa kibir, dulmi iyo gaalnimo.Nabi Muuse ayaa Fircoon woon wuxuu ku yiri:

{قَالَ لَقَدْ عَلِمْتَ مَا أَنْزَلَ هَؤُلاءِ إِلا رَبُّ السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضِ بَصَائِرَ وَإِنِّي لأَظُنُّكَ يَا فِرْعَوْنُ مَثْبُورًا} الاسراء:١٠٢

“waad ogtahay inuusan mucjisaadkaaskeenin cid aan ahayn Rabbiga abuuray circa iyo dhulka, si ayu noqdaan kuwo tusiya inuu Alle mid yahay. Waxaana aan hubaa inaad Fircoonoow mid lacnadi ku dhacday oo xaqqa la baalmariyey” (Al israa:102).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ قَالَ فِرْعَوْنُ وَمَا رَبُّ الْعَالَمِينَ (٢٣) قَالَ رَبُّ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا إِنْ كُنْتُمْ مُوقِنِينَ (٢٤) قَالَ لِمَنْ حَوْلَهُ أَلَا تَسْتَمِعُونَ (٢٥) قَالَ رَبُّكُمْ وَرَبُّ آبَائِكُمُ الْأَوَّلِينَ (٢٦) قَالَ إِنَّ رَسُولَكُمُ الَّذِي أُرْسِلَ إِلَيْكُمْ لَمَجْنُونٌ (٢٧) قَالَ رَبُّ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ وَمَا بَيْنَهُمَا إِنْ كُنْتُمْ تَعْقِلُونَ (٢٨) قَالَ لَئِنِ اتَّخَذْتَ إِلَهًا غَيْرِي لَأَجْعَلَنَّكَ مِنَ الْمَسْجُونِينَ (٢٩) } الشعراء:٢٣-٢٩.

“wuxuu yiri Fircoon oyuu yahay Rabbiga abuuray uunka oo dhan? Muuse wuxuu ugu jawaabay “ waa Allahaabuuray circa iyo dhulka iyo waxa u dhexeeya, haddii aad tihiin kuwo wax yaqiinsanaya. Wuxuu Fircoon ku yiri dadkii la joogay: ma wadnaan maqlayn? Markaas ayaa Muuse intaas sii raacsiiyey:Ilaaheey waa rabbigiina iyo rabbigii awooweyaashiinii hore, Fircoon ayaa markaas yiri: Rasuulkiinaan la idiin soo diray waa nin waalan.Muuse wuxuu haddana yiri:Ilaaheey waa rabbiga qorrax ka soo bax iyo qorrax u dhac iyo inta u dhexaysa abuuray haddii aad wax garatiin, markaas ayaa Fircoon yiri: haddii aad Ilaah ka dhigato cid aan aniga ahayn waan ku xirayaa”(al shucaraa:23-29).

Waxaa tusinaya jiritaanka Ilaaheey arrimo badan, waxaana ka mid ah:

1.Fidrada toosan: waxaana laga wadaa waxa uu Ilaaheey ku abuuray ibnu aadamka oo uusan horay u soo baran, ee ah wax qofka ku daaban oo abburistiisa la socda. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ فَأَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا فِطْرَتَ اللَّهِ الَّتِي فَطَرَ النَّاسَ عَلَيْهَا لا تَبْدِيلَ لِخَلْقِ اللَّهِ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لا يَعْلَمُونَ } الروم::٣٠

“Diintaada waxaad khaalis iyo saafi uga dhigtaa Ilaaheey,adigoo oo aan dhinacna uga leexanaynin, laasima sidii Ilaaheey uu dadka ku abuuray, hana bedelinina tawxiidka Ilaaheey uu idinku abuuray,   kaasina waa diinta toosan, laakiin dadka badankoodu ma oga” (Al Ruum:30).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: “Ilmo kasta oo la dhalo waxay ku dhashaan fidrada, sidaas awgeed waxaa Yuhuud, Nasaaro ama dab-caabud ka dhiga labadiisa waalid” (w.w.Bukhaari). Muslimka waxaa ku yiiley: Ilmo kasta in uu ku dhalanayo diintaan”. Waxaa kale oo ku yiiley” diintaan islaamka ayuu ku dhalanayaa sidaas ayuuna ka ahaanayaa ilaa carrabkiisu uu ka caddeeyo waxa qalbigiisa ku jira oo islaamka ka soo horjeeda” (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

Qof walba oo uu Alle abuuray wuxuu wataa oo uu baaqi ku yahay fidradii (aqbalsanaanta iyo aqoonsanaanta Ilaaheey) lagu abuuray, sidaa awgeed wuxuu naftiisa kadareemayaa in uu rumaysan yahay jiritaanka Ilaaheey, sudaas ayuuna ahaanayaa hadii aysan ku soo biirin wax ka fasahaadiya fidtarada. Alle (c.n.k) wuxuu ku yiri xadiisul-qudsi:"Adoomadayda waxan abuuray iyagoo dhamaantood diinta iyo xaqqa ku toosan, markaas ayaa inta shayaadiin u timid ayey diintooda dhaafsiiyeen" (w.w.Muslim).

Waxaa dhici karta in fidrada ay dulfuusho xayaabo ka kooban shahawaat (waxyaabaha ay naftu jeceshahay) iyo shubuhaat (arrimo aan kala cadayn oo qofka fekerkiisa qaloociya), laakiin waxay fidradu banaanka u soo baxdaa iyadoo saafi ah marka ay dhibaatooyinka waawayni ay dhacaan. Ilaaheey wuxuu yiri isaga oo ka hadlaya sida ay gaaladu noqdaan marka balaayadu ay ku habsato:

{فإذا ركبوا في الفلك دَعَوُا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ فَلَمَّا نَجَّاهُمْ إِلَى الْبَرِّ إِذَا هُمْ يُشْرِكُونَ}العنكبوت:٦٥

"Marka ay badda ku safraan oo ay ka cabsadaan inay doontu la qalibanto waxay baryaan Ilaaheey iyagoo aan cid kale la baryeynin, marka uu inta soo badbaadiyo ay berriga tagaana waxay u noqdaan dhaqankoodii hore oo ahaa in ay Alle u shariig yeelaan" (Al cankabuut:65).

2.Caqliga fayoow, oo ah midka ka nabadgalay shubuhaatka (arrimo aan kala cadayn oo qofka fekerkiisa qaloociya) iyo shahawaatka (waxyaabaha ay naftu jeceshahay). Caqliga fayoow wuxuu si aan shaki ku jirin u garanayaa in waxa la abuuray oo dhan ay lagama maarmaan u tahay inay leeyihiin cid abuurtay, sababtoo ah suurtogal ma ahan inay iska abuurmeen iyadoo aan la abuurin, sidoo kalena suurtogal ma ahan inay iyagu naftooda abuureen, wax aan jirini wax ma abuuraan, sida awgeed waxaa lagama maarmaan ah inay leeyihiin abuure iyo iyaga wax jira ka dhigay. Waana Allaah (c.n.k).

Markii uu Nabiga (n.n.k.h) u yimid nin la yiraahdo *Jubayr bin Mudcim* oo markaa gaal ahaa, oo ugu yimid soo daynta dad lagu soo qabtay dagaalkii Beder, markii uu u yimid ayuu wuxuu maqlay Nabiga oo salad maqrib ku aqrinaya suuratu Duur, markii uu gaaray aayadda ah:

{أَمْ خُلِقُوا مِنْ غَيْرِ شَيْءٍ أَمْ هُمُ الْخَالِقُونَ أَمْ خَلَقُوا السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ بَلْ لَا يُوقِنُونَ }

"ma waxaa la abuuray iyaga ooaan lahayn cid abuurtay, ma iyaga ayaa is abuuray, ma iyaga ayaa abuuray cirka iyo dhulka, iyaguma ahan kuwo ya-

qiinsan cadaabta Ilaaheey" wuxuu yiri markuu aayadahaas maqlay: wuxuu wanahayguku sigtay inuu haado oo duulo" (w.w.Bukhaari). Arrintaasina waxay sabab u noqotay inuu iimaanku qalbigiisa galo.

Kadiibkii catbeed ee waqtigii jaahiliga oo la dhihijirey Qus bin Saacidah ayaa wuxuu u daliishaday caqligiisa toosnaa in uu Alle jiro, markaas ayuu wuxuu yiri isagoo arrintaas cadaynaya:"Digada geelu waxay tusisaa oo astaan u tahay neefka geela ah, raadka dhulka ku yaalaana wuxuu tusiyaa oo wax ka sheegaa ciddii raadkaan lahayd, ma cirkaas leh xidigaha urursan (meel ku xoonsan) iyo dhulkaas leh wadooyinka ma waysan tusinaynin khaaliqii xog-ogaalka ahaa?".

3.Waxa la dareemayo lana daalacanayo: Ilaaheey wuxuu yiri:

{سَنُرِيهِمْ آيَاتِنَا فِي الْآفَاقِ وَفِي أَنْفُسِهِمْ حَتَّى يَتَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُ الْحَقُّ} فصلت:٥٣

"waxaan ka tusinaynaa jihooyinka kala duwan iyo weliba waxa ku dhacaya naftooda calaamadaha tusinaya xaqqa si ay dadka ugu cadaato ay u tusiyaan inuu Qur'aanku xaq yahay" (fussilat:53).

Waxaas la daalacanayo wuxuu leeyahay noocyo kala duwan , waxaa ka mid ah mucjisooyinka nabiyada, karaamaadka awliyada iyo saalixiinta, iyo weliba aqbalida ducada.

Alle (c.n.k) wuxuu yiri isagoo ka hadlaya nabi Nuux:

{فَدَعَا رَبَّهُ أَنِّي مَغْلُوبٌ فَانْتَصِرْ فَفَتَحْنَا أَبْوَابَ السَّمَاءِ بِمَاءٍ مُنْهَمِرٍ وَفَجَّرْنَا الْأَرْضَ عُيُونًا فَالْتَقَى الْمَاءُ عَلَى أَمْرٍ قَدْ قُدِرَ وَحَمَلْنَاهُ عَلَى ذَاتِ أَلْوَاحٍ وَدُسُرٍ تَجْرِي بِأَعْيُنِنَا جَزَاءً لِمَنْ كَانَ كُفِرَ} القمر:١٠-١٤

"Wuxuu nuux baryey rabbigiis, isagoo yiri: way la iga adkaaday ee Alloow ii hiilli oo ii aargud, markaas Ayaan waxaan furnay samada albaabadeeda iyadoo ka imaanayaan biyo xoog u socda, dhulkana waxan ka keenay ilo biyo ah, markaas ayaa waxaa isku yimid byihii circa ka yimid iyo kuwii dhulka ka yimid, isagana si aan u badbaadino waxaan ku qaadnay doon ka samaysan alwaax iyo masaamiir, doontaasina waxay biyahaas ku dhexsocoyay innagoo isha ku hayna oo ilaalinayna, sidaasna waxaan u samaynay si aan ugu abaalgudno nabigii lagu kufriyey oo la beeniyey" (Alqamar:10-14).

Waxaa kale oo uu yiri:

{فَأَوْحَيْنَا إِلَى مُوسَى أَنِ اضْرِبْ بِعَصَاكَ الْبَحْرَ فَانْفَلَقَ فَكَانَ كُلُّ فِرْقٍ كَالطَّوْدِ الْعَظِيمِ (٦٣) وَأَزْلَفْنَا ثَمَّ الْآخَرِينَ (٦٤) وَأَنْجَيْنَا مُوسَى وَمَنْ مَعَهُ أَجْمَعِينَ (٦٥) ثُمَّ أَغْرَقْنَا الْآخَرِينَ (٦٦) إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُمْ مُؤْمِنِينَ} الشعراء:٦٣-٦٧.

“Waxaan u waxyoonay Muuse oo aan ku niri ushaada ku dhifto badda, markii uu ku dhiftayna way kala baran yahay iyadoo bar walbaaba uu noqday sida buur oo kale, kuwii kalena (waa fircoon iyo ciidankiisa) badda Ayaan soo gelinay, Muuse iyo intii lasocotayna waan badbaadinay dhamaantood, ka dibna waxaan biyaha laynay kuwii kale (waa fircoon iyo ciidankiisa)” (Al shucaraa:63-67).

Eebbe wayne wuxuu yiri isagoo Ciise kahadlaya:

{ وَرَسُولا إِلَى بَنِي إِسْرَائِيلَ أَنِّي قَدْ جِئْتُكُمْ بِآيَةٍ مِنْ رَبِّكُمْ أَنِّي أَخْلُقُ لَكُمْ مِنَ الطِّينِ كَهَيْئَةِ الطَّيْرِ فَأَنْفُخُ فِيهِ فَيَكُونُ طَيْرًا بِإِذْنِ اللَّهِ وَأُبْرِئُ الأَكْمَهَ وَالأَبْرَصَ وَأُحْيِي الْمَوْتَى بِإِذْنِ اللَّهِ وَأُنَبِّئُكُمْ بِمَا تَأْكُلُونَ وَمَا تَدَّخِرُونَ فِي بُيُوتِكُمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ لآيَةً لَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ } آل عمران:٤٩

“Waxaan ka dhigaynaa rasuul loo diro reer banii israa’iil, markii loo dirayna wuxuu ku yiri: waxaan wataa calaamad Rabbigiin ka timid oo tusinaysa inaan run sheegayo, markii ay waydiiyeen waxa ay tahay markii ay waydiiyeena wuxuu yiri: waxaan waxan dhoobada ka samaynayaa walax leh suuradda iyo muuqaalka shimbiraha, ka dibna waxaan ku afuufayaa naf, waxayna idinka Ilaaheey ku noqonayaan shimbiro, waxan idanka Ilaaheey aan indhaha ugu fiiqayaa qofka indha la’aanta ku dhashay, waxan daawaynayaa qofka barraska qaba, waxan soo noolaynayaa dadka dhintay , waxaana aan idiin sheegayaa cuntada aad gurigiina ku cuni doontaan iyo midda aad dhigan doontaan oo aad u reeban doontaan sida inaad ku cashaysaan, arrimahaas aan idiin sheegay waxaa idinkugu jira caddaymo, haddii aad tihiin dad xaqqa rumaynaya” (Aalu Cimraan:49).

Waxyaabahaas oo kalena waxay soo mareen Rasuulkeena Muxamad ah. Waxaa laga soo wariyey Anas bin Maalik in uu nin ka soo galay masjidka albaab xigey dhinaca daarta dadka lagu kala xukmiyo, iyadoo Rasuulkuna uu khudbo jimcaad u taagan yahay, inta istaagay oo dhinaca Rasuulka u jeestay ayuu wuxuu yiri: xoolihii waa baaba’een, wadooyinkiina way xirmeen ee Alle noo bari inuu roob na siiyo, Nabigu inta gacmaha kor u tagay ayuu saddex goor wuxuu yiyi*: Alloow roob nasii*. Anas wuxuu yiri: Alle Ayaan  ku dhaartaye circa ugama aanan jeedin wax daruur ah ama

tusinaya roob, innaga iyo buurta la yiraahdo salc wax na kala qarinayeyna ma jirin, markaas ayaa sila markiiba waxaa buurtaas gadaasheeda ka soo baxay daruur yar oo sida gaashaanka oo kale ah, markii ay circa bartankiisa tagtayna way faaftay roobna way sii daysey, sidaas awgeedna qorrax ma aanan arkin hal todobaad, jimcihii kale ayaa isla ninkii ka soo galay isla albaabkii isagoo Rasuulku uu khudbada aqrinayo, markaas ayuu yiri xoolihii waa baaba'een wadooyinkiina way xirmeen ee Ilaaheey noo bari inuu roobku naga joogsado, Rasuulku gacmaha ayuu kor u taagey wuxuuna yiri: Ilaaheeyoow roobka naga dulqaad oo u wareeji magaalada banaankeeda, buuraha, togaga iyo dhulka daaqsinka ah, markii uu sidaas yiri roobkii waa istaagay, banaanka ayaan ku soconay iyadoo qorraxdu soo jeedo" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

Mucjisaadka Rususha,ajiibidda baryaha adoomada, kurba ka qaadka dadka kurbaysan waa caddaymo la dareemayo oo dadadbadan  ay ogaadeen, waxayna marqaati la hubo u tahay inuu jiro Allihii soo diray Rusushaas,aqbaly baryaha, una gargaaray kuwa gargaar doonka ah, Allahaasi ceeb iyo nusqaan ka hufnaayey.

4.Sharciga saxda ah: waa kitaabka kariimka ah iyo sunnada saxiixa ah.

Eebbe wayne (c.n.k) wuxuu yiri:

{أَفَلَا يَتَدَبَّرُونَ الْقُرْآنَ وَلَوْ كَانَ مِنْ عِنْدِ غَيْرِ اللَّهِ لَوَجَدُوا فِيهِ اخْتِلَافًا كَثِيرًا} النساء:٨٢

"ma waysan munaafiqiintu u dhabagelaynin oo aysan dhuuxaynin Qur'aanka, haddii ay ka fekeri lahaayeen oo u fiirsan lahaayeen wanaag badan ayey gaari lahaayeen.

Qur'aanku haddii uu cid kale ka imaan lahaa waxay ka heli lahaayeen iska hor-imaad iyo qaladyo kala duwan" (Al nisaa:82).

Waxaa kale oo uu yiri:

{يَاأَيُّهَا النَّاسُ قَدْ جَاءَكُمْ بُرْهَانٌ مِنْ رَبِّكُمْ وَأَنْزَلْنَا إِلَيْكُمْ نُورًا مُبِينًا} النساء:١٧٤.

" War dadoow, waxaa idiin yimid caddayn iyo daliil xag Alle ka yimid, waxaana aan idiin soo soo dejinay nuur cad" (Annisaa:174).

Waxaa kale oo uu Alle yiri:

{يَاأَيُّهَا النَّاسُ قَدْ جَاءَتْكُمْ مَوْعِظَةٌ مِنْ رَبِّكُمْ وَشِفَاءٌ لِمَا فِي الصُّدُورِ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ لِلْمُؤْمِنِينَ} يونس:٥٧

"War dadoow waxaan idiin yimid waano Alle ka timid (Quraanka waaye) ,

daawo loogu talo galay waxa laabta ku jira oo jaahilnimo ah, hanuun iyo naxariisna ay ka helayaan mu'miniintu " (Yuunus:57).

Alle (c.n.k) wuxuu yiri:

{أَوَلَمْ يَكْفِهِمْ أَنَّا أَنْزَلْنا عَلَيْكَ الْكِتابَ يُتْلى عَلَيْهِمْ إِنَّ فِي ذلِكَ لَرَحْمَةً وَذِكْرى لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ} [الْعَنْكَبُوتِ: ٥١] .

"Ma waysan caddayn ugu filnayn gaaladaas [si ay u ogaadaan inaad run sheegayso] in aan Qur'aanka kugu soo dejinay oo lagu dul-aqrinayo, dadka wax rumaynayaan waxaa sidaas ugu jira naxariis iyo waano" Al cankabuut:51.

Waxa Qur'aanka ku jira oo ka mid wararka rumoobay oo ghaybka ahaa (aan dareemayaasha lagu ogaan karin) waxyaabahaas iyo caqiidada saxda ah,shariicada icaadilka ah, iyo akhlaaqda toosaniba waxay caddayn u yihiin in Qur'aanku uu Alle kayimid,aysana suurtogal ahayn inuu meelkale kayimid.

Maadaama ay sidaasi jirto ayaa qofna uusan u inkirin jiritaanka Alle,ee dadka qaar oo diin laaweyaal ah [ooisugu jira kuwo hore iyo kuwo dambe] ayaa waxay iska dhigeen sidii inay inkirsan yihiin jiritaanka Alle. Kuwaasna waxaa ka mid ah:

1. Dahriyiinta: waa qayb ka mid ah falsafad-yahanada oo aaminsan in caalamku uu yahay mid weligiis jiray, siina jiri doona weligiis. Waxaa kuwaas shabaha waqtigaan aan ku jirno kuwa loo yaqaano 'diinlaaweyaasha cusub'.

Qoladaas falsafad-yahanada ka mid ahi waa kuwa yiraahda:

{مَا هِيَ إِلَّا حَيَاتُنَا الدُّنْيَا نَمُوتُ وَنَحْيَا وَمَا يُهْلِكُنَا إِلَّا الدَّهْرُ وَمَا لَهُمْ بِذَلِكَ مِنْ عِلْمٍ إِنْ هُمْ إِلَّا يَظُنُّونَ} الجاثية:٢٤

"ma ay jirto nolol aan ahayn midda aan adduunkaan nool nahay, waan dhimanaynaa, ilmaheenuna way sii noolaanayaan, mana na dilayo wax aan ahayn waqtigaas na soo maraya, marka ay sidaasleeyihiina wax aqoon ah uma lahan arrinkaas, ee waa uun malaynayaan waxaas ay sheegayaan" (Al jaathiyah:24).

Waxay ku andacoodaan in caalamku uu iskiis u socdo oo cid kale oo maamushaa aysan jirin, weligiis inuu sidaasahaa uuna sidaas sii ahaan doono. Waxna way dhashaan oo calooshu waxay soo saaraysaa noole, dhulkuna waalaqaa, sidaas awgeed waxay yiraahdeen waxa na dilaya waa

samanka. Waxay sidaas awgeed ka dhigeen makhluuqaadka kuwo aan lahayn abuure. Sidaas ay ku andacoodeena waxaa Ilaaheey uu cadeeyey inaysan sax ahayn salna aysan lahayn markii uu yiri"wax cilmi ah oo ay sidaas u hayaan ma ay jiraan" oo kuma qotonto caqli ama cilmi ee waa uun mala-awaal iyo wax ay iska dhaadhiciyeen.

2.Dabaa'iciyiin: waa qolo yiraahdaan caalamka wuxuu ka dhashay oo ku yimid xagga dabiicada oo ay ka wadaan in wax walbaaba ay iyagu is abuureen iskoodna u socdaan sida noolaha, ma noolaha geedaha iwm. In warkooda la buriyo waa wax fudud. Waxaa la leeyahay waxaan marnaba suurtogal ahayn in shaygu uu hal mar wada noqdo abuure iyo la abuure (wax la abuuray). Alle wuxuu yiri" ma la abuuray (mushrikiinta) iyadoo aysan jirin cid abuurtay, mise iyagaaba is abuuray" (Al duur:35).

Dabiicada ay abuurista u tiirinayaan oo ay leeyihiin iyada ayaa wax abuurtay waa waxyaabo aan noole ahayn oo dhega la', indho la', hadal la' oo aan lahayn wax dareen ah ee sidee ayey iyadu u unki kartaa makhluuqaad nool,wax aragta, wax maqasha, hadasha oo dareenta xanuunka iyo rajada!, ***wuxuna ma bixiyaan oo ma dhiibaan wax aysan haynin***.

3. Sudfiyiin: waa qolo rumaysan in makhluuqaadku ay ku abuurmeen si uun kadis ah, oo ayka wadaan in isku soo aruurka iyo isku imaatinka qurubyada ugu yaryar ay si lama filaan ah uga dhalatay noloshu, iyo in ay samaysmaan maqluuqaadka kala duwan, iyadoo aysan jirin wax qorshe ah oo abuurankooda ka horeeyey. In arrintaas sida ay tahay loo sawirto ayaa ku filan in la burburiyo aysana ahayn wax maangal ah. Khalqigaan ku qotoma nidaam yaab leh oo ku shaqeeya kuna socda xeerar fadhiya iyo isku miisaanaan nigaxan ayaa wuxuu diidayaa waxaas ay ay ku andacoodeen oo ah in uu si kadis ah isaga abuurmay.Ilaaheey wuxuu yiri :

{صُنْعَ اللَّهِ الَّذِي أَتْقَنَ كُلَّ شَيْءٍ} السجدة : ٧

" Alle wuxuu ku abaal mariyey intii wanaag ama xumaan sameeyeen abaalmarintiisa, waana Allaha ku farayaraystay wax walba"(Al sajdah:7).

Waxaa kale oo uu yiri:

{اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ سَبْعَ سَمَوَاتٍ ومِنَ الأَرْضِ مِثْلَهُنَّ يَتَنَزَّلُ الأَمْرُ بَيْنَهُنَّ لِتَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ وأَنَّ اللَّهَ قَدْ أَحَاطَ بِكُلِّ شَيْءٍ عِلْمًا} الطلاق:١٢

"Ilaaheey waa midka abuuray todobada samo iyo dhulka oo into kale ah, waxaana ka dhaqangala kuna socda cirka iyo dhulka iyo inta u dhexaysa

Ilaaheey amarkiisa, xukunkiisa, waxayna waxaas oo dhami u soo degaan si aad u ogaataan in Alle uu wax walba awoodo,wax walbana uu ogyahay" (al dalaaq:12).

4.Shuuciyiinta: waa dadka raacsan Karl Marx, oo leh "Ilaah ma jiro,noloshuna waa maadada [waa walax kasta oo cuf iyo mug leh]".

Dadka sidaas aaminsani waxay dawladoodii ku aasaaseen [midowgii soofi-yeedka] gebigaas aan sal adag ku taagnayn iyo caqiido baadil ah, wax-ayna dawladoodii ku burburtay waqti gaaban, waxayna u kala googo'day dawlado dhawr ah.

5. Shaqsiyaad falaago ah: sida Fircoon oo iska dhigay oo isu muujiyey inuu Rabbiga inkirsan yahay, wuxuu yiri:"oo muxuu yahay Rabbilcaalamiinku" (shucaraa:23), ka dibna isagaa ilaahnimada sheegtay oo wuxuu yiri: "ma aan ogi inaad leedihiin ilaah aan aniga ahayn" (Al qasas:38), wuuna u dhaartay Muuse oo wuxuu yiri: "Hadii aad ilaah ka dhigato cid aan aniga ahayn waan ku xirayaa" (Al shucaraa:29).

Iyo sida Numruud: oo la dooday Ibraahiim isaga oo kuqabsaday cidda Rabbiga u ah:

{إِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمُ رَبِّيَ الَّذِي يُحْيِي وَيُمِيتُ قَالَ أَنَا أُحْيِي وَأُمِيتُ قَالَ إِبْرَاهِيمُ فَإِنَّ اللَّهَ يَأْتِي بِالشَّمْسِ مِنَ الْمَشْرِقِ فَأْتِ بِهَا مِنَ الْمَغْرِبِ فَبُهِتَ الَّذِي كَفَرَ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ} البقرة:٢٥٨

"markaas ayaa Ibraahiim yiri: Rabbigaygu waa Allaha wax nooleeya waxna dila, wuxuu Numruud yiri: aniguba wax waa nooleeyaa waxna waa dilaa, markaas ayaa Ibraahiim yiri: waxaa Ilaaheey uu ka soo bixiyaa qoraxda dhinaca bari ee adigu ka soo bixi dhinaca galbeed, markaas ayaa jawaabtii ku adkaatay Numruud oo wuu aamusay, Ilaaheeyna ma hanuuniyo dadka daalimiinta ah" (Albaqarah:258).

Dadkaas oo dhami naftooda ayey ka soo horjeedaan, waxay inkiraad kala hortegayaan fidradooda, sida Ilaaheeyba uu ku qiray isagoo yiri:

{وَجَحَدُوا بِهَا وَاسْتَيْقَنَتْهَا أَنْفُسُهُمْ ظُلْمًا وَعُلُوًّا فَانْظُرْ كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الْمُفْسِدِينَ} النمل :١٤

"markii ay arkeen aayaadkii (mucjisooyinkii) Muuse la siiyey way diideen oo way beeniyeen, naftooduna way hubtey inay Ilaaheey ka yimaadeen aayaad-kaasi, laakiin waxay ku diideen dulmin ay naftooda dulmiyeen iyo inay iska-la sarreeyeen inay rumeeyaan, laakiin fiiri sida ay noqotay dadkii fasaadka wadey ciribtoodu" (Al namli:14). Sidaa awgeed wax ka haray ma ay jiraan.

**Rumaynta Rabinimadiisa:** waa in loo citiqaadiyo si uusan shaki kujirin in Alle uu kaligiis uu yahay Rabbiga,Abuuraha, Maaligga amarka leh. Rabbi waxaa laga wadaa sayyidka milkiilaha ah oo koonka ku tasarufa, kuna dhaqaaleeyey caalamka oo dhan nicmooyinkiisa. Alle wuxuu yiri:

{قَالَ فَمَنْ رَبُّكُمَا يَا مُوسَىقَالَ رَبُّنَا الَّذِي أَعْطَى كُلَّ شَيْءٍ خَلْقَهُ ثُمَّ هَدَى}طه:٤٩-٥٠

“waxaa Fircoon yiri:Muusoow adiga iyo Haaruun yaa Rabbigiinu yahay, wuxuu ugu jawaabay: Rabbigeenu  waa Allaha wax walba abuurista ku haboon siiyey, kadibna ku toosiyey oo ku hanuuniyey danihiisa iyo waxa anfacaya” (Daha:49-50).

Rabinimadu waxay ku taagan tahay saddex arrimood:

1.Abuurida: Alle waa midka abuuray wax walba, wixii ka soo harayna waa wax la abuuray. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ اللَّهُ خَالِقُ كُلِّ شَيْءٍ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ وَكِيلٌ } الزمر:٦٢

“Ilaaheey waa midka abuuray wax walba, wax walbana xafida, dana-hoodana ka shaqeeya” (Al zumar:62).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ وَخَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ فَقَدَّرَهُ تَقْدِيرًا } الفرقان:٢

“wax alba isaga ayaa abuuray, wuxuuna ka dhigay mid u diyaarsan wixii laga rabey oo loo abuuray” (Alfurqaan:3).

Wax walba uu la yiraahdo waxaa abuuray cid aan Alle ahayn waxaa laga wadaa waxaa isku keenkeenay oo qaab cayiman u sameeyey ee lagama wado waxaa unkay oo wax aan jirin isagoo ah ka dhigay wax jira, sidaan waxaa kaliah oo samayn kara Ilaaheey. Alle wuxuu yiri:

{فَتَبَارَكَ اللَّهُ أَحْسَنُ الْخَالِقِينَ} المؤمنون:١٤

“Alle waa mid khayrkiisu badan yahay, uguna wanaagsan inta wax abu-urta” (Al mu’minuun:14).

2.Milkiga:Alle waa midka wax walba iska leh oo milkiyey, wixii ka sooharay-na waa wax la milkiyey. Ilaaheey wuxuu yiri:

{أَلَمْ تَعْلَمْ أَنَّ اللَّهَ لَهُ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا لَكُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ وَلَا نَصِيرٍ} البقرة:١٠٧

“Ma waadan ogayn in Ilaaheey uu leeyahay milkiga dhulka iyo cirka, aysana jirin cid aan Alle ahayn oo idiin gargaari karta, dantiina gacanta ku dhigi karta” (Albaqarah:107).

Waxaa kale oo uu yiri:

{وَلِلَّهِ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ} آل عمران:١٨٩

“Ilaaheey isaga ayaa iska leh milka cirka iyo dhulka, wuxuuna awoodaa wax walba” (Aalu cimraan:189).

Ilaaheey waxaa uu yiri:

{قُلِ اللَّهُمَّ مَالِكَ الْمُلْكِ تُؤْتِي الْمُلْكَ مَنْ تَشَاءُ وَتَنْزِعُ الْمُلْكَ مِمَّنْ تَشَاءُ} أل عمران:٢٦

“Waxaad tiraahdaa Ilaaheeyoow, wax walba midka milkiyeyoow, mulkiga waxaad siisaa cidda aad rabto,waxaadna ka qaadaa cidda aad doonto” (Aalu cimraan:26).

Waxaana uu Eebbe wayne xusay:

{وَلَمْ يَكُنْ لَهُ شَرِيكٌ فِي الْمُلْكِ} الاسراء:١١١

“Ilaaheey ma uu lahan cid shirko kula ah mulkiga” (Al israa:111).

Wuxuu mar kale yiri:

{ذَلِكُمُ اللَّهُ رَبُّكُمْ لَهُ الْمُلْكُ وَالَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ مَا يَمْلِكُونَ مِنْ قِطْمِيرٍ} فاطر:١٣

“Midkaasi waa Rabbigiin, Mulkigana isaga ayaa iska leh, kuwa aad caabudaysiin oo aan isaga ahayn idiinma heli karaan wax la’eg xuubka ku dahaaran lafta timirta” (Faadir:13).

Wax lahaansho kasta oo lagu sheego cid Rabbi ahayn waa lahaansho ku meelgaar ah oo aan dhamaystirnayn, sida ku xusanba aayadda ah:

{يَاقَوْمِ لَكُمُ الْمُلْكُ الْيَوْمَ ظَاهِرِينَ فِي الْأَرْضِ} غافر:٢٩

Nin mu’min ah oo ka mid ahaa Fircoon dadkiisa ayaa wuxuu yiri: “Tolkeeyoow, manta adinka ayuu mulkigu gacanta idinkugu jiraa, dhulka Masarka waad uga xoog badan tihiin reer banii israa’iil” (Ghaafir:29).

Iyo sida ku xusan warka Alle oo ahaa “waxa ay gacantiinu milkisay” (Al nisaa:3).

Laakiin milkiga dhamayska tiran waxaa iska leh Ilaaheey kaligiis. Alle wuxuu yiri:

{إِنَّا نَحْنُ نَرِثُ الْأَرْضَ وَمَنْ عَلَيْهَا وَإِلَيْنَا يُرْجَعُونَ} مريم:٤٠

“Innaga ayaa dhulka iyo waxa saaran dhaxlayna oo u harayna, innaga ay-eyna noo soo noqonayaan” (Maryam:40).

3. Amarka: Alle waa midka kali ah oo amarka bixiya, inta ka soo hartayna waa kuwa laamro.Ilaaheey wuxuu yiri:

{قُلْ إِنَّ الْأَمْرَ كُلَّهُ لِلَّهِ}آل عمران:١٥٤

“Waxaad tiraahdaa: amarka iyo guusha oo dhan waxaa iska leh Ilaaheey”(Aalu cimraan:154).

Waxaa kale oo uu yiri:

{أَلَا لَهُ الْخَلْقُ وَالْأَمْرُ تَبَارَكَ اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ } ألاعراف:٥٤

“Waxaa iska leh abuurista iyo amar bixintaba Ilaaheey, waxaa khayrkiisu batay Ilaaheey oo ah Rabbiga caalamka oo dhan” (Al acraaf:54).

Sidoo kale wuxuu yiri:

{وَقُضِيَ الْأَمْرُ وَإِلَى اللَّهِ تُرْجَعُ الْأُمُورُ} البقرة: ٢١٠

“Arrintii ahayd kala xukminta khalqiga waa laga faaruqay, wax walbaana Alle ayey u soo noqonayaan”(AL baqarah:210).

Nabigiisana wuxuu ku yiri:

{ لَيْسَ لَكَ مِنَ الْأَمْرِ شَيْءٌ} آل عمران:١٢٨

“Adigu waxa kuma aad lihid go’aanka (hadii gaaladu ay diinta rumay-nayaan iyo hadii la cadaabayaba)” (Aalu cimraan:128). Haddii nabi Mux-amad (n.n.k.h) sidaas lagu yiri halkee ayey joogaan dadka kale.

Waxaa sidoo kale uu yiri:

{لِلَّهِ الْأَمْرُ مِنْ قَبْلُ وَمِنْ بَعْدُ} الروم:٤

“Talada iyo go’aanka waxaa iska lahaa inta aysan guulaysan reer Ruum iyo markii ay guulaysteen ka dib ba, waxaa iska lahaa  Ilaaheey” (Al ruum:4).

Ilaaheey isaga kaligiis ayaa amra khalqigiisa. Wixii amar ah oo lagu sheego cid aan isaga ahayn waa amar hoos imaanaya Ilaaheey rabitaankiisa oo aan noqon karin mid ka hoosbaxa, sida ku xusan oo kale warka Ilaaheey oo ahaa:

{فَاتَّبَعُوا أَمْرَ فِرْعَوْنَ وَمَا أَمْرُ فِرْعَوْنَ بِرَشِيدٍ} هود:٩٧

“Waxay raaceen amarkii Fircoon, amarkiisuna ma ahayn mid wanaag lagu gaaro oo wanaagsan” (Huud:97).

Amarka uu leeyahay khalqigu waa mid hoos imaanaya Ilaaheey doonistiisa,oo hadii uu rabo wuu socodsiinayaa, hadii uu rabana wuu jooji-nayaa.

Amarka Ilaaheeyna waxaa isku mid ah labadiisa qaybood oo kala ah: Amar sharci ah oo laga rabo inay fartoomaan (ayna dhacdo in qaar aysan far-toomin) iyo amar kawnka iyo uunka la xiriira oo aysan cidna hor-istaagi karin,midkaan dambe waxay isku macne yihiin rabidda Ilaaheey. Ilaaheey wuxuu yiri isagoo ka hadlaya qaybtaan dambe:

}إِنَّمَا أَمْرُهُ إِذَا أَرَادَ شَيْئًا أَنْ يَقُولَ لَهُ كُنْ فَيَكُونُ{ يسن:٨٢

“Marka uu Alle rabo inuu wax abuuro amarka uu bixiyaa waa inuu waxaas ku yiraahdo abuuran oo sidaas noqo, ka dibna shaygii wuxuu u a dhacaa oo u ahaadaa sida uu Alle amray” (Yaasiin:82).

Laakiin amarka sharciga ah waa meesha lagu imtixaano oo lagu kala ogaado inta amarka qaadanaysa iyo inta kale, wuxuuna la macne yahay maxabada iyo jeclaanta Ilaaheey,sidaas awgeed waxaa dhici karta inuu dhaco iyo inuusan dhicin, waxaas oo dhan waxay hoos yimaadiin rabitaan-ka Ilaaheey, sida uu Alle u yiriba:

{لِمَنْ شَاءَ مِنْكُمْ أَنْ يَسْتَقِيمَ وَمَا تَشَاءُونَ إِلَّا أَنْ يَشَاءَ اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ} التكوير:٢٨-٢٩

“Qur’aanku wuxuu waano u yahay qofkii raba inuu toosnnadooo xaqqa raaco, mana aad rabi kartaan oo ma dooran kartaan haddii uusan Ilaaheey rabin oo ah Rabbiga caalamiinta oo dhan” (Al takwiir 28-29).

Tilmaamaha sifooyinka rabbinimadu inta aan halkaan lagu sheegini waxay ku soo aruurayaan saddexdaan arrimood: Abuurista, mulkiga iyo amarka. Til-maamaha aan halkaan lagu sheegin oo tusinaya Rabbinimadiisa waxaa ka-mid ah: rixqi bixinta, noolaynta, naf ka qaadista, roob keenista, dhulka daaq

ka soo bixinta, dabaylaha hadba hadba nooc soo daynta,isdhaaf-dhaafka habeenka iyo maalinta, caafimaadka iyo jirrada, ciziga iyo dulliga iwm.

Iimaankaan la rumaynayo Rabbinimadiisa (c.n.k) waa wax ku jira oo ku daaban fidrada iyo abuurka qofka, waxana lagu gartaa caqliga aan aad loo tuujin,uunkana waa laga dareemayaa, wuxuuna ka buuxaa nusuusta iyo adillada kitaabka iyo sunnada. Waxaana ka mid ah adillada sidaan tusinaysa oo ku jirta kitaabka Alle:

{إِنَّ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاخْتِلَافِ اللَّيْلِ وَالنَّهارِ وَالْفُلْكِ الَّتِي تَجْرِي فِي الْبَحْرِ بِمَا يَنْفَعُ النَّاسَ وَمَا أَنْزَلَ اللَّهُ مِنَ السَّمَاءِ مِنْ مَاءٍ فَأَحْيَا بِهِ الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا وَبَثَّ فِيهَا مِنْ كُلِّ دَابَّةٍ وَتَصْرِيفِ الرِّيَاحِ وَالسَّحَابِ الْمُسَخَّرِ بَيْنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ} البقرة:١٦٤

“abuurista samada iyo dhulka, isbedbedelka habeenka iyo maalinta,maraakiibta badda ku socota iyadoo wada wax dadka anfacaya, biyaha cirka ka yimid ee uu Alle ku nooleeyey dhulha kadib markii dhimatay, waxa uu Alle ku faafiyey dhulka oo noole ah, bedbedelidda dabaylaha,iyo daruurta socota cirkaiyo dhulka dhexdooda iyadoo ah mid la sakhiray,intaas oo dhan waxaa ku jira cadaymo tusinaya mid ahaanta Ilaaheey, waxana ay cadaymahaasi ay wax tusiyaan dadka caqliga leh” (Al baqarah:164).

Waxaa kale  oo Alle yiri:

{ تُولِجُ اللَّيْلَ فِي النَّهَارِ وَتُولِجُ النَّهَارَ فِي اللَّيْلِ وَتُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَتُخْرِجُ الْمَيِّتَ مِنَ الْحَيِّ وَتَرْزُقُ مَنْ تَشَاءُ بِغَيْرِ حِسَابٍ} آل عمران:٢٧

“waxyaabaha tusiya awoodaada Ilaahoow,waxaa ka mid ah:inaad habeenka geliso maalinta,maalintana aad geliso habeenka markaasna uu midkoodna yaraanayo midka kalena dheeraanayo, waxaad noole ka soo bixisaa ma-noole, ma-noolena waxad ka soo bixisaa noolaha, waxaadna siisaa ciddii aad rabto risaq faraha ka batay” (Aalu cimraana:27).

Eebbe wayne wuxuu yiri:

{ إِنَّ اللَّهَ فَالِقُ الْحَبِّ وَالنَّوَى يُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَمُخْرِجُ الْمَيِّتِ مِنَ الْحَيِّ ذَلِكُمُ اللَّهُ فَأَنَّى تُؤْفَكُونَ(٩٥) فَالِقُ الْإِصْبَاحِ وَجَعَلَ اللَّيْلَ سَكَنًا وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ حُسْبَانًا ذَلِكَ تَقْدِيرُ الْعَزِيزِ الْعَلِيمِ(٩٦) وَهُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ النُّجُومَ لِتَهْتَدُوا بِهَا فِي ظُلُمَاتِ الْبَرِّ وَالْبَحْرِ قَدْ فَصَّلْنَا الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ (٩٧) وَهُوَ الَّذِي أَنْشَأَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ فَمُسْتَقَرٌّ وَمُسْتَوْدَعٌ قَدْ فَصَّلْنَا الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَفْقَهُونَ (٩٨) وَهُوَ الَّذِي أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجْنَا بِهِ نَبَاتَ كُلِّ شَيْءٍ فَأَخْرَجْنَا مِنْهُ خَضِرًا نُخْرِجُ مِنْهُ حَبًّا مُتَرَاكِبًا وَمِنَ النَّخْلِ مِنْ طَلْعِهَا قِنْوَانٌ دَانِيَةٌ وَجَنَّاتٍ مِنْ أَعْنَابٍ وَالزَّيْتُونَ وَالرُّمَّانَ مُشْتَبِهًا وَغَيْرَ مُتَشَابِهٍ انْظُرُوا إِلَى ثَمَرِهِ إِذَا أَثْمَرَ وَيَنْعِهِ إِنَّ فِي ذَلِكُمْ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ (٩٩)} الأنعام:٩٥-٩٩

“Ilaaheey waa midka dilaaciya oo dalaga ka soo bixiya mirta iyo lafta timirta, wuxuu noolaha ka soo saaraa ma-noole,ma-noolahana ka keenaa noolaha (sida in insaanka laga abuuro wax aan noolayn oo ah manida), midka sidaas sameeyaa waa Allaah, ee sidee ku dhacday in isaga inta la idinka leexiyo aad cid kale caabudaan.

Waa midka iftiinka subaxa ka dilaaciya mugdiga habeenka,habeenkana ka dhigay waqtiga ay nastaan wax kasta oo socda, kana dhigay qorraxda iyo dayaxa kuwo ku socda wadooyinkooda garangarta oo kale ah iyagoo ku socda xisaab la qorsheeyey oo aan isbedelin, sidaas waxaa sameeyey oo ay maamulkiisa tahay Allaha leh awoodda iyo cilmiga dhamayska tiran.

Waa Ilaaha idinkaga dhigay xidigaha calaamado aad wadada ku aqoonsataan habeenka,waxaan cadaynay xujooyinka iyo daliilada si ay wax ugu qaataan dadka aqoonta leh.

Waa Allaha idin ka abuuray hal qof, idiina sameeyey meel aad ku sugnaataan (ilma galeenka haweenka) iyo meelo la idinku xafido (waa lafaha dhabarka ragga), waxaaan u cadaynay xujooyinka iyo daliilada dadka wax garanaya.

Waa Ilaaha ka keenay daruurta roob, ka dibna ku soo bixiyey wax kasta oo dhulka ka soo dhasha, oo geedahaas ka soo dhaliyey dalag cagaaran, geedaha  la beertana ka soo bixiyey miro isdulsaaran, geed timirka fiidiisana ka soo bixiyey laamo timireed miraysan oo gacantu gaarto, soona dhaliyey beero canab ah, soona bixiyey rumaanka iyo saytuunka oo caleentoodu isku eg tahay,xagga miro ahaantase dhedhen iyo muuqaalba ku kala bedelan, war dadoow fiiriya geedahaas marka ay miraha dhalaan iyo sida ay u bislaadaan marka ay waqtigeeda gaaraan, arrintaas waxaa idinkugu sugan cadaymo tusinaya Ilaaheey awoodiisa, xikmadiisa iyo naxariistiisa kaamilka ah, waxaana sidaas wax ku dheefaya dadka Alle rumaynayaan kuna dhaqmayaan sharcigiisa” (Al ancaam 95-99).

Ilaaheey wuxuu yiri:

{اللَّهُ الَّذِي رَفَعَ السَّمَاوَاتِ بِغَيْرِ عَمَدٍ تَرَوْنَهَا ثُمَّ اسْتَوَى عَلَى الْعَرْشِ وَسَخَّرَ الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ كُلٌّ يَجْرِي لِأَجَلٍ مُسَمًّى يُدَبِّرُ الْأَمْرَ يُفَصِّلُ الْآيَاتِ لَعَلَّكُمْ بِلِقَاءِ رَبِّكُمْ تُوقِنُونَ (٢) وَهُوَ الَّذِي مَدَّ الْأَرْضَ وَجَعَلَ فِيهَا رَوَاسِيَ وَأَنْهَارًا وَمِنْ كُلِّ الثَّمَرَاتِ جَعَلَ فِيهَا زَوْجَيْنِ اثْنَيْنِ يُغْشِي اللَّيْلَ النَّهَارَ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ (٣) وَفِي الْأَرْضِ قِطَعٌ مُتَجَاوِرَاتٌ وَجَنَّاتٌ مِنْ أَعْنَابٍ وَزَرْعٌ وَنَخِيلٌ صِنْوَانٌ وَغَيْرُ صِنْوَانٍ يُسْقَى بِمَاءٍ وَاحِدٍ وَنُفَضِّلُ بَعْضَهَا عَلَى بَعْضٍ فِي الْأُكُلِ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ (٤) } الرعد-٢-٤

“Ilaaheey waa midka awoodiisa awgeed sare u qaaday samada iyada oo aan lahayn tiirar sida aad arkaysaanba, ka dibna wuxuu ka sare maray (si isaga u qalanta) Carshiga, wuxuuna ka dhigay qoraxda iyo dayaxa kuwo loo sakhiray manaaficda iyo waxtarmaadka adoomada, labadooda mid kasta oo ka mid ahi wuxuu ku soconayaa marinkiisa garangarta oo kale ah ilaa laga gaaro qiyaamaha, Ilaaheey wuxuu maamulaa arrimaha aduunyada iyo aakhirada, wuxuuna idiin cadaynayaa cadaymaha tusinaya awoodiisa iyo inuu yahay Allaha kali ah ee cibaadada mudan, si aad u yaqiinsataan la kulanka Ilaaheey.

Waa Allah aka dhigay dhulka mid fidsan, dhexdeedana qotomiyey buuro dheeli-tira, iyo wabiyo aad dheefsataan, kuna dhex beeray miraha oo dhan iyagoo ka kooban labo nooc (sida mid cad iyo mid madoow, mid macaan iyo mid xaraar), waxaa arrimaas ku jira wax lagu waano-qaato oo ay ku waansamaan dadka fekeraya oo maskaxdooda ka shaqaysiinaya.

Dhulka waxaa ku yaalla qaybo dhulka ka mid ah oo isgarab yaalla, oo qaarna ay wanaagsan yihiin waxna ay ka baxaan iyo kuwo aan wanaagsanayn oo aysan waxba ka bixin, dhulka qaybihiisaas wanaagsan beero canab ah, wuxuuna ku beeray dalagyo kala duwan iyo deed timiryo leh hal jirrid iyo kuwo aan hal jirrid lahayn, waxaas oo dhami waxay ku yaalliin hal dhul oo isku mid ah, waxayna cabaan hal biyo laakiin wuxuu ku kala bedelan yahay miraha iyo sida ay dhedhemaan ama inta ay la’eg yihiin, qaarkkod waamacaan yihiin meesha kuwa kale ay dhanaan yihiin, qofkii leh qalbi wax lagu garto wuxuu ka qaadanayaa oo ka faa’iidaysanayaa calaamado” (Al racdi:2-4).

Alle wuxuu yiri:

{ خَلَقَ الإِنْسَانَ مِنْ نُطْفَةٍ فَإِذَا هُوَ خَصِيمٌ مُبِينٌ (4) وَالأَنْعَامَ خَلَقَهَا لَكُمْ فِيهَا دِفْءٌ وَمَنَافِعُ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ (5) وَلَكُمْ
فِيهَا جَمَالٌ حِينَ تُرِيحُونَ وَحِينَ تَسْرَحُونَ (6) وَتَحْمِلُ أَثْقَالَكُمْ إِلَى بَلَدٍ لَمْ تَكُونُوا بَالِغِيهِ إِلَّا بِشِقِّ الْأَنْفُسِ إِنَّ رَبَّكُمْ
لَرَءُوفٌ رَحِيمٌ (7) وَالْخَيْلَ وَالْبِغَالَ وَالْحَمِيرَ لِتَرْكَبُوهَا وَزِينَةً وَيَخْلُقُ مَا لَا تَعْلَمُونَ (8) وَعَلَى اللَّهِ قَصْدُ السَّبِيلِ
وَمِنْهَا جَائِرٌ وَلَوْ شَاءَ لَهَدَاكُمْ أَجْمَعِينَ (9) هُوَ الَّذِي أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً لَكُمْ مِنْهُ شَرَابٌ وَمِنْهُ شَجَرٌ فِيهِ تُسِيمُونَ
(10) يُنْبِتُ لَكُمْ بِهِ الزَّرْعَ وَالزَّيْتُونَ وَالنَّخِيلَ وَالْأَعْنَابَ وَمِنْ كُلِّ الثَّمَرَاتِ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ (11)
وَسَخَّرَ لَكُمُ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ وَالنُّجُومُ مُسَخَّرَاتٌ بِأَمْرِهِ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ (12) وَمَا ذَرَأَ
لَكُمْ فِي الْأَرْضِ مُخْتَلِفًا أَلْوَانُهُ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً لِقَوْمٍ يَذَّكَّرُونَ (13) وَهُوَ الَّذِي سَخَّرَ الْبَحْرَ لِتَأْكُلُوا مِنْهُ لَحْمًا طَرِيًّا
وَتَسْتَخْرِجُوا مِنْهُ حِلْيَةً تَلْبَسُونَهَا وَتَرَى الْفُلْكَ مَوَاخِرَ فِيهِ وَلِتَبْتَغُوا مِنْ فَضْلِهِ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ (14) وَأَلْقَى فِي
الْأَرْضِ رَوَاسِيَ أَنْ تَمِيدَ بِكُمْ وَأَنْهَارًا وَسُبُلًا لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ (15) وَعَلَامَاتٍ وَبِالنَّجْمِ هُمْ يَهْتَدُونَ (16) أَفَمَنْ يَخْلُقُ
كَمَنْ لَا يَخْلُقُ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ (17) وَإِنْ تَعُدُّوا نِعْمَةَ اللَّهِ لَا تُحْصُوهَا إِنَّ اللَّهَ لَغَفُورٌ رَحِيمٌ (18) } النحل:18-3

“Ilaaheey wuxuu xikmadiisa ku abuuray cirka iyo dhulka, waxaan ka abuurnay insaanka, wuxuuna Alle ka sarreeyaa wax kasta oo ay la wadaajiyaan.

Wuxuu insaanka ka abuuray mani, ka dibna wuxuu noqonayaa mid dood badan oo ay doodiisu daran tahay.

Alle wuxuu idiin abuuray nicmoolayda, waxaadna ka heshaan dugaal (marka la sancadeeyo dhogortooda) iyo manaaficaad kale, waadna cuntaan.

Waxaad ka heshaan nicmoolaydaas qurux marka aad carraabinaysaan iyo marka aad foofinaysaan.

Waxay idiin qaaddaa waxyaabaha culus iyadoo idiin geynaysa dhul aadnaan gaari karin inaan dhib badan ka martaan ma ahane, Rabbigiinu waa waa mid idiin tura oo idiin naxariista.

Wuxuu idiin abuuray fardaha, baqlaha iyodameeraha si aad u gaadiidsataan iyo inay idiin noqdaan kuwo aad ka heshaan arag wanaagsan,wuxuuna idiin abuuri doonaa waxyaabo kale oo aad gaadiidsataan (sida baabuurta,diyaaradaha iwm) oo aadnan ogayn.

Ilaaheey waxaa laga rabaa inuu cadeeyo wadada toosan si aad ugu hanuuntaan (waana islaamka), wadooyinkana waxaa ku jira kuwo qaloocan, haddii uu Eebbe rabi lahaa inuu idin wada hanuuniyo waa idin wada hanuunin lahaa.

Waa Ilaaha samada kakeenay roobka aad cabtaan oo daaqa aad xoolaha daaqsataana uu idinkugu soo baxo.

Wuxuu idiin soo bixiyaa abuurka,saytuunka, geedaha timirta iyo kuwa canabka iyo miraha kala duwan dhamaantood, sidaas loo soo bixiyey waxyaabahaasna waxaa ay ka kala soo dhexbaxayaan dadka fekerayaa caddaymo muuqda oo tusinaya Ilaaheey awoodiisa iyo naxariistiisa.

Wuxuu idiin sakhiray habeenka iyo maalinta, qorraxda iyo dayaxa, xidiguhuna waa kuwo la idiinkugu sakhiray amarka Ilaaheey, sakhidaasna waxaa ku sugan cadaymo muuqda oo ka helayaan dadka caqliga lahi.

Waxaa kale oo uu idiin sakhiray wxii uu idiin abuuray oo dhulka ku sugan sida xoolaha macdanta, miraha iwm iyadoo midabyadoodu kala bedelan yihiin, kala bedelnaashahaas waxaa ugu sugan dadka waansamaya wax lagu cibroqaato.

Waa Allihii idiin sakhiray badda si aad ugala soo baxdaan hilib ceeriin ah, aadna kala soo baxdaan wax laisku qurxiyo oo la xirto sida luulka iwm, waxaad arkaysaa in maraakiibtu ay muquurayso badda dhexdeeda si aad risqiga Ilaaheey ugu raadsataan (xagga ganacsiga) iyo inaad Alle ku shukridaan.

Wuxuu dhulka qotomiyey buuro si aysan idiinla dheelin, wuxuuna dhexmariyey wabiyo iyo wadooyin si aad ugu hanuuntaan meelihii aad u socoteen.

Wuxuu dhulka idinkugu sameeyey waxyaabo aad wax ku aqoonsataan oo aad maalintii ku ogaataan wadooyinka, habeenkiina waxay dadku xidigaha ku aqoonsanayaan wadooyinka iyo meesha ay u socdaan.

Allaha wax abuuraahi ma wuxuu la mid yahay axad aan waxba abuurin ee ma waadnan waansamayn oo aadnangarqadanayn.

Haddii aad tiridaan nicmooyinka Ilaaheey ma aad soo koobi karaysaan, Allena waa mid dembidhaaf  iyo naxariis badan”(Al naxli:3-18).

Ilaaheey waxaa kale oo uu yiri:

{ وَلَقَدْ خَلَقْنَا الإِنْسَانَ مِنْ سُلالَةٍ مِنْ طِينٍ (١٢) ثُمَّ جَعَلْنَاهُ نُطْفَةً فِي قَرَارٍ مَكِينٍ (١٣) ثُمَّ خَلَقْنَا النُّطْفَةَ عَلَقَةً
فَخَلَقْنَا الْعَلَقَةَ مُضْغَةً فَخَلَقْنَا الْمُضْغَةَ عِظَامًا فَكَسَوْنَا الْعِظَامَ لَحْمًا ثُمَّ أَنْشَأْنَاهُ خَلْقًا آخَرَ فَتَبَارَكَ اللَّهُ أَحْسَنُ الْخَالِقِينَ
(١٤) ثُمَّ إِنَّكُمْ بَعْدَ ذَلِكَ لَمَيِّتُونَ (١٥) ثُمَّ إِنَّكُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ تُبْعَثُونَ (١٦) وَلَقَدْ خَلَقْنَا فَوْقَكُمْ سَبْعَ طَرَائِقَ وَمَا كُنَّا
عَنِ الْخَلْقِ غَافِلِينَ (١٧) وَأَنْزَلْنَا مِنَ السَّمَاءِ مَاءً بِقَدَرٍ فَأَسْكَنَّاهُ فِي الْأَرْضِ وَإِنَّا عَلَى ذَهَابٍ بِهِ لَقَادِرُونَ (١٨)
فَأَنْشَأْنَا لَكُمْ بِهِ جَنَّاتٍ مِنْ نَخِيلٍ وَأَعْنَابٍ لَكُمْ فِيهَا فَوَاكِهُ كَثِيرَةٌ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ (١٩) وَعَلَيْهَا وَعَلَى الْفُلْكِ تُحْمَلُونَ
(٢٢)} المؤمنون:١١-٢٢

“Waxaan Aadam ka abuurnay ciid laga soo qaaday dhulka oo dhan, ka dibna waxan ka dhignay ilmihiisa kuwo ku tarma manida oo ku sugnaata ilma-galeenka haweenka, ka dibna waxaan manidii ka dhignay dhiig gaduudan oo sida xinjir oo kale ah, dhiigaasna waxaan ka dhignay cad hilib ah,cadkaasna waxan u yeelnay lafo, lafihiina waxan huwinay hilib, ka dibna waxan ka dhignay khalqi kale maadaama naf la geliyey, waxaa khayrkiisu badan yahay Allaha ugu wanaagsan inta wax qorshaysa,dadoow nolosha heerarkeeda kadib waad dhimanaysaan, qiyaamahana waa la idin soo bixinayaa.

Waxaan korkiina yeelnay todobo samo, mana nihin kuwo moog cid khalqiga ka mid ah.

Waxan daruurta  ka keenay biyo la’eg inta ay la’eg tahay baahida khalqigu,waxana aan biyahaas dhexdhignay dhulka, waana awoodnaa in-aan biyahaas baabi’ino.

Waxaan biyahaas idiinkugu abuurnay beero ay ka baxaan geed-tirada, canabka, waxaa idiinkaga baxa beerahaas furuutis (fakiho) kala duwanoo badan oo aad cuntaan.

Waxaan idiinkugu soo bixinay biyahaas geedaha saytuunka oo ka baxda hareeraha buurta Siinaa, saytuukaas oo laga shiido saliid laga dhigto iidan, korkana aad ku subkataan.

War dadoow, nicmoolaydu waa wax abuuristeedu ay tahay wax lagu cibro qaato, waxaan caanaha ku jira ayaan idin ku waraabinaa, waxaadna ka heshaan faa’iidooyin badan, waadna qalataan.

Waxaadna racdan oo aad gaadiid ka dhigataan xoolaha iyomaraakiibta” (Almu’minuun:11-22).

Alle wuxuu yiri:

{ أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ يُزْجِي سَحَابًا ثُمَّ يُؤَلِّفُ بَيْنَهُ ثُمَّ يَجْعَلُهُ رُكَامًا فَتَرَى الْوَدْقَ يَخْرُجُ مِنْ خِلالِهِ وَيُنَزِّلُ مِنَ السَّمَاءِ مِنْ جِبَالٍ فِيهَا مِنْ بَرَدٍ فَيُصِيبُ بِهِ مَنْ يَشَاءُ وَيَصْرِفُهُ عَنْ مَنْ يَشَاءُ يَكَادُ سَنَا بَرْقِهِ يَذْهَبُ بِالأَبْصَارِ (٤٣) يُقَلِّبُ اللَّهُ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَعِبْرَةً لِأُولِي الْأَبْصَارِ (٤٤) وَاللَّهُ خَلَقَ كُلَّ دَابَّةٍ مِنْ مَاءٍ فَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى بَطْنِهِ وَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى رِجْلَيْنِ وَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى أَرْبَعٍ يَخْلُقُ اللَّهُ مَا يَشَاءُ إِنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ (٤٥) } النور:٤٣-٤٥.

“ Ma waadan arkin in Ilaaheey uu daruuraha u kaxaynayo meesha uu rabo, ka dibna uu isku keenayo kuwa kala tagsan, dbdeedna uu k aka dhigayo mid karuuran oo isdulsaaran, oo markaas uu roobku ka soo baxayo daru-urahaa dhexdooda, wuxuuna ka soo daadinayaa daruurahaas aad moodo buuraha [sida ay u wayn yihiin awgeed] baraf yar yar oo sida quruuraxa oo kale ah, oo uu Alle ku di’inayo ciddii uu rabo, uuna seejinayo ciddii uu rabo, hillaaca ka imaanaya daruurahaasi maadaama uu awood badan ya-hay wuxuu ku siganayaa inuu aragga ka qaado dadka fiirinaya.

Waxyaabaha tusinaya awoodda Alle waxaa ka mid ah gedgedinta habeen-ka iyo maalinta, waxaana arrintaas ku jira wax lagu cibro qaato.

Wax kasta oodhulka ku socda waxaa uu Ilaaheey ka abuuray biyo, waxaa ku jira kuwo xamaarta, kuwo labo lugood ku socda, kuwo afar lugood ku socda, Alle wuxuu abuuraa waxa uu rabo, wax kastana wuu awoodaa” (Al nuur:43-45).

Rabbi wuxuu yiri:

{ أَلَمْ تَرَ إِلَى رَبِّكَ كَيْفَ مَدَّ الظِّلَّ وَلَوْ شَاءَ لَجَعَلَهُ سَاكِنًا ثُمَّ جَعَلْنَا الشَّمْسَ عَلَيْهِ دَلِيلا (٤٥) ثُمَّ قَبَضْنَاهُ إِلَيْنَا قَبْضًا يَسِيرًا (٤٦) وَهُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ اللَّيْلَ لِبَاسًا وَالنَّوْمَ سُبَاتًا وَجَعَلَ النَّهَارَ نُشُورًا (٤٧) وَهُوَ الَّذِي أَرْسَلَ الرِّيَاحَ بُشْرًا بَيْنَ يَدَيْ رَحْمَتِهِ وَأَنْزَلْنَا مِنَ السَّمَاءِ مَاءً طَهُورًا (٤٨) لِنُحْيِيَ بِهِ بَلْدَةً مَيْتًا وَنُسْقِيَهُ مِمَّا خَلَقْنَا أَنْعَامًا وَأَنَاسِيَّ كَثِيرًا (٤٩) وَلَقَدْ صَرَّفْنَاهُ بَيْنَهُمْ لِيَذَّكَّرُوا فَأَبَى أَكْثَرُ النَّاسِ إِلَّا كُفُورًا (٥٠) وَلَوْ شِئْنَا لَبَعَثْنَا فِي كُلِّ قَرْيَةٍ نَذِيرًا (٥١) فَلَا تُطِعِ الْكَافِرِينَ وَجَاهِدْهُمْ بِهِ جِهَادًا كَبِيرًا (٥٢) وَهُوَ الَّذِي مَرَجَ الْبَحْرَيْنِ هَذَا عَذْبٌ فُرَاتٌ وَهَذَا مِلْحٌ أُجَاجٌ وَجَعَلَ بَيْنَهُمَا بَرْزَخًا وَحِجْرًا مَحْجُورًا (٥٣) وَهُوَ الَّذِي خَلَقَ مِنَ الْمَاءِ بَشَرًا فَجَعَلَهُ نَسَبًا وَصِهْرًا وَكَانَ رَبُّكَ قَدِيرًا (٥٤) } الفرقان:٤٥-٥٤.

“Ma waadan fiirin sida Rabbigaa uu badiyey hooska, haddii uu rabo wuxuu ka dhigikarey mid taagan (sugan) oo aan badanayn yaraanayna, ka dibna qorraxda ayaan waxaan ka dhignay calaamad lagu garto hooska, dabadeedna hooskii tartiib tartiib ayuu u soo yaraaday.

Ilaaheey waa midka habeenka idin kaga dhigay mid idin astura sida dharka oo kale,  hurdadana idin kaga dhigay mid ay uu jirkiinu ku nasto, maalintana idin kaga dhigay waqti aad nolosha raadsataan.

Waa Allihii soo diray dabaylaha sida daruuraha iyagoo dadkaugu bishaaraynaya roob oo ah naxariis Eebbe ka timid, cirkana waxan ka keenay biyo wax daahiriya; si aan ugu noolayno oo doog ufa soo bixino dhul dhintay oo aysan waxba kuoollin, biyahaasna aan ku waraabino khalqi fara badan oo dad iyo duunyo leh.

Roobkaas waxaan ku di’inay dhulalka qaarkood iyadoo laga daystey kuwo kale, si ay u shukriyaan qoladii la siiyey, kuwii loo diidayna ay xasuustaan gefka ay galeen oo ay markaa toobad keenaan, dadka intooda badanina way diideen inay ku shukriyaan nicmada la siiyey.

Haddii aan rabo waxaan magaalo walba u diri lahayn qof diinta Ilaaheey ugu yeera, cadaabtiisana uga diga, laakiin rasuulkoow adiga ayaan kuu dirnay dadka iyo jinniga oo dhan ee gaalada ha adeecin, quraankaana kula jihaad gaalada si uusan daal ku jirin.

Ilaaheey waa midka isku keenay badda macaan iyo midda dhanaan,una dhexmariyey wax mid walba ka celiya inuu fasahaadiyo midka kale oo ka celiya inay isku darsamaan.

Waa Allaha biyaha ka abuuray basharka (rag iyo dumar), halkaasna waxaa ka dhashay xiriir ku salaysan qaraabanimoiyo mid ku salaysam xididnimo, Ilaahayna waa mid awooda inuu abuuro waxa uu rabo” (Al furqaan: 43-45).

{ فَسُبْحَانَ اللَّهِ حِينَ تُمْسُونَ وَحِينَ تُصْبِحُونَ (١٧) وَلَهُ الْحَمْدُ فِي السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضِ وَعَشِيًّا وَحِينَ تُظْهِرُونَ
(١٨) يُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَيُخْرِجُ الْمَيِّتَ مِنَ الْحَيِّ وَيُحْيِي الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا وَكَذَلِكَ تُخْرَجُونَ (١٩) وَمِنْ
آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَكُمْ مِنْ تُرَابٍ ثُمَّ إِذَا أَنْتُمْ بَشَرٌ تَنْتَشِرُونَ (٢٠) وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا لِتَسْكُنُوا
إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُمْ مَوَدَّةً وَرَحْمَةً إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ (٢١) وَمِنْ آيَاتِهِ خَلْقُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ
وَاخْتِلَافُ أَلْسِنَتِكُمْ وَأَلْوَانِكُمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِلْعَالِمِينَ (٢٢) وَمِنْ آيَاتِهِ مَنَامُكُمْ بِاللَّيْلِ وَالنَّهَارِ وَابْتِغَاؤُكُمْ مِنْ
فَضْلِهِ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَسْمَعُونَ (٢٣) وَمِنْ آيَاتِهِ يُرِيكُمُ الْبَرْقَ خَوْفًا وَطَمَعًا وَيُنَزِّلُ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً
فَيُحْيِي بِهِ الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ (٢٤) وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ تَقُومَ السَّمَاءُ وَالْأَرْضُ بِأَمْرِهِ
ثُمَّ إِذَا دَعَاكُمْ دَعْوَةً مِنَ الْأَرْضِ إِذَا أَنْتُمْ تَخْرُجُونَ (٢٥) وَلَهُ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ كُلٌّ لَهُ قَانِتُونَ (٢٦)
وَهُوَ الَّذِي يَبْدَأُ الْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُ وَهُوَ أَهْوَنُ عَلَيْهِ وَلَهُ الْمَثَلُ الْأَعْلَى فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ
(٢٧) } الروم:١٧-٢٧.

"Mu'miniineey, Ilaaheey ka nazaha xumaan oo dhan, kuna sifeeya kamaamilnimo dhamaanteed, marka aad subaxda gashan, marka aad galabta gashaan, waqtiga duhurka iyo gelinka dambeba, Alle ayaana amaan dhamaanteed ku leh cirka iyo dhulkaba.

Wuxuu wax manoole ah ka soo saaraa wax noole (sida dadka oolaga abuuray mani, shimbiraha oo laga abuuray ukunta) wuxuu wax noole ahna ka dhaliyaa wax manoole ah (sida manida oo ka timaad insaanka) dhulkana wuxuu ku nooleeyaa daaq uu ka soo bixiyo ka dib marka ay abaartuqalajiso, sida kuwaas loo soo nooleeyo oo kale ayaa idinkana la idiin soo noolaynayaa oo la idinkaga soo saarayaa qabriyadiina si la idiin xisaabiyo.

Waxyaabaha tusinaya waynaanta Alle waxaa ka mid ah inuu aabihiin Aadam uu ka abuuray ciid, dabadiisna aad adinku tihiin kuwo dhulka ku badanaya oo raadsanaya fadliga Ilaaheey.

Waxaa ka mid ah waxyaabaha tusinaya Alle dhamaystirnaanta awoodiisa inuu daraadiin idiinkugu abuuray lamaane aad isla banii'aadam tihiin, si ay naftiinu aysan uga didin ee ay ugu xasisho, wuxuuna dhexdhigay ninka iyo xaaskiisa jeclaan iyo isku turid, arrinkas waxaa ku sugan calaamado tusinaya awoodda Ilaaheey iyo mid ahaantiisa, waxayna sidaasi ugu sugan tahay dadka fekeraya.

Awoodiisa waxyaabaha tusiya waxaa ka mid abuurista cirka iyo dhulka, iyo kala bedelnaanta oogadiina iyo luuqadihiina, qof kasta oo cilmi leh wuxuu arrintaas ka qaadanayaa cibroqaadasho.

Awoodiisa waxyaabaha tusiya waxaa ka mid inuu hurdada idinkaga dhigay mid aad ku nasataan oo aad ku daalgoysaan habeenkii ama maalin-

tii, maalintana uu idinkaga dhigay waqti aad raadsataan risqiga Ilaaheey, arrintaas waxaa ku sugan waxyaabo tusinaya awoodda Alle sida ay u dhamaystiran tahay, waxayna arrintaasi ugu sugan tahay dadka maqla oo ka fekera waxa lagu waaninayo.

Waxyaabaha tusiya Alle awoodiisa waxaa ka mid ah inuu idin tusiyo hilaaca, oo markaas aad ka cabsataan biriqda, roobkana aad rajaysaan, daruurtana wuxuu ka soo di'iyaa roob, markaas ayuu ku nooleeyaa dhulka ka dib markii uu abaarsaday oo uu dhintay, arrintaasi waxay tusinaysaa qof kasta qof kasta oo caqli leh sida ay u dhamaystiran tahay awoodda Rabbi iyo sida ixsaankiisu uu u wayn yahay.

Waxaa ka mid ah calaamadaha tusinaya awoodda Alle in dhulka iyo cirku ay sugan yihiin maadaama uu Ilaaheey sidaas amray, marka uu aakhiro idiin yeerana waxaad ka soo baxaysiin qabriyada idinka oo degdegaya.

Ilaaheey kaligiis ayaa leh wax walba oo ku jira cirka iyo dhulka, iyaga oo dhamina waxay u hogaansan yihiin Ilaaheey.

Waa Allaha kaligiis uunkaan ka soo bilaabay waxaan jirin, soona celinaya dhimashada ka dib isaga oo nool, khalqiga in la soo celiyo isaga oo nool ayaa ka fudud in abuuristiisa la bilaabo, tilmaan walba oo lagu tilmaamana wuxuu leeyahay heerkeeda ugu sarreeya, waa Alle aan lagu awood dhamayn oo xikmad badan" (Al ruum:17-27).

{الرَّحْمَنُ (١) عَلَّمَ الْقُرْآنَ (٢) خَلَقَ الْإِنْسَانَ (٣) عَلَّمَهُ الْبَيَانَ (٤) الشَّمْسُ وَالْقَمَرُ بِحُسْبَانٍ (٥) وَالنَّجْمُ
وَالشَّجَرُ يَسْجُدَانِ (٦) وَالسَّمَاءَ رَفَعَهَا وَوَضَعَ الْمِيزَانَ (٧) أَلَّا تَطْغَوْا فِي الْمِيزَانِ (٨) وَأَقِيمُوا الْوَزْنَ بِالْقِسْطِ
وَلَا تُخْسِرُوا الْمِيزَانَ (٩) وَالْأَرْضَ وَضَعَهَا لِلْأَنَامِ (١٠) فِيهَا فَاكِهَةٌ وَالنَّخْلُ ذَاتُ الْأَكْمَامِ (١١) وَالْحَبُّ ذُو
الْعَصْفِ وَالرَّيْحَانُ (١٢) فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ (١٣) خَلَقَ الْإِنْسَانَ مِنْ صَلْصَالٍ كَالْفَخَّارِ (١٤) وَخَلَقَ
الْجَانَّ مِنْ مَارِجٍ مِنْ نَارٍ (١٥) فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ (١٦) رَبُّ الْمَشْرِقَيْنِ وَرَبُّ الْمَغْرِبَيْنِ (١٧) فَبِأَيِّ آلَاءِ
رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ (١٨) مَرَجَ الْبَحْرَيْنِ يَلْتَقِيَانِ (١٩) بَيْنَهُمَا بَرْزَخٌ لَا يَبْغِيَانِ (٢٠) فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ (٢١)
يَخْرُجُ مِنْهُمَا اللُّؤْلُؤُ وَالْمَرْجَانُ (٢٢) فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ (٢٣) وَلَهُ الْجَوَارِ الْمُنْشَآتُ فِي الْبَحْرِ كَالْأَعْلَامِ
(٢٤) فَبِأَيِّ آلَاءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ (٢٥) } الرحمن:١-٢٥

"Allaha Raxmaanka ah ayaa dadka baray Qur'aanka. Insaanka ayuu abuuray, wuxuuna baray sidii uu u hadli lahaa oo u caddayn lahaa waxa maskaxdiisa ku jira. Qoraxda iyo dayaxu way isweydaarsadaan iyaga oo ku socda xisaab sugan oo aan marnaba qaldamaynin. Xidiga samada ku yaalla iyo geeduhuba way yaqaaniin rabbigooda wayna u sujuudaan. Samada wuxuu ka sare mariyey dhulka oo kor ayuu u qaaday, dhulkana wuxuu

dhigay cadaaladii uu adoomaiisa amray uuna u sharciyeeyey, si aadnaan ugu xadgudbin oo aadnan u khiyaamin dadka aad wax u miisaamaysaan, ee si cadaalad ah wax u miisaama, dadkana wax ha ka nusqaaminina marka aad wax u miisaamaysaan.

Dhulkana wuxuu u dhigay oo u goglay si dadku ugu sugnaadaan, waxaa ka baxa faakiho (furuutis) iyo geed timir yaalo leh dahaar ay miruhu ugu dhexjiraan, waxaa dhulka ka baxa miraha (sida galeeyda, mesegada iwm) oo leh gal ay miruhu ugu dhex jiraan, waxaa kale oo ka baxa geed kasta oo udug wanaagsan leh, ee dad iyo jiniyoow, midee ayaad beeninaysaan oo ka mid ah nicmooyinkaas Alle.

Ilaaheey wuxuu ka abuuray aabihii insaanka dhoobo qalalan oo la mid ah mida jilayga, aashuunka iwm, Ibliisna wuxuu ka abuuray holaca naarta oo isku darsan, ee dad iyo jiniyoow, midee ayaad beeninaysaan oo ka mid ah nicmooyinkaas Alle.

Waa Rabbiga labada meelood ee ay qoraxdu ka soo baxdo waqtiga kulay-laha iyo waqtiga qaboobaha,iyo Rabbiga labada meelood ee ay qoraxdu u dhacdo, ee dad iyo jiniyoow, midee ayaad beeninaysaan oo ka mid ah nicmooyinkaas Alle.

Waa Allaha isku keenay labada badood, midda dhanaan iyo midda macaan, dhexdoodana waxaa yaalla teed iyo wax kala celiya oo sidas awgeed mid-koodna midka kale kuma soo xadgudbi karo oo dhadhanka kama qaadi karo, ee dad iyo jiniyoow, midee ayaad beeninaysaan oo ka mid ah nic-mooyinkaas Alle.

Labadaas badood waxaa kazoo baxa luulka iyo murjaanka, ee dad iyo jini-yoow, midee ayaad beeninaysaan oo ka mid ah nicmooyinkaas Alle.

Ilaaheey isaga ayaa iska leh maraakiibta badda socota iyada oo sidda wax manfaco u leh dadka, iyadoo ay u taagan yihiin shiraacyadu iyagoo aad moodo buuro” (AL raxmaan:1-25).

Ilaaheey wuxuu yiri:

{أَلَمْ نَجْعَلِ الأَرْضَ مِهَادًا (٦) وَالْجِبَالَ أَوْتَادًا (٧) وَخَلَقْنَاكُمْ أَزْوَاجًا (٨) وَجَعَلْنَا نَوْمَكُمْ سُبَاتًا (٩) وَجَعَلْنَا اللَّيْلَ لِبَاسًا (١٠) وَجَعَلْنَا النَّهَارَ مَعَاشًا (١١) وَبَنَيْنَا فَوْقَكُمْ سَبْعًا شِدَادًا (١٢) وَجَعَلْنَا سِرَاجًا وَهَّاجًا (١٣) وَأَنْزَلْنَا مِنَ الْمُعْصِرَاتِ مَاءً ثَجَّاجًا (١٤) لِنُخْرِجَ بِهِ حَبًّا وَنَبَاتًا (١٥) وَجَنَّاتٍ أَلْفَافًا (١٦) } النبأ:٦-١٦

"Ma waanan dhulka idin kaga dhigin mid la idiin goglay sida firaash oo kale, buurahana ma waanan idin kaga dhigin kuwa dhula ku qotoma si aysan u dheeldheelin, ma waanan idinka dhigin kuwo kala duwan (rag iyo dumar), ma waanan hurdadiina ka dhigin mid lagu daalbeelo, ma waanan habeenka ka dhigin mid idin astura sida dhar oo kale, ma waanan maalinta idin kaga dhigin mid aad raadsataan maslaxadiina iyo nolol-maalmeedkiina, ma waanan dushiina ka dhisin todobo samo, ma waanan qorraxda idin kaga dhigin mid aad u iftiimaya, ma waanan ka dhigin daruuraha roobka sida kuwo soo daaya biyo shubmaya si aan ugu soo bixino miraha dadku quutaan iyo daaqa ay duunyadu ku noolaato, oo aan kubixino beero ay isku mareegsan yihiin laamahoodu" (Al naba':6-16).

Alle waxaa kale oo uu yiri:

{ أَأَنْتُمْ أَشَدُّ خَلْقًا أَمِ السَّمَاءُ بَنَاهَا (٢٧) رَفَعَ سَمْكَهَا فَسَوَّاهَا (٢٨) وَأَغْطَشَ لَيْلَهَا وَأَخْرَجَ ضُحَاهَا (٢٩) وَالأَرْضَ بَعْدَ ذَلِكَ دَحَاهَا (٣٠) أَخْرَجَ مِنْهَا مَاءَهَا وَمَرْعَاهَا (٣١) وَالْجِبَالَ أَرْسَاهَا (٣٢) مَتَاعًا لَكُمْ وَلأَنْعَامِكُمْ (٣٣) } النازعات:٢٧-٣٣.

"Ma soo bixintiina aakhiro ayaa dhib badan sida ay idinla tahay mise waxaa dhib badan abuurista samada? Alle korkiina ayuu ka dhisay samada sida dhisme oo kale, saqafkeeda sare ayuu u qaaday iyada oo aan lahayn wax dalool ama dildilaac ah, qoraxda dhacitaankeeda awgeed ayuu wuxuu ka dhigay habeenkeeda mid mugdi ah, qorraxda soo bixitaankeed awgeedna wuxuu ku soo saaraa maalinteeda, markii uu cirka abuuray ka dibna wuxuu goglay dhulka, wuxuuna ku dhex abuuray dheefteeda oo dhan, wuxuuna ka dilaaciyey ilo biyood, wuxuuna ka soo dhaliyey daaqeedii, wuxuu ku dheelitiray buuraha oo uu ku qotomiyey, nicmooyinkaas oo dhan wuxuu u abuuray si aad ugu nafcisaan adinka iyo xoolihiinu" (Al naazicaat:27-33).

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ فَلْيَنْظُرِ الإِنْسَانُ إِلَى طَعَامِهِ (٢٤) أَنَّا صَبَبْنَا الْمَاءَ صَبًّا (٢٥) ثُمَّ شَقَقْنَا الأَرْضَ شَقًّا (٢٦) فَأَنْبَتْنَا فِيهَا حَبًّا (٢٧) وَعِنَبًا وَقَضْبًا (٢٨) وَزَيْتُونًا وَنَخْلا (٢٩) وَحَدَائِقَ غُلْبًا (٣٠) وَفَاكِهَةً وَأَبًّا (٣١) مَتَاعًا لَكُمْ وَلأَنْعَامِكُمْ (٣٢) } عبس ٢٤-٣٢

“si fiican ha uga fekero insanku raashinka uu cuno sida uu Alle u abuuray, innaga ayaa biyaha ku shubnay dhulka,ka dibna dhulka Ayaan ka soo dilaacinay wixii ka soo dhalanayey, waxaana aan ka soo bixinay miraha la quuto, canab iyo raashin-xoolaad, saytuun iyo geed timir iyo beero leh geedo waawayn, faakiho (furuutis) iyo daaq-xoolaad ay ku nafcinayaan idinku iyo xoolihiinuba” (Cabasa:24-32).

Banii’aadamka xoogoodu (si guud) way qirsan yihiin Ilaaheey inuu Rabbigooda yahay, isagu inuu yahay Allaha wax walba abuuray, milkiyey oo maamula wax walba, xataa mushrikiintii carbeed way qirsanaayeen, Ilaaheey dhawr meelood ayuu uga sheekeeyey qirsanaantoodaas, waxaana ka mid inuu Eebbe wayne uu yiri:

{ قُلْ لِمَنِ الأَرْضُ وَمَنْ فِيهَا إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ (٨٤) سَيَقُولُونَ لِلَّهِ قُلْ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ (٨٥) قُلْ مَنْ رَبُّ السَّمَاوَاتِ السَّبْعِ وَرَبُّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ (٨٦) سَيَقُولُونَ لِلَّهِ قُلْ أَفَلَا تَتَّقُونَ (٨٧) قُلْ مَنْ بِيَدِهِ مَلَكُوتُ كُلِّ شَيْءٍ وَهُوَ يُجِيرُ وَلَا يُجَارُ عَلَيْهِ إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ (٨٨) سَيَقُولُونَ لِلَّهِ قُلْ فَأَنَّى تُسْحَرُونَ (٨٩) } المؤمنون:٨٤-٨٩

“Waxaad ku tiraahdaa yaa iska leh dhulkaan iyo waxa ku dhexjira hadii wax cilmi ah uleedihiin? Waxay dhihi doonaan Allaah, waxaad ku tiraahdaa maad sidaas ku xasuusataan inuu awoodo inuu aakhiro idin soo bixiyo. Waxaad ku tiraahdaa rabbi u ah cirka iyo carshiga waynba, waxay ku dhihi doonaan Ilaaheey, ee markaa waxaad ku tiraahda maad ciqaabtiisa ka gaashaamataan. Waxaad ku tiraahda: yaa milkiyey wax walba oo magan geliya ciddii magangelyo waydiisata,uusana qofna awoodin inuu magangeliyo ciddii uu halaagi rabo, haddii ad tihiin kuwo wax og, waxay dhihi doonaan Allaah, waxaad ku tiraahdaa sidee la idin kaga leexiyey tawxiidkiisa iyo adeecidiisa” (Al mu’minuun:84-89).

Waxaa kale oo Alle yiri:

{ وَلَئِنْ سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضَ لَيَقُولُنَّ خَلَقَهُنَّ الْعَزِيزُ الْعَلِيمُ (٩) } الزخرف:٩

“Haddii ay waydiiso: yaa abuuray cirka iyo dhulka waxay dhahayaan waxaa abuuray Allaha awoodda iyo cilimiga dhamaystiran leh” (Al zukhruf:9).

Waxaa arrintaan ah Rabinimada Ilaaheey garab maray oo ka lumay dadyoow kala duwan oo Rabbinimada ku sifeeyeen cid aan Alle ahayn, sida:

1.*Al thanawiyatu* oo ka mid ah kuwa dabka caabuda iyo *Almaanawiyatu*: waa qolooyin yiraahdiin in caalamku leeyahay laba ilaah, ilaaha nuurka oo isagu abuura khayrka iyo ilaaha mugdiga oo isagu abuura sharta. Waxay

labada qolaba isku raacsan yihiin in ilaaha nuurku uu kakhayr badan yahay midkamugdiga, laakiin waxay isku qabteen in ilaaha mugdigu uu yahay ilaah qadiim ah iyo inuu waa-dambe soo biiray.

2. Nasaarada (kirishtaanka): oo iyagu yiraahdaan saddex ilaah ayaa jirta, halka ilaah ayey waxay ka dhigaan ( sida ay ku andacoodaan) saddex qofood oo kala ah:aabaha, wiilka iyo ruuxul-qudsi.

Laakiin caalamka uma aysan yeelin saddex Rabbi oo abuureen oo kala soocan oo waxay cadaynayaan in caalamku leeyahay hal Ilaah oo abuuray.

3.Mushrikiinta carabta oo iyagu citiqaadsanaayeen in Ilaahyadoodu ay wax tari karaan waxna dhibi karaan, maamulka uunkana ay saamayn ku leeyihiin.

4. Qadariyadda diidan in Alle uu wax walba abuuro: waxay yiraahdaan in adoonku uu isagu abuuro wax kasta oo naftiisu samaynayso,iyadoo abuuristaasi ay tahay mid ka madax-banaan Ilaaheey.

Waxyaabahaas wada baadida ah waxaa diidaya oo ka hor-imaanaya fitrada, caqliga, dareenka (xissiga) iyo sharciga ,intaa oo tusayaan inuu Alle kaligiis uu leeyahay abuurista,mulkiga iyo amarkaba. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ مَا اتَّخَذَ اللَّهُ مِنْ وَلَدٍ وَمَا كَانَ مَعَهُ مِنْ إِلَهٍ إِذًا لَذَهَبَ كُلُّ إِلَهٍ بِمَا خَلَقَ وَلَعَلا بَعْضُهُمْ عَلَى بَعْضٍ سُبْحَانَ اللَّهِ عَمَّا يَصِفُونَ (٩١) } المؤمنون:٩١

“Ilaaheey ma uusan yeelan ilmo, mana jiro ilaah kale oo isna jira, haddii ay sidasi jiri lahayd waxaa ilaah walbaaba gaar u soocan lahaa wixii uu abuuray,  waxaana ka dhexdhici lahaa isqabsi waxaana halkaas khalkhal uu soo gaari lahaa nidaamka adduunka, Ilaaheey wuu ka nasahan yahay oo ka fog yahay waxa ay ku tilmaamayaan oo ah inuu ilmo ama cid kale oo wax la wadaagtaahi ay jirto” (Al mu’minuun:91).

Ilaaha xaqqa ahi waa inuu noqdaa midka isagu wax abuura, sameeyana waxa uu rabo. Haddii uu jiri lahaa qof wax la wadaaga wax ayuu abuuri lahaa,wuxuuna samayn lahaa waxa uu rabo, hadii ay sidaasi dhacdana laba arrimood ayaa midkood dhici lahaa:

b) In ilaah walbaaba uu gaar u qaato wixii uu abuuray, haldhinacna uu marsado inta uu ka taliyo: sidaasna waxaa diidaya sida uu isugu xiran yahay caalamku.

t) In uu labadooda dhexmaro isqabsi iyo dagaal: oo haddii midkood uu rabo inuu sheey dhaqaajiyo, midka kalena uu rabo inuusan dhaqdhaqaaqin, ama midkood uu rabo inuu nooleeyo sheey, midka kalena uu rabo inuu nafta ka qaado.Markaas waxay arrintu noqonaysaa saddex arrimood midood:

-in mid walbaaba uu gaaro wixii uu rabey.

-in midkood uu gaaro wixii uu rabey.

-in midkoodna uusan gaarin muraadkiisii.

Midka hore iyo kan sadexaad suurtogal ma ahan, sababtoo ah way iska soo horjeedaan, oo ma ay dhici karto inay wada dhacaan ama wada dhici waayayaan, waxaa sidaas awgeed soo haraya midka labaad, midkii dantiisu ay fusho ayaana ah ilaaha awoodda leh, kan kalena ma galo ilaahnimo. Sidaas awgeed arrintu ku soo biyo-shubatay inuu jiro Rabbi kaligiis ah, wax-abuure kaligiis ah, maamule iyo milkiile kaligiis ah.

**Rumaynta Illahnimadiisa**: oo ah in si aan labolabayn ahayn loo citiqaadiyo in Alle kaligiis uu yahay ilaaha xaqqa ah oo mudan in la caabudo iyada oo aan cid kale la caabudaynin.

Macnaha (ilaah): waxaa laga wadaa midka la caabudo oo ay quluubtu ay caabudo iyadoo jecel oo waynaynaysa. Cibaadaduna waa: jeclaan dhamaystiran oo ay la socoto u hogasho iyo waynayn dhamaystiran, sidaasna loomasameeyocid aan ahayn Allaha waaxidka ah.

Waxaa ku soo arooray iimaanka sidaas ah marqaatikacii ugu waynaa oo ka yimid axad marag-fura kii ugu waynaa iyadoo la xiriirta wax lagu marqaati kaco wixii ugu waynaa, isagoo Ilaaheey arrintaas ka hadlaya ayaa Alle wuxuu yiri:

{ شَهِدَ اللَّهُ أَنَّهُ لا إِلَهَ إِلا هُوَ وَالْمَلائِكَةُ وَأُولُو الْعِلْمِ قَائِمًا بِالْقِسْطِ لا إِلَهَ إِلا هُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ (١٨) }آل عمران:١٨

“Wuxuu ilaaheey cadeeyey oo ka marqaatikacay inuu ilaahnimada kaligiis leeyahay, waxaa iyaguna sidaas qiray oo ka marqaati kacay malaa’igta iyo ahlul cilmiga, wuxuuna u taagan yahay cadaaladda, ma jiro ilaah xaq lagu caabudo oo aan isaga ahayn, ilaahaas oo ah ilaah leh awood iyo xikmad buuxda” (Aalu cimraana:18).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ وَإِلَهُكُمْ إِلَهٌ وَاحِدٌ لا إِلَهَ إِلا هُوَ الرَّحْمَنُ الرَّحِيمُ (١٦٣) } البقرة:١٦٢

“Ilaahiinu waa mid kali ah, mid aan isaga ahaynina ma jiro,waa Alle naxariis leh, khalqigiisana u naxariista” (Al baqarah: 163).

Ilaaheey wuxuu u abuuray khalqiga oo dhan,ha noqdeen insiga ama jinniga inay isaga caabudaan, wuxuuna yiri:

{ وَمَا خَلَقْتُ الْجِنَّ وَالإِنْسَ إِلا لِيَعْبُدُونِ (٥٦) مَا أُرِيدُ مِنْهُمْ مِنْ رِزْقٍ وَمَا أُرِيدُ أَنْ يُطْعِمُونِ (٥٧) } الذاريات:٥٦-٥٧

“Jinniga iyo insiga waxaan cibaadadayda ahayn uma aanan abuurin, kama rabo risiq iyo inay inay I quudiyaan” (Al daariyaat:56-57).

Rususha oo dhana wuxuu u soo diray si ay u hirgeliyaan iimaankaas, ayna dadka ugu yeeraan kaligiis caabudaan, shirkigana ka fogaadaan. Alle wuxuu yiri:

{ وَلَقَدْ بَعَثْنَا فِي كُلِّ أُمَّةٍ رَسُولا أَنِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَاجْتَنِبُوا الطَّاغُوتَ } النحل:٣٦

“Umad walba waxaan u soo dirnay rasuul u sheega Ilaaheey kaligiis caabuda, kana fogaada waxyaabaha aan Alle ahayn oo la caabudo” (Alnaxli:36).

Markaas ayey dadadkii loo diray waxay ku bilaabeen inay ku yirahdaan:

{ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ } الأعراف:٥٩، ٦٥، ٧٣، ٨٥

“war qawmkaygiiyoow, Ilaaheey kaliya caabuda,ma aad lihidin ilaah aan isaga ahayne” (Al acraaf:59,65,73,85).

Ilaaheey wuxuu Nabiga (n.n.k.h) ku yiri:

{ وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ مِنْ رَسُولٍ إِلا نُوحِي إِلَيْهِ أَنَّهُ لا إِلَهَ إِلا أَنَا فَاعْبُدُونِ } الأنبياء:٢٥

“Ma jirin rasuul aan hortaa soo dirnay oo aanan u waxyoon inuusan jirin ilaah xaq lagu caabudo oo aan aniga ahayn ee I caabuda” (Al anbiyaa:25).

In iimaanka sidaas loola yimaado waxaa ka dhalanaya in cibaadooyinka noocyadooda oo dhan loo duwo xagga Alle, qofkii wax ka mid ah cibaadooyinkaas u leexiya cid aan Alle ahayn wuxuu noqonayaa qof gaaloobay. Cibaadooyinkaasina waa noocyo sidaan soosocoyaba:

1.Cibadooyin qalbiga la xiriira: sida jeclaanta, Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَمِنَ النَّاسِ مَنْ يَتَّخِذُ مِنْ دُونِ اللَّهِ أَنْدَادًا يُحِبُّونَهُمْ كَحُبِّ اللَّهِ وَالَّذِينَ آمَنُوا أَشَدُّ حُبًّا لِلَّهِ } البقرة:١٦٥

“Dadka waxaa ku jira kuwo samaysta waxyaabo ay la simaan ilaaheey oo ay u jecel yihiin sida ay Alleu jecel yihiin, kuwa mu’miniinta ah ayaa ilaaheey u jecel si ka badan sida ay kuwaasi u jecel yihiin waxa ay ilaahyada ka dhigteen” (Albaqarah:165).

Jeclaanta waxaa la mid ah ka cabsashada, Ilaaheey wuxuu yiri:

{ فَلا تَخَافُوهُمْ وَخَافُونِ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ }آل عمران:١٧٥

“Ha ka cabsanina mushrikiinta ee aniga iga cabsada hadii aad tihiin kuwo xaqqa rumeeyey” (Aalu cimraana:175).

Waxaa kale oo la mid ah rajaynta: Alle wuxuu yiri:

{ قُلْ إِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ مِثْلُكُمْ يُوحَى إِلَيَّ أَنَّمَا إِلَهُكُمْ إِلَهٌ وَاحِدٌ فَمَنْ كَانَ يَرْجُو لِقَاءَ رَبِّهِ فَلْيَعْمَلْ عَمَلا صَالِحًا وَلا يُشْرِكْ بِعِبَادَةِ رَبِّهِ أَحَدًا } الكهف:١١٠

“Waxaad ku tiraahdaa waxaan ahay bashar adinka oo kale ah, waxaa xag Alle la iiga soo waxyooday in uu Alle yiri: waxaan ahay  ilaahiina oo ah mid kali ah, ee qofkii ka cabsanaya cadaabta Alle, ajarkiisana rajaynayaa ha sameeyo camal wanaagsan, yuusana cidna la wadaajin cibaadada” (Al kahfi:110).

Saddexdaani (jacaylka, cabsida iyo rajayntu) waa kuwa xudunta u ah cibaadooyinka laga sameeyo qalbiga. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ أُولَئِكَ الَّذِينَ يَدْعُونَ يَبْتَغُونَ إِلَى رَبِّهِمُ الْوَسِيلَةَ أَيُّهُمْ أَقْرَبُ وَيَرْجُونَ رَحْمَتَهُ وَيَخَافُونَ عَذَابَهُ } الإسراء:٥٧

“Kuwaas ay mushrikiintu caabudayaan oo anbiyada iyo saalixiinta ah iyaga laf ahaantooda ayaa ku tartamaya u dhowaanshaha Alle,waxay rajaynayaan naxariistiisa,waxayna ka cabsanayaan cadaabtiisa” (Al israa:57). Qofka waxaa laga rabaa inuusan saddexdaas qaarkood ku gaabsan ee uu iyaga oo dhan la wada yimaado.

Qofkii Ilaaheey ku caabuda cabsi oo kali ah wuxuu ka mid noqonayaa khawaarijta.

Qofkii Ilaaheey ku caabuda rajo oo kali ah wuxuu ka mid noqonayaa Murji’ada ( waa qolyo ay qaarkood leeyihiin mar hadiiba uu qofku iimaan leeyahay wax dembi ahi waxba u dhibi karaan) .

Qofkii Ilaaheey ku caabuda jeclaan oo kali ah wuxuu noqonayaa zindiiq (munaafiq).

In qalbigu uu wanaagsan yahayna waxay sal u tahay inuu jirku wanaagsanaado, sida ku xusanba xadiiskii ay ku jirtay:' jirka waxaa ku jira cad hilib ah oo hadii uu wanaagsanaado uu jirka oo dhan uu wanaagsanaanayo,hadii uu xumaadana uu jirka oo dhan uu xumaanayo, xubintaasina waa qalbiga" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

2. *Cibaadooyin carrabka laga sameeyo*: sida:

- *Ilaah baryida*, Alle wuxuu yiri:

{ وَأَنَّ الْمَسَاجِدَ لِلَّهِ فَلا تَدْعُوا مَعَ اللَّهِ أَحَدًا } الجن:١٨

"Masaajidda waxaa leh Ilaaheey, ee ha ku baryinina hana ku caabudinina cid aan isaga ahayn" (Al jinni: 18).

-*Magangelidda*: Ilaaheey wuxuu yiri:

{ قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ الْفَلَقِ } الفلق:١

"Waxaad tiraahdaa waxaan magangelayaa Rabbiga subaxa" (Al falaq:1).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ النَّاسِ }الناس:١

"Waxaad tiraahdaa waxaan magangelayaa Rabbiga dadka abuuray" (Al naas:1).

-*Gargaar waydiisiga*: Ilaaheey wuxuu yiri:

{ إِذْ تَسْتَغِيثُونَ رَبَّكُمْ فَاسْتَجَابَ لَكُمْ }الأنفال:٩

"Xasuusta markii aad Ilaaheey ka codsateen gargaarka maadaama aad tiro yaraydeem, Ilaaheeyna uu baryihiinii codsigiinii uu idinka aqbalay"(Al anfaal:9).

-*Xuska Alle iyo noocyadiisa oo dhan*: Ilaaheey wuxuu yiri:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اذْكُرُوا اللَّهَ ذِكْرًا كَثِيرًا} الأحزاب:٤١

"Kuwa xaqqa rumeeyayoow, Ilaaheey xusa in badan" (Al axzaab:41).

-*Quraan aqrinta*: Alle wuxuu yiri:

{ اتْلُ مَا أُوحِيَ إِلَيْكَ مِنَ الْكِتَابِ} العنكبوت:٤٥

“Aqri waxa laguu waxyooday oo Qur’aanka ah” (Al cankabuut:45).

3. *Cibaadooyin xubnaha laga sameeyo*: sida:

-*Salaadda iyo waxgawricida*: Eebbe wayne wuxuu yiri:

{ قُلْ إِنَّ صَلاتِي وَنُسُكِي وَمَحْيَايَ وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ }الأنعام:١٦٢

“Waxaad ku tiraahdaa: salaadayda, gawracayga, noloshayda iyo dhimashadaydaba waxaa iska leh Allaah ee ah caalalamka oo dhan rabbigiisa”(Al ancaam:162).

Waxaa kale ee uu yiri:

{فَصَلِّ لِرَبِّكَ وَانْحَرْ} الكوثر:٢

“u tuko Rabbigaa oo kali ah, gowracna qurbaankaaga”(Alkawthar:2).

-*Dawaafka*: Ilaaheey wuxuu yiri:

{وَلْيَطَّوَّفُوا بِالْبَيْتِ الْعَتِيقِ} الحج:٢٩

“Ha ku dawafeen baytka qadiimka ah” (Alxaj:29).

-*In wadada laga qaado wixii wax-dhibaal leh*: Nabigu (n.n.k.h) wuxuu yiri isagoo ka hadlaya qaybaha iimaanka:”Waxaa ugu yar in wadada laga qaado wixii wax-dhibaal leh” (w.w.Muslim).

4. *Cibaadooyin maalka la xiriira*: sida waxbixinada Ilaaheey loogu dhowaado, sida sakooyinka, sadaqooyinka, dardaaranada, waqafka iwm. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ إِنَّمَا الصَّدَقَاتُ لِلْفُقَرَاءِ وَالْمَسَاكِينِ وَالْعَامِلِينَ عَلَيْهَا وَالْمُؤَلَّفَةِ قُلُوبُهُمْ وَفِي الرِّقَابِ وَالْغَارِمِينَ وَفِي سَبِيلِ اللَّهِ وَابْنِ السَّبِيلِ فَرِيضَةً مِنَ اللَّهِ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ } التوبة:٦٠

“Sadaqooyinka waxaa leh oo la siinayaa fuqarada, masaakiinta, dadka sakada ka shaqeeya, dadka islaamka lagu sugayo ama shartooda laga celinayo, adoomada la xoraynayo, dadka daymoobay, jihaadka iyo musaafirka, Ilaaheey waa mid cilmiiyo xikmad badan” (Al tawbah:60).

Alle wuxuu yiri:

{ وَمِنَ الأَعْرَابِ مَنْ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الآخِرِ وَيَتَّخِذُ مَا يُنْفِقُ قُرُبَاتٍ عِنْدَ اللَّهِ وَصَلَوَاتِ الرَّسُولِ أَلا إِنَّهَا قُرْبَةٌ لَهُمْ سَيُدْخِلُهُمُ اللَّهُ فِي رَحْمَتِهِ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ } التوبة:٩٩

"Reer baadiyaha carbeed waxaa ku jira qaar rumaynayaan Ilaaheey iyo aakhiro, waxa ay bixinayaana ka dhiganayaan wax ay Alle ugu dhowaanayaan, ayna ku gaaraan in Rasuulku (n.n.k.h) uu u duceeyo, acmaashaas ay qabanayaan waxay u noqonaysaa Alle u dhowaasho, wuxuuna Alle gelin doonaa jannadiisa, Ilaaheey waa Alle dembidhaafid badan oo naxariis badan" (Altawbah:99).

-Quudinta: Ilaaheey wuxuu yiri:

{وَيُطْعِمُونَ الطَّعَامَ عَلَى حُبِّهِ مِسْكِينًا وَيَتِيمًا وَأَسِيرًا (٨) إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ لِوَجْهِ اللَّهِ لا نُرِيدُ مِنْكُمْ جَزَاءً وَلا شُكُورًا} الإنسان:٨-٩

"Waxay bixiyaan oo ay raashin siiyaan iyagoo jeceloo u baahan miskiinka, agoonka iyo dadka dagaalka lagus oo qabtay, waxayna yiraahdiin: waxaan idiin quudinaynaa Ilaaheey daraadiis, mana idinka rabno abaalmarin iyo mahad celin toona" (Al insaan:8-9).

In la rumeeyo Ilaaheey inuu kaligiis cibaadada mudan yahay waa arrin ka dhalanaysa in la rumeeyo Rabbinimadiisa. Qofkii qira inuu isaga kliya uu wax abuuro, milkiga uu leeyahay,isagu uu uunka oo dhan uu maamulo waxaa lagama maarmaan u ah inuu qiro oo ogolaado Ilaahnimadiisa (inuu kaligiis cibaadada mudan yahay) sidaan awgeedna uu cibaaadada isaga gaar uga dhigo.

Ilaaheey xujadaas ayuu ku soo oogay mushrikiinta oo wuxuu ku yiri hadii aad Rabbinimada ogoshihiin maxaad u ogalaan la'dihiin ilaahnimada. Dhawr meelood oo Qur'aanka ka mid ayaa Alle arrintaas uga hadlay, sida:

{يَا أَيُّهَا النَّاسُ اعْبُدُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ وَالَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ (٢١) الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ فِرَاشًا وَالسَّمَاءَ بِنَاءً وَأَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجَ بِهِ مِنَ الثَّمَرَاتِ رِزْقًا لَكُمْ فَلَا تَجْعَلُوا لِلَّهِ أَنْدَادًا وَأَنْتُمْ تَعْلَمُونَ (٢٢)} البقرة:٢١-٢٢

"War dadoow, caabuda Rabbigiinii idin abuuray, kuwii idin ka horeeyeyna abuuray  si aad uga mid noqotaan kuwa ka baqa ciqaabtiisa, waa Allaha dhulka idin kaga dhigay firaash, samadana ka dhigay mid dhisideeda lagu farayaraystay, cirkana ka keenay roobka, kuna soo dhaliyey miraha si ay risaq idin kugu noqdaan, ee Ilaaha sidaas ah ha u yeelinina kuwo isa-

ga cibaadada la leh, adinka oo og inuu kaligiis abuurista iyo risaq bixinta leeyahay” (Al baqarah:21-22).

Iyo sida:

{ قُلْ مَنْ يَرْزُقُكُمْ مِنَ السَّمَاءِ وَالأَرْضِ أَمْ مَنْ يَمْلِكُ السَّمْعَ وَالأَبْصَارَ وَمَنْ يُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَيُخْرِجُ الْمَيِّتَ مِنَ الْحَيِّ وَمَنْ يُدَبِّرُ الأَمْرَ فَسَيَقُولُونَ اللَّهُ فَقُلْ أَفَلا تَتَّقُونَ (٣١) فَذَلِكُمُ اللَّهُ رَبُّكُمُ الْحَقُّ فَمَاذَا بَعْدَ الْحَقِّ إِلَّا الضَّلَالُ فَأَنَّى تُصْرَفُونَ (٣٢)} يونس:٣١-٣٢

“Rasuul Alloow, waxaad mushrikiinta ku tiraahdaa: yaa samada idin ka arsuqa oo roobka keena? Yaa dhulka idin ka arsuqa oo geedaha ka soo dhaliya? Yaa iska leh maqalka iyo araga aad haysataan? Yaa wax nool ka soo saara wax aan noolayn? Yaa wax aan noolayn ka soo saara wax noole ah? Yaa iska leh maamulka cirkaiyodhulka? Waxay ku dhihi doonaan: waxaa intaas oo dhan iska leh Ilaaheey, ee markaas waxaad ku tiraahdaa: maad ciqaabtiisa ka cabsataan hadii aad cid kale la caabudaan. Rabbigaasi waa midka xaqqa ah, maxaase ka dambeeya xaqqa oo aan ahayn baadi,ee sidee la idinkaga leexiyey cibaadadiisa” (Yuunus:31-32).

Ilaaheey waxaa kale oo uu yiri:

{ قُلِ الْحَمْدُ لِلَّهِ وَسَلامٌ عَلَى عِبَادِهِ الَّذِينَ اصْطَفَى آللَّهُ خَيْرٌ أَمْ مَا يُشْرِكُونَ (٥٩) أَمَّنْ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ وَأَنْزَلَ لَكُمْ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَنْبَتْنَا بِهِ حَدَائِقَ ذَاتَ بَهْجَةٍ مَا كَانَ لَكُمْ أَنْ تُنْبِتُوا شَجَرَهَا أَإِلَهٌ مَعَ اللَّهِ بَلْ هُمْ قَوْمٌ يَعْدِلُونَ (٦٠) أَمَّنْ جَعَلَ الْأَرْضَ قَرَارًا وَجَعَلَ خِلَالَهَا أَنْهَارًا وَجَعَلَ لَهَا رَوَاسِيَ وَجَعَلَ بَيْنَ الْبَحْرَيْنِ حَاجِزًا أَإِلَهٌ مَعَ اللَّهِ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ (٦١) أَمَّنْ يُجِيبُ الْمُضْطَرَّ إِذَا دَعَاهُ وَيَكْشِفُ السُّوءَ وَيَجْعَلُكُمْ خُلَفَاءَ الْأَرْضِ أَإِلَهٌ مَعَ اللَّهِ قَلِيلًا مَا تَذَكَّرُونَ (٦٢) أَمَّنْ يَهْدِيكُمْ فِي ظُلُمَاتِ الْبَرِّ وَالْبَحْرِ وَمَنْ يُرْسِلُ الرِّيَاحَ بُشْرًا بَيْنَ يَدَيْ رَحْمَتِهِ أَإِلَهٌ مَعَ اللَّهِ تَعَالَى اللَّهُ عَمَّا يُشْرِكُونَ (٦٣) أَمَّنْ يَبْدَأُ الْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُ وَمَنْ يَرْزُقُكُمْ مِنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ أَإِلَهٌ مَعَ اللَّهِ قُلْ هَاتُوا بُرْهَانَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ (٦٤) } النمل: ٥٩-٦٤

“Waxaad tiraahdaa Rasuulkii Alloow: waxaa iska leh mahad iyo amaan Ilaaheey, nabadna Allaha siiyo adoomadiisa uu doortay (Rusushiisa). Ka dibna waydii mushrikiinta: ma waxaa wanaagsan Ilaahaas isagu haya dhibka iyo dheefta mise waxa ay isaga wax la wadaajinayaan oo aan waxba awoodin.

Waxaad waydiisaa yaa abuuray cirka iyo dhulka, daruurtana idin kaga keenay biyaha, ka dibna idin kugu soo dhaliyey beero arag quruxsan, oo aysan idiin suurtagasheen inaad beerataan hadii uusan biyaha idiin keenin, ma waxaa jira cid kale oo Allahaas lala caabudo, mushrikiintu waa qolo xaqa iyo iimaanka ka leexda.

Ma waxaa wanaagsan caabudida waxa aad Alle wax la wadaajisaan mise cibaadada Allaha idin kaga dhigay dhulka meel lagu nagaado, kana dhexjeexay wabiyo, una sameeyey buuro dheelitira, kalana dhexdhigay badda macaan iyo midda dhanaan wax kala teeda oo kala celiya. Ma waxaa jira cid lala caabudo Ilaaha sidaas sameeyey, mushrikiinta intooda badan ma ahan dad ka warhaya Alle waynaantiisa inta ay dhan tahay.

Ma waxaa wanaagsan caabudida waxa aad Alle wax la wadaajisaan mise cibaadada Allaha ajiiba qofka kurbaysan,dhibkii hayeyna ka qaada, idin kana dhigay kuwo dhulka kala wareegay dadkii idin ka horeeyey, ma waxaa jira cid la caabudo oo aan Alle ahayn oo nicmooyinkaas laga heli karo, waxaa aad u yar inta aad cibro qaadaan.

Ma waxaa wanaagsan caabudida waxa aad Alle wax la wadaajisaan mise cibaadada Allaha idin haga oo idin toosiya marka lagu jiro mugdiga badda iyo midka berriga oo aad luntaan, Ilaahaas oo idiin soo dira dabaylaha iyagoo bishaaro xambaarsan, taas oo ah roob uu dhulkuku noolaado, ma waxaa jira cid aan Alle ahayn oo idiin samayn kara wax kuwaas ka mid ah oo sidaas awgeed aad caabudaan, Alle waa ka sarreeyaa waxa ay mushrikiintu wax la wadaajinayaan.

Waydii yaa unka khalqiga ka dibna soo celinaya, yaa risqigiina ka keena samada iyo dhulka oo roob idin siiya, daaqna idiin soo saara, ma waxaa jira cid aan Alle ahayn oo intaas idiin samayn karta, waxaad ku taraahdaa keena wax caddayn ah oo tusinaya  in Ilaaheey lala wadaago mulkiga iyo cibaadada” (Al namli:59-64).

Ilaaheey xujo iyo caddayn uu duldhigay oo ah haddiiba ay ogol yihiin in Ilaaheey kaligiis uu abuurista iyo maamulka leeyahay in sidoo kale ay tahay inay ogolaadaan inuu cibaadadana isagu kaligiis leeyahay.

Sidoo kale Ilaaheey wuxuu burburiyey ilaahnimada ilaahyada mushrikiinta maadaama aysan lahayn xataa wax ka mid ah  tilmaamaha Rabbi uu leeyahay, wuxuuna yiri:

{ أَيُشْرِكُونَ مَا لا يَخْلُقُ شَيْئًا وَهُمْ يُخْلَقُونَ (١٩١) وَلَا يَسْتَطِيعُونَ لَهُمْ نَصْرًا وَلَا أَنْفُسَهُمْ يَنْصُرُونَ (١٩٢)
وَإِنْ تَدْعُوهُمْ إِلَى الْهُدَى لَا يَتَّبِعُوكُمْ سَوَاءٌ عَلَيْكُمْ أَدَعَوْتُمُوهُمْ أَمْ أَنْتُمْ صَامِتُونَ (١٩٣) إِنَّ الَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِ
اللَّهِ عِبَادٌ أَمْثَالُكُمْ فَادْعُوهُمْ فَلْيَسْتَجِيبُوا لَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ (١٩٤) أَلَهُمْ أَرْجُلٌ يَمْشُونَ بِهَا أَمْ لَهُمْ أَيْدٍ يَبْطِشُونَ
بِهَا أَمْ لَهُمْ أَعْيُنٌ يُبْصِرُونَ بِهَا أَمْ لَهُمْ آذَانٌ يَسْمَعُونَ بِهَا قُلِ ادْعُوا شُرَكَاءَكُمْ ثُمَّ كِيدُونِ فَلَا تُنْظِرُونِ (١٩٥) إِنَّ
وَلِيِّيَ اللَّهُ الَّذِي نَزَّلَ الْكِتَابَ وَهُوَ يَتَوَلَّى الصَّالِحِينَ (١٩٦) وَالَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ لَا يَسْتَطِيعُونَ نَصْرَكُمْ وَلَا
أَنْفُسَهُمْ يَنْصُرُونَ (١٩٧) وَإِنْ تَدْعُوهُمْ إِلَى الْهُدَى لَا يَسْمَعُوا وَتَرَاهُمْ يَنْظُرُونَ إِلَيْكَ وَهُمْ لَا يُبْصِرُونَ (١٩٨) }
الأعراف:١٩١-١٩٨

“Mushrikiintu ma waxay Alle la wadaajinayaan wax aan waxba abuuri karin ee iyaga ayaaba la abuuray, mana awoodaan wax u qabtaan kuwa caabuda, naftoodana dhib kama celin karaan, mushrikiineey hadii aad ilaahyadiina ugu yeertaan waxa wanaaga iyo hanuunku ku jiro ma ay maqlayaan teeristiina mana idin soo raacayaan, waxaana isku mid ah inaad u yeertaaniyoinaad ka aamustaan.

Kuwa aad caabudaysaan waa adoomo uu Ilaaheey leeyahay sidiina oo kale, ee hadii aad run ka sheegaysaan inay mudan yihiin in la caabudo bal u yeera oo iyaguna yeeristiina ha yeeleen, hadii ay sidaasi dhici wayso waxaa cadaanaya inay been tahay inay cibaado mudan yihiin, oo aad Alle ku been-abuuranaysaan.

Ilaahyadani ma leeyihiin lugo ay ku socdaan? ma leeyihiin gacmo ay idin kaga celiyaan cidii dhib idinla maagan? Ma leeyihiin indho ay wax ku arkaan? Ma leeyihiin dhego ay wax ku maqlaan? Haddii aysan intaas lahayn maxaa laga caabudyaa, waxaadna mushrikiinta ku tiraahdaa: u yeerta kuwa aad Alle wax la wanaajisaan, ka dibna waxba ha ii reebanina, hana u kaadasnina oo dib ha u dhiganina.

Aniga xifdintayda iyo ilaalintayda waxaa gacanta ku haya Ilaaheeygii Qur’aanka soo dejiyey, isaga ayaana dadka saalixiinta wax u qabadkooda gacanta ku haya.

Kuwa aad caabudaan ma awoodaan inay wax idiin qabtaan ama ay naftooda wax u taraan.

Haddii aad ugu yeertan toosnaantana ma ay maqlayaan, ilaahyadaas mushrikiinta marka aad fiiriso waxaad moodaa inay ku soo deyayaan laakiin waxba arki mayaan” (Al acraaf: 191-198).

Waxaa kale oo Eebbe wayne yiri:

{ وَاتَّخَذُوا مِنْ دُونِهِ آلِهَةً لا يَخْلُقُونَ شَيْئًا وَهُمْ يُخْلَقُونَ وَلا يَمْلِكُونَ لأَنْفُسِهِمْ ضَرًّا وَلا نَفْعًا وَلا يَمْلِكُونَ مَوْتًا وَلا حَيَاةً وَلا نُشُورًا (٣) } الفرقان:٣

“Waxay ilaahyo ka dhigteen (ilaaheey bedelkiis) ilaahyo aan waxba abuuri Karin ee iyaga la abuuray,oo aan naftooda u gelin inay dheef u soo jiidaan ama dhib iska celiyaan, iyaga gacantooda kuma jirto inay wax nool dilaan ama wax dhintay noleeyaan ama qof qabri ku jira ay soo bixiyaan isaga oo nool” (Al furqaan:3).

{ قُلِ ادْعُوا الَّذِينَ زَعَمْتُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ لا يَمْلِكُونَ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ فِي السَّمَاوَاتِ وَلا فِي الأَرْضِ وَمَا لَهُمْ فِيهِمَا مِنْ شِرْكٍ وَمَا لَهُ مِنْهُمْ مِنْ ظَهِيرٍ (٢٢) وَلَا تَنْفَعُ الشَّفَاعَةُ عِنْدَهُ إِلَّا لِمَنْ أَذِنَ لَهُ حَتَّى إِذَا فُزِّعَ عَنْ قُلُوبِهِمْ قَالُوا مَاذَا قَالَ رَبُّكُمْ قَالُوا الْحَقَّ وَهُوَ الْعَلِيُّ الْكَبِيرُ (٢٣) } سبأ:٢٢-٢٣

“Waxaad ku tiraahdaa mushrikiinta u yeera kuwa aad ku andacooteen inay Ilaaheey wax la wadaagaan, ma idin ajiibayaan, cirka iyo dhulka dhexdoodana kuma lahan wax quraanyo la’eg, wax ay shirko ku yiina ma jiraan, cid iyaga ka mid ah oo Ilaaheey uu kaalmaystaana ma jirto.

Qof inta loo shafeecoqaado ay wax u taraysaa ma jiro in uu Alle u idmo qofkaas ma ahane, marka uu Alle hadlana cabsi ayey la miyir beelaan, markii cabsidu ka tagtana waxay yiraahdaan: muxuu yiri Rabbigiin? Markaas ayey malaa’igtu tiraahdaa: wuxuu yiri wax xaq ah, waana Alle ka sareeya wax walba kana wayn wax kasta” (Saba’ :22-23).

Sidaas awgeed ayaa in cibaada Alle wax lala wadaajiyo waxay noqotay:

1. Inuu shirkigu yahay dulmi la galo midka ugu wayn. Ilaaheey wuxuu yiri:”Shrkigu waa dulmi wayn” (Luqmaan:13).

Sababta uu sidaas u noqdayna waa in ay ku jirto Alle oo nusqaan loo yeelayo, wixii uu kaligiis xaqqa u lahaana loo leexinayo cid kale, iyo in lala simo cid kale, sida uu Ilaaheeyba u yiri: “kuwa gaaloobay waxay wax la simaan Rabbigooda” (Al ancaam:1).

2. Inuu shirkigu yahay dembiyada midka ugu wayn. Nabigu (n.n.k.h) wuxuu yiri: “ma idiin sheegaa dembiyada waawayn midka ugu wayn? Waxay ku yiraahdeen: haa, Rasuulkii Alloow, wuxuu yiri: waa in Alle wax lala wadaajiyo (shirkiga)” (w.w.Bukhaari iyo muslim).

3. Inuu dembiyada ugu wayn yahay. Waxaa Nabiga (n.n.k.h) la waydiiyey dembiyada midkee ugu wayn Alle agtii? Markaas ayuu yiri: waa in aad cid kale lasinto isaga oo ku abuuray” (Bukhaari iyo Muslim).
4. Waa baadinimo oo lagu dhaco. Alle wuxuu yiri:”

{ وَمَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَكَأَنَّمَا خَرَّ مِنَ السَّمَاءِ فَتَخْطَفُهُ الطَّيْرُ أَوْ تَهْوِي بِهِ الرِّيحُ فِي مَكَانٍ سَحِيقٍ (٣١) } الحج:٣١

“Qofkii Alle wax lawadaajiyaa wuxuu lamid yahay qof samada ka soo dhacay oo u dhexeeya in shimbiruhu kala dafaan oo ay jarjaraan ama in dabayl xoogani ay la tagto oo ku tuurto meel fog” (Al xaj:31).

Maadaama shirkigu uu aad u foolxun yahay ayaa Ilaaheey ku abaalmarinayaa qofkii sameeya arrimo qabsanaya inta uu aduunka joogo iyo kuwo la xiriira aakhiro, waxaana ka mid ah:

1. *Inaan loo dembi dhaafaynin*. Alle wuxuu yiri:

{إِنَّ اللَّهَ لا يَغْفِرُ أَنْ يُشْرَكَ بِهِ وَيَغْفِرُ مَا دُونَ ذَلِكَ لِمَنْ يَشَاءُ وَمَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَقَدِ افْتَرَى إِثْمًا عَظِيمًا (٤٨)} النساء:٤٨

“Ilaaheey ma dhaafo oo ma cafiyo dembiga ka yimaada in cid kale wax lala wadaajiyo, wixii kaas kazoo harana wuu dhaafaa, qofkii shirki la yimaadaa wuxuu falkistay dembi aad u wayn” (Al nisaa:48).

2. *In laga xaaraanti nimaynayo jannada*, nartana uu ku waarayo. Alle wuxuu yiri:

{ إِنَّهُ مَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَقَدْ حَرَّمَ اللَّهُ عَلَيْهِ الْجَنَّةَ وَمَأْوَاهُ النَّارُ وَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ أَنْصَارٍ (٧٢) } المائدة:٧٢

“Qofkii Ilaaheey wax la wadaajiya waxaa uu Alle ka xaaraanti nimeeyey jannada, meesha hooyga u noqon doontaana waa naarta, mana jirto cid u soo gurman karta daalimiinta” (Al maa’idah:72).

3.*In acmaashiisa oo dhan ay burayso*: Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَلَقَدْ أُوحِيَ إِلَيْكَ وَإِلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكَ لَئِنْ أَشْرَكْتَ لَيَحْبَطَنَّ عَمَلُكَ وَلَتَكُونَنَّ مِنَ الْخَاسِرِينَ (٦٥) } الزمر:٦٥

“Waxa laguu waxyooday adiga iyo Nabiyadii kaa horreeyeyba: hadii aad cid wax ila wadaajiso oo aad shirki samayso waxaa buraya camalkaaga, waxaadna ka mid noqonaysaa kuwa khasaaray” (Al zumar:65).

4. *In dhiigiisa iyo maalkiisu ay noqonayaan kuwo banaan*: Ilaaheey wuxuu yiri:

{ فَإِذَا انْسَلَخَ الأَشْهُرُ الْحُرُمُ فَاقْتُلُوا الْمُشْرِكِينَ حَيْثُ وَجَدْتُمُوهُمْ وَخُذُوهُمْ وَاحْصُرُوهُمْ وَاقْعُدُوا لَهُمْ كُلَّ مَرْصَدٍ فَإِنْ تَابُوا وَأَقَامُوا الصَّلاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ فَخَلُّوا سَبِيلَهُمْ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ (٥) } التوبة:٥

"Marka ay dhamaadaan bilaha urmada leh oo aad amaanka siideen mushrikiinta ku dila meel walba oo ay joogaan, soo qabta oo go'doomiya, wadda kastana ka jara,hadii ay markaas toobad keenaan oo ay salaadda tukadaan,sakadana bixiyaan faraha ka qaada, Allena waa mid dembi u dhaafid iyo naxariis badan" (Altawbah:5).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: "Waxaa la I faray inaan dadka (mushrikiinta) la dagaalo ilaa ay tawxiidka ka qaataan oo ka ashahaataan, qofkii sidaas sameeya maalkiisa iyo naftiisa waa iga ilaashaday marka laga reebo wixii xaq ah oo lagu yeesho, ilaaheey ayaana la xisaabtamaya" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

Waxaa baadiyoobay oo shirkigaas ku dhacay qolooyin banii'aadamka ka mid ah, sida:

1. *Kuwa caabuda cid aan Alle ahayn*: noocii ay rabaanba ha noqdeen waxaas ay caabudayaan, sida geed, dhagax, insi, jinni, malaa'ig, xidigo iyo xayawaanaad, kuwaas oo ka mid ah waxa uu shaydaanku ku baadi-yeeyey.
2. *Qubuuriyiinta*: kuwaas oo ah kuwa baryaan qubuuraha, sharadka ka xirtaan, qurbaanka u bixiyaan, oona waydiista inay dheef u soo jiidaan ama dhib ka celiyaan.
3. *Sixrooleyaasha iyo kuwa loogu tago* inay dadka u sheegaan waxa ghay-bka (waxa dadka ogaalkooda ka baxsan sida baadida, caafimaadka iwm) ah. Kuwaasi waxay caabudaan jinniga iyaga oo ku bedelanaya waxa ay u soo sheegayaan ama ay u keenayaan ama ay u samay-nayaan.

Maadaama ay wayn tahay khatarta ka imaanaysa in Alle cid kale lala wadaajiyo cibadada ayaa Nabigu (n.n.k.h) wuxuu ka digay sababaha keeni kara shirkiga, wuxuuna awday wadooyinka ku taga inuu shirkigu dhaco. Waxaana tusaaleyaalka ka mid ah:

1. *In uu ka digay ku talaxtegida amaanta saalixiinta iwm*. Wuxuuna yiri: “Waxaan idin kaga digayaa ghuluwiga, dadkii idin ka horeeyey waxaa baabi’iyey inay diinta dhaafsiiyeen tankeedii” (w.w. Axmad, Nasaa’I iyo Ibnu Maajah).

Waxaa kale oo uu yiri: “Amaantayda ha ku talaxteginina sida ay Nasaaradu ugu talaxtageen Ciise, anigu waxaan ahay adoonkiisa, waxaadna tirahdaan: waa adoonkii Alle iyo Rasuulkiisa” (W.w.Bukhaari).

Waxaa ka mid ah ghuluwiga lagu samaynayo saalixiinta: in lagu tawasulo. Tawasulkuna waa noocyo:

b) Tawasul shirki ah oo diinta looga baxo, kaasi waa in iyaga laga baryo inay danaha fuliyaan,kurbadana faydaan.

t) Tawasul bidco ah oo aan gaarayn heerka shirkiga, kasi waa in Ilaaheey lagu baryo wax uusan sharciyayn, sida in Ilaaheey lagu baryo dadka saalixiinta ah ama jaaha iyo xurmada ay Alle ku ag leeyihiin iwm.

j) Tawasul sharci ah, waa in Alle lagu baryo rumaynta isaga la rumeeyey iyo adeecidiisa, ama lagu baryo magic ka mid ah magacyadiisa ama tilmaan ka mid tilmaamihiisa ama camal suuban oo qofku sameeyey, amaba in duco laga dalbado qof saalix ah iyadoo looga baryayo dan guud.

Warkii Cumar (a.k.n) oo ahaa inuu yiri: “Ilaahoow waxaan kugu baryi jirney Nabigeena (n.n.k.h) waadna na waraabi jirtey, haddana waxaan kugu baryaynaa Nabigeena adeerkiis ee roob na sii” (w.w.Bukhaari). Arrinkaasi waa in Ilaaheey lagu baryey ilaah-tuuga Cabbaas, madaama uu qaraabo dhow la ahaa Nabiga ee ma ahayn in isaga laf-ahaantiisa Alle lagu baryey. Haddii ay sidaasi banaanaan lahayd waxay Alle ku baryi lahaayeen Nabiga haba la joogo geeridiisii ka dib e.

2. In laga digo in lagu fitnoobo qubuurta: waxaana ka mid qaababka loogu fitnoobo:
    - In salaadda lala aado sida masjid oo kale. Waxaa laga soo wariyey Caa’isho inay tiri: “Markii ay haysey jiradii uu u dhintay ayuu wuxuu samaynayey inuu maro uu lahaa isku gembinayey, marka uu ku huurana uu iska qaadayey, isagoo ay xaaladiisu sidaas tahay ayuu wuxuu yiri: lacnadi ha ku dhacdo yuhuud iyo nasaaro, waxay salaadda la aadi jireen qabriyada nabiyadooda” wuxuu sidaas yiri isa-

goo ka digaya sidii ay sameeyeen, hadii arrintaasi aysan jiri lahayn qabrigiisa banaanka ayuu ku oolli lahaa, ee waxaa laga cabsaday in qabrigiisa lala soo aado salaadda" (w.w.Bukhaari iyo Muslim.

Waxaa kale oo uu yiri: "Dadkii idin ka horeeyey waxay salaadda la aadi jireen qabriyad nabiyadooda iyo saalixiintooda, ee sidaas ha samaynina, waan idin ka reebayaa sidaas" (w.w.Muslim).

Marka aan la ogolayn in salaad lala aado qabuuraha ma aha oo kali ah marka masjid laga duldhiso oo kali ah ee waxaa la mid ah marka lagu soo ag-tukanayo yaysanba jirin wax dhisme ah oo ka duldhisan.

- In la dhiso, in lagu soo badiyo ciidii qabriga laga qoday mid aan ahayn iyo in ciidda qabriga dusha looga malaso shamiito, gibsi (jeeso) iwm.

Waxaa laga soo wariyey Abul Hayyaaj Al asadi (a.u.n) inuu yiri: waxaa uu igu yiri Cali bin Abii Daalib: ma kuu diraa hawl uu Rasuulku (n.n.k.h) aniga ii diray; wax kasta oo la caabudo sida sanam iwm burburi, qabrigii kor loo dheereeyana dhulka la sin" ( W.w.Muslim).

Waxaa laga soo wariyey Jaabir bin Cabdillaahi inuu yri: "Wuxuu Rasuulu (n.n.k.h) reebay in qabriga ciidiisa lagu dul malaaso shamiito, gibsi (jee-so) iwm, iyo in qabriga lagu dulfariisto ama la dhiso" (W.w.Muslim). Wax-aa sidaas soo hoosgelaya in dusha kore qubad looga dhiso in la sharxo.

- In loo safro, sababtoo ah Nabiga (n.n.k.h) ayaa wuxuu yiri: " gaadiid looma raaci karo meel lagu soo cibaadaysanayo marka laga reebo saddex masjid: Almasjid Al xaraam, masjidkayga kan ah iyo masjid Al aqsaa" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).
- In qabrigiisa (n.n.k.h) laga dhigto meel la siyaarto waqti go'an oo soo noqnoqda" (W.w. Abuu Daawuud). Ciid waxaa laga wadaa waqti ama meel la caadaysto in la'aado.

3. In laga digay in la isku ekaysiiyo mushrikiinta iyo ahlul kitaabka xagga cibaadada, citiqaadka iyo caadooyinka ay gaarka u leeyihiin. Nabigu (n.n.k.h) wuxuu yiri: "khilaafa mushrikiinta" (w.w.Bukhaari iyo Muslim). Waxaa kale oo uu yiri: "khilaafa kuwa dabka caabuda" (w.w.Muslim).

Waxaa kale oo uu yiri: “khilaafa Yuhuuda” (W.w.Abuu Daawuud).

4. In laga digay in wax la masawiro. Waxaa laga soo wariyey Caa’isho (a.k.n) in Umu Salama ay Rasuulka (n.n.k.h) uga sheekayday kaniisad ay ku soo aragtay dhulka Xabasha oo lahayd masawiro, markaas ayuu yiri:waa dad marka uu ka dhinto qof saalix ahi  ka duldhista qabrigiisa masjid,ka dibna ku masawiraan masawiradaas, waa kuwa khalqida ugu liita oo ugu sharta badan Alle agtiis” (w.w.Bukhaari iyo Muslim).
5. In laga digay erayada uu shirkigu ka dhalanayo, waxaana ka mid ah:
   - In lagu dhaarto cid aan Alle ahayn. Xadiiskii ayaa ahaa “Qofkii ku dhaarta cid aan Alle ahayn waa gaaloobay ama shirki ayuu galay” (w.w.Tirmidi).
   - In rabitaanka iyo doonista Alle lagu laro mid makhluuq, Nabiga (n.n.k.h) ayaa waxaa lagu yiri: wixii Ilaaheey uu doono adiguna aaddoonto, markas ayuu yiri: ma waxaad iga dhigtay mid Alle la siman, waxaad tiraahdaa: wixii alle rabo oo kali ah” (w.w.Nasaa’i).
   - In la yiraahdo waxaan roobka ku helnay xidigaas awgiis. Xadiisul Qudsi ayaa waxaa ku jiray “ Qofkii yiraahda waxaan roobka ku helnay xidigaas awgiiswaa igu kufriyey, wuxuuna rumeeyey xidigaha” (w.w.Bukhaari iyo Muslim). Waxaa sidaas la mid ah war kasta oo ay ku jirto in maamulka loo leexinayo cid aan Alle ahayn.
6. In laga digay shaqooyinka qofka gaarsiin kara shirkiga, waxaana ka mid ah:
   - In gacanta ama qoorta lagu xirto calal, dun ama bir isku soo laaban iwm oo lagala dan leeyahay in balaayo soo socotay laguceliyo ama mid joogtay lagu qaado.

Waxaa laga soo wariyey Cimraan bin Xusayn in uu Nabigu (n.n.k.h) arkay nin ay gacanta ugu jirto bir maar ah, markaas ayuu ku yiri: war maxay tahay midaani? Wuxuu ku jawaabay inay xanuunka ka celinayso, markaas ayuu ku yiri: iska sib, waxaan dhib ahayn ku soo kordhin maysee, haddii aad dhiman lahayd iyadoo kuu xiran ma aadan guulaysateen weligaa” (w.w.Axma, Ibnu Maajah iyo Ibnu Xibaan).

- In la xirto xirsi iwm oo isha la isaga xijaabo, xadiis ayaa wuxuu ahaa: “Qofkii xirta xirsi iwm, Ilaaheey uma hirgeliyo waxa uu ka rabo. qofkii xirta aleel Ilaaheey kuma siiyo raaxo iyo deganaasho” (w.w.Axmad, Ibnu Xibaan iyo Xaakim).

Qayb xadiiska ka mid ah ayaa waxaa ku jirey “ wuu gaaloobay qof kii xira xirsiga iwm oo sharta la isaga celiyo”.

Xadiis kale waxaa ku jirey “ yaysan ku harin qoorta neef kasta oo geela wax u xiran oo xargaha xariirtaa ah (oo isha looga celiyo sida culumada qaar ku fasireen) oo ha laga gooyo” (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

- Tuftada shirkiga ah iwm, sida ku xusanba xadiiskii ahaa “Tufta (waxa shirkiga ah la isku tufo) iyo xirsiga sidaas oo kale ah iyo waxa la yiraahdo [Madiidada] oo ah wax ay haweenku raga isku jeclaysiin ama raggu sidaas ku sameeyaan, waxaasoo dhan waa shirki” (w.w.Abuu Daawuud iyo Ibnu Maajah).
- In wax lagu gawraco meelaha shirkiga: Nin ayaa sharday (nadray) inuu neefaf geela ku gawraco meel la yiraahdo Buwaanah, Rasulka (n.n.k.h) ayuu waydiiyey arrinkaas, markaas ayuu ku yiri: meeshaas ma waxaa ku yiilay sanam la caabudo? Waxay yiraahdeen: maya, haddana wuxuu waydiiyey in meeshaas lagu qabto ciid ka mid ah ciidaha gaalada? Waxay yiraahdeen: maya, markaas ayuu ku yiri: oofi nadarkaaga” (w.w.Abuu Daawuud).
- Belo iyo baasaysiga: sida ku xusanba xadiiskii Cabdullaahi bin Mascuud (a.k.n) oo ahaa “Baasaysigu (marka ad shay aragto sida bahal midab gaar ah len inaad sharaysato oo aad istiraahdo balaayo ayuu soo jiidayaa) waa shirki, sidaas ayuu laba gorr yiri” (w.w.Abuu Daawuud iyo Ibnu Majah).

  Isku soo duuduuboo, wax uusan sharcigu ka dhigin sabab wax lagu dheefo, qofkii ka dhigta wax wax lagu dheefo wuxuu kudhacay shirki ama wadadiisii ayuu qaaday.

4. **In la rumeeyo Ilaaheey magacyadiisa iyo tilmaamihiisa**: waxaa sidaas laga wadaa in si aan labo-labayn lahayn loo citiqaadiyo  in Alle (sare ahaayaye) uu leeyahay magacyo kuwa ugu wanaagsan iyo tilmaamo kuwa ugu sareeya, loona sugo wixii wixii uu isagu isku timaamay ama Nabigiisu ku tilmaamay oo ah tilmaamaha sheegaya inuu kaamil yahay iyo inay awoodu isaga ku aruurto,in sidaas loo sugo iyadoo aan khalqiga loo ekaysiin,loona samayn qaab iyo si go'an, sababtoo ah isaga kaliya ayaa yaqaana tilmaamihiisa xaqiiqadooda, sidoo kalena laga reebo oo loo diido wixii uu naftiisa u diiday ama Nabigiisu u diiday oo ah tilmaamaha nusqaanta iyo u ekaanta makhluuqa,sidaas ayaa looga reebayaa iyadoo aan sida saxda laga leexin oo aan wax laga bedelin, lana tilmaama tirin.

Ilaaheey wuxuu yiri"

{ وَلِلَّهِ الأَسْمَاءُ الْحُسْنَى فَادْعُوهُ بِهَا وَذَرُوا الَّذِينَ يُلْحِدُونَ فِي أَسْمَائِهِ سَيُجْزَوْنَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ (١٨٠) }
الأعراف:١٨٠

"Ilaaheey wuxuu leeyahay magacyada ugu wanaagsan ee magacyadas uga barya waxa aad ka rabtiin, iskana dhaafa kuwa magacyadiisa wax ka bedela, kuwaas waa laga abaalmarin doonaa camalkooda xun oo ay adunka ku samayn jireen" (Al acraaf:180).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ لَيْسَ كَمِثْلِهِ شَيْءٌ وَهُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ (١١) } الشورى:١١

"Ma jiraan wax Ilaaheey la mid ah ama shabahaa, waa mid wax maqla waxna arka oo aysan waxba ka qarsanayn" (Al shuuraa:11).

Magacyadiisa iyo tilmaamihiisu waa kuwo laga ogaan karo oo kali ah kitaabka iyo sunnada oo caqligu uusan kaligiis ogaan Karin,sidaas awgeed laguma tilmaami karo waxuusan isagu isku tilmaamin ama uusan Rasuulkiisu ku tilmaaminoo lama dhaafi karo Qur'aanka iyo sunnada, wixii uu Alle ka aamuso ama Rasuulkiisu ka aamuso oo tilmaamo ah waxaa waajib ah in  laga aamuso lagana istaago.

Qofkii ku dhawaaqana lawaydiiyo inuu kala cadeeyo, oo hadii uukawado macne saxan laga aqbalo macnahaas,dibna loogu celiyo eraygii uu la yimid, hadii uu macne aan sax ahayn uu ka wadana dib loogu celiyo eraygaas iyo macnaha qaldan oo uu xambaarsan yahay.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَلا تَقْفُ مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ إِنَّ السَّمْعَ وَالْبَصَرَ وَالْفُؤَادَ كُلُّ أُولَئِكَ كَانَ عَنْهُ مَسْئُولا (٣٦) }الإسراء:٣٦

“Ha raacin wax aadan ogayn, ee iska hubi, sababtoo ah: qofka waa la waydiinayaa wax kasta oo uu u isticmaalo maqalkiisa, aragiisa iyo qalbigiisa” (Al  israa:36).

Magacyada Ilaaheey waxay wanaagga ka gaartey meesha ugu sarraysa, waana tilmamo uu leeyahay, tilmaamihiisuna waa kuwo kaamil ah oo aysan nusqaani ku jirin. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَلَهُ الْمَثَلُ الأَعْلَى فِي السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ (٢٧) } الروم:٢٧

“ Ilaaheey wuxuu leeyahay tilmaanta ugu saraysa ee wax  kasta oo lagu tilmaamo, waa Alle awood iyoxikmodhamaystiran leh” (Al ruum:27).

Tilmaamahaasi waa kuwo xaqiiqo ah oo waakib tahay oo lagu macneeyo macneheeda muuqda iyada oo aan wax laga bedelin. Waana xaaraan in macneheeda la leexiyo oo iyadoo khalqiga loo ekaysiinayo ama loo abuurayo magacyo uusan isagu isku magacaabin ama sanamyada la huwiyo magacyo kuwiisa laga sooqaatay, sidaa Allaata oo ka tiid ilaah,Al cuzzaa, oo ka timid caziiz, iyo Manaata oo ka timid Al mannaan.

Waxaa waajib ah in Ilaaheey lagu baryo marka la baryayo, sidoo kalena lagu cibaadaysto.waxaa waajib ah in tiradooda la yaqaan, macnahoodana la fahmo, laguna fekero radka aad ka tegayso, laguna camalfalo sida ay tusinayso, sidaasina waa wax la barto waxa ugu sharafta badan.

Waxay tilmaamaha Ilaaheey u qaybsamaan marka loo fiiriyo sida ay Alle ulaxiriiraan labo qaybood:

1.*Tilmaamo ay naftiisu leedahay*: waa kuwa aan laasima ilaaheey lafahaantiisa (ceebta la’) sida nolosha, maqalka,araga, cilmiga,awooda,rabitanka,xikmada, awooda iyo kuwa kale.

2. *Tilmaamo la xiriira ficilkiis*a:waa kuwa la xiriira Ilaheey doonitaankiisa iyo xikmadiisa,wuxuu sameeyaa marka uu rabo iyo sida uu rabo, hadba sida ay dhigayso xikmadiisu, sida ka saramarida carshiga, soo degista, jeclaanta, necbaanta, faraxa, yaabka, qosolka, imaatinka iyo kuwa kale oo ku soo arooray Qur’aanka ama ku yimid sunnada saxda ah.

Qaarkood marka la tilmaamayo waxaa la siiyaa labadaas tilmaamoodba, sida hadalka oo kale oo marna lagu tilmaamo inuu yahay tilmaan uu ilaaheey lafahaantiisa u leeyahay, marna lagu tilmaamo inuu yahay tilmaan uu leeyahay falkiisu. Marka loo fiiriyo warka guntiisa waa wax uu Alle mar walba leeyahay, marka loo fiiriyo warka qaybihiisana waa tilmaan uu falku leeyahay. Waxaa la yiraahdaa tilmaantaas oo kale oo mid nooc ahaanteedu uu qadiimyahay,laakiin marka loo fiiriyo hadba in warka qaarkiis soo biirana waxaa lagu magacaabaa inay tahay mid soo biirtay oo aan qadiim ahayn.

Qaarkoodna waxaa lagu tilmaamaa inay yihiin tilmaamo khabari ah : waa kuwa sida lagu ogaadaa ay tahay nusuusta laakiin uusan caqligu garan Karin, sida wejiga, gacmaha, indhaha,cagtaiyo wixii kale oo si saxan u soo arooray.

Waxaa ka mid ah tilmaamaha Ilaaheey  ee ku sugan kitaabka iyosunnada isku-raacida culumada islaamka:

1.Tilmaanta ah saraynta, waana saddex nooc:

b) In darajadiisu sarrayso, oo tilmaan kasta uu leeyahay heerkeeda ugu sareeya oo ugu dhamaystiran.Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَلِلَّهِ الْمَثَلُ الأَعْلَى } النحل:٦٠

“Ilaaheey wuxuu leeyahay tilmaamaha ku fiican oo ugu sarreeya” (Al naxli:60).

t) Inuu ka awood badan yahay oo ka adag yahay cid walba, aysana suurtagal ahayn in wax loo dhibo. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَهُوَ الْقَاهِرُ فَوْقَ عِبَادِهِ } الأنعام:١٨

“Ilaaheey  waa mid ka adag cid walba isagoo ka sareeya adoomadiisa” (Al ancaam:18).

j) In isaga laf-ahaantiisu uu kasareeyo todobada samo, ka koreeyo Carshiga isagoo ka baxsan khalqigiisa, isaga wax ka mid ahi kuma dhexjiraan khalgigiisa, wax khalqiga ka mid ahina kuma dhexjiraan Ilaaheey (c.n.k). Alle wuxuu yiri:

“Ma rumaydeen Allaha kasareeya samada” (Al mulk 16).

Waxaa ku xusan saxiixul Muslimka inuu Nabigu (n.n.k.h) gabar adoon ah waydiiyey (halkee jiraa Allaah?),waxay ku tiri: samada korkeeda, wuxuu ku yiri:yaan ahay? Waxay tiri: waxad tahay:Rasuulkii Ilaaheey, markaas ayuu qofkii iyada iska lahaa wuxuu ku yiri: xoreey waa mu'minade" .

Waxay wada sheegtay adilada kala ah kitaabka, sunada, ijmaaca, caqliga iyo fitrada in la sugo sarraynta Ilaaheey. Adillada sidaas ku soo aroortayna tirsi ma lahan, sarrayntuna waa tilmaan uu Ilaaheey laf-ahaantiisu leeya-hay.

2. Sifada ka saraynta Carshiga, Ilaaheey waxaa uu yiri:

{ ثُمَّ اسْتَوَى عَلَى الْعَرْشِ } الأعراف:٥٤

"Alle wuu ka saremaray Carshiga" (Al acraaf: 54). Sidaas waxay ku soo aroortay lix meelood oo Qur'aanka ka mid. Meesha todobaad waa aay-adda shanaad ee suuradda Daahaa oo ah "Allaha Raxmaan ah wuxuu ka sare maray Carshiga".

Al-istiwaa: waa in Alle uu ka sare maray carshigiisa ka dib uu abuuray cirka iyo dhulka, ka sare marid isaga u qalanta waynaantiisa, lamana mid ahan sida ay maqluuqaadku wax uga sare maraan. Waana tilmaan la xiriirta ficilkiisa.

3. Sifada hadalka: Alle wuxuu yiri:

{ قُلْ لَوْ كَانَ الْبَحْرُ مِدَادًا لِكَلِمَاتِ رَبِّي لَنَفِدَ الْبَحْرُ قَبْلَ أَنْ تَنْفَدَ كَلِمَاتُ رَبِّي وَلَوْ جِئْنَا بِمِثْلِهِ مَدَدًا (١٠٩) } الكهف:١٠٩

"Waxaad ku tiraahdaa: haddii ay baddu ahaan lahayd qad oo la damco in la qoro kalaamkailaaheey waxaa dhamaan lahaa biyaha badda (xataa weliba hadii intii ay ahayd oo kale lagu soo daro) inta aysan dhamaan kalimadaha Ilaaheey" (Al kahfi:109).

Waxaa kale oo Alle yiri:

{ وَكَلَّمَ اللَّهُ مُوسَى تَكْلِيمًا } النساء:١٦٤

"Ilaaheey waxaa uu si xaqiiqo ah ula hadlay Muuse" (Al nisaa:164).

Waxaa uuEebbe yiri:

{ وَلَمَّا جَاءَ مُوسَى لِمِيقَاتِنَا وَكَلَّمَهُ رَبُّهُ } الأعراف:١٤٣

“Markii uu Muuse ku yimid waqtigii loo qabtay oo uu Alle lahadlay” (Al acraaf:143).

Sifada kalaamku waa in uu Alle u hadlo si xaqiiqo ah, uuna ku hadlo war xaqiiqo ah oo la maqlo ookakooban xarfo iyo cod  oo aan shabihin midka makhluuqa,wuxuuna hadlaa marka uu doono,kuna hadlaa waxa uu doono, una hadlaa sida uu doono, wuxuuna ku hadlaa war run iyo cadaalad ah, wuxuu kuhadlaa erayo  aan dhamaan, weligiis waa hadli jirey waana hadli doonaa weligiis.Hadalku waa tilmaan uu Alle leeyahay oo marka la fiiriyo meesha salka u ah warka waa tilmaan uu laf-ahaantiisu leeyahay, dhinaca kalena ah tilmaan uu ficilkiisu leeyahay,marka loo fiiriyo warka mid mid.

Noocyadaas tilmaamaha ah oo dhan waa xaq waana xaqiiqo, waxaana waajib ah in la sugo oo sida ay u soo arooreen loo qaato iyadoo aan wax-ba laga bedelin lana macne tirin, aysana la socon ekaysiin iyo in qaabka ay yihiin la dhexgalo, sidaasna waxaa lagula dhaqmayaa sifooyinka iyo tilmaamaha Ilaaheey oo dhan, qofkii sifooyinka siyaabo kala duwan ula dhaqmaana isagaa iska maagay isaga oo aan haysan wax daliil ah.

Waxaa habaabay oo garab maray sidaas oo aan magacyada Ilaaheey ula dhaqmin sidii la rabey dhawr qolo (kooxood) oo ka mid ah dadka islaamka ku abtirsada,waxayna kala yihiin:

1.Ahlu-tamtiil oo laga wado qolo Alle ku shabahaan khalqigiisa, waxaana keenay inay ku talaxtageen sugidda tilmaamaha Ilaaheey ilaa arrintu la gaartay inay khalqigiisa u ekaysiiyaan, waayna ku andacoodeen inay sidaasi tahay sida ay tusinayso nusuustu, sababtoo ah Alle wuxuu dadka kula hadlay wixii ay ku yiqiineen makhluuqaadka.

Waxaa warkooda looga jawaabayaa arrimahaan soo socda:

Koowaad: Ilaaheey wuxuu diiday inuu leeyahay cid u dhiganta ama u dhow, waxaana sidaas sheegay aayado cad cad. Alle wuxuu yiri: “ma ay jiraan wax isaga oo kale ah” (Al shuuraa:11).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ فَلا تَجْعَلُوا لِلَّهِ أَنْدَادًا وَأَنْتُمْ تَعْلَمُونَ } البقرة:٢٢

"Ilaaheey ha u samaynina kuwo isaga oo kale oo aad caabudaan, idinka oo og in uu Alle gaar u leeyahay abuurista, cibaadada iwm" (Al baqarah:22).

"Mana uu lahan Ilaaheey qof isaga kala mid ah xagga magacyada, sifooyinka iyo ficillada" (Al ikhlaas:4).

Suurtogalna ma ahan in warka Ilaaheey uu noqdo mid iska hor imaanaya.

Labaad:Caqliga saliimka ah wuxuu diidayaa in Allaha dhamayska tiran oo wax abuuray uu la mid noqdo addoonka la abuuray oo aan naftiisa wax u tari karin. Sida uusan isagu u lahayn wax shabaha ayaa tilmaamihiisuna waxaysan u lahayn tilmaamoshabaha.

Saddexaad: Alle wuxuu dadka kula hadlay waxa ay fahmayaan marka loo fiiriyo xagga macnaha asalkiisa, laakiin kama dhalanayso in la wadaago macnaha guud in la iskala mid noqdo xagga waxa layahay iyo qaabka. Isku ekaanshaha magacyada makhluuqaadku sida aysan uga dhignayn inay isku mid yihiin sida erayga maqalka, aragga, awoodda, gacanta, wejiga ayaa sidoo kale waxaan iskumid ahayn magacyada isku eg ee ay leeyihiin Alle iyomakhluuqaadkiisu, weliba way ka sii kala fog yihiin.

2. Ahu-tacdiil: oo ah qolo ku talaxtageen inay Alle ka hufaan oo ka fogeeyaan wax kasta oo nusqaan ah ilaa ay arrintu la gaartay inay Alle ka fogeeyaan oo udiidaan wixii uu xaqqa u lahaa in loosugo, dhibkuna wuxuu yimid inay istuseen in haddii Ilaaheey loosugo tilmaamihiisa uu ay ka dhalanaydo inuu la mid noqonayo khalqigiisa, maadaama tilmaamahaasi ay yihiin kuwo ay sidoo kale ku tilmaaman yihiin makhluuqaadku, sidaas awgeedna waxay u arkeen inay dafiraan inuu tilmaamahaas leeyahay. Markaas ayey waxay Alle u sugeen inuu jiro isagoo aan sifooyin lahayn. Kuwa ugu xag-jirsan xagga in Alle laga xayuubiyo tilmaamihii iyo magacyadii uu lahaa waa qolo la yiraahdo Qaraamido oo yiraahdeen dhihi mayno Ilaaheey waa jiraa, sidoo kalena dhihi mayno ma jiro. Waxaa ku xiga Jahmiyada oo iyagu diideen Ilaaheey magacyadiisa iyo tilmaamihiisa. Waxaa ku sii xiga Muctasilada oo iyagu ogolaadeen magacyada laakiin diideen tilmaamihiisa.

Warkooda waxaa lagu burrinayaa oo looga jawaabaya arrimahaan:

*Ilaaheey wuxuu naftiisa u sugay tilmaamo ku xusan aayado cadcad, wuxuuna xusay iyadoo ay la socoto in Alle laga fogaynayo in khalqigu uu la mid noqdo, “Wax Alle la mid ahi ma jiraan, waa Alle wax maqlaoo wax kasta arka” (Al shuuraa:11), suurtagalna ma ahan in warka Alle uu noqdo mid iska hor-imaanaya.

* In la sugo jiritaan Alle  oo aan wax tilmaan ah lahayn sida nolol, cilmi iwm,wax jira ma noqonayo ee waxa ay sheegayaan waa wax aan maskax-da soo dhaafayn oo aan wax jira noqonayn, sidaas awgeed warkoodu wuxuu ku biyo shubanayaa in la diido jiritaanka Ilaaheey.

*In lagu tilmaamo erayo guud wax cayiman sida qof, kama ay dhalanay-so haddii shay kale lagu tilmaamo inuu isla tilmaantii yahay, ee iyadoo timaantu ay magaca guud wadaagto ayaa haddana waxay isku bedelay-saa hadba waxa la raacsiiyo, oo labada waxyaabood iyagoo magaca guud wadaaga ayeysan haddana xaqiiqo ahaan isku ahayn oo aysan wax walba wadaagin.

3.Ahlu-ta’wiil, waa kuwa citiqaadiyeen in nusuusta ku soo aroortay til-maamaha Alle qaarkood aysan nusuustaasi tusinaynin tilman dhab ah oo Alle leeyahay,ka dibna isku dayeen inay nusuustaas u raadiyan macneyaal kale oo ay ku sidkaan, sidaasna waxay samaynayaan iyagoo aan haysan wax daliil ah oo sax ah oo u suurtagelinaya inay nusuusta sidaas u qoor-qabtaan, iyagoo qalmaroojintaas nusuustana ku magacaabaan *ta’wiil*.

Kuwaasna waxaa warkooda lagu burrinayaa arrimahaan soo socda:

*Ilaaheey isagaa naftiisa cid walba ka og, cid walbana ka war wanaagsan, Rasuulkiisuna (n.n.k.h) isagaa cid walba ka aqoon og Rabbigiisa, kana run badan cid walba, kana wax bayaanin og cid walba, umadana ah qofka kharka ugula jecel, side hadaba uu qof warkooda u jebin karaa oo warkoo-da uga dhigi karaa arrin aan caddayn oo lagu baadiyoobo.

*Warka waxaa salu ah uu xaqiiqo yahay, sidaas awgeed lama ogola oo sax ma ahan in macnaha muuqda ee warku leeyahay laga leexiyo iyadoo anla haynin daliilsax ah oo sidaas sheegaya, meeshaana laguma hayo daliilkaas.

*Nabigu (n.n.k.h) wuxuu dadka u cadeeyey diintii xag Alle uga timid, wuxuuna u soo gaarsiiyey si cad, sidaa awgeed suurtogal ma ahan inuu ka tagey baabkaan iyo qaybtaan muhiimka ah oo uusan caddayn ujeedadaas iyo  macnahaas ay ku andacoodeen kuwaas magacyada iyo tilmaamaha ka leexiyeen oo ka duween macnahoodii rasmiga ahaa.

4. ahlu-tajhiil, oo ah kuwa citiqaadiyeen in macneyaasha ay leeyihiin waxyaabaha uu Rabbi naftiisa ku tilmaamay ama Nabigiisu (n.n.k.h) ku timaamay ay yihiin kuwo aan laaqoon macnahooda, Alle kaligiisna uu yaqaan, si dadku ayku ogaan karaahina aysan jirin,qaabkooda iyo  dariiqadooda waxay ku magacaabaan (Al tafwiid).

Kuwaasna waxaa warkooga looga jawaabayaa siyaabahaan soo socda:

*Waxaan suurtagal ahay in wadada loo maro ogaanshaha Ilaaheey ay tahay waddo awdan, oo aysan jirin caqli iyo naqli (aayad ama xadiis) sidaas tusinayaan.

*Ilaaheey wuxuu Qur’aanka ku soo dejiyey luuqadda carbeed oo macnaheedu cad yahay, dadkana wuxuu faray inay inay macnahiisa dhuuxaan, mana jiraan wax uu ka soo reebay oo uu yiri intaasi kuma jirto. Marka sidaasi waxay tusinaysaain laogaan karo macnayaasha uu leeyahay. Laakiin sida dhabta ah oo ay tilmaamaha Ilaaheey iyo magacyadiisu yihiin iyoweliba qaabka ay yihiin waa waxa ogaantooda loo daayoIlaaheey oo kali ah.

*Sidaas ay yiraahdeen waxaa kadhalanaya in jahlilagu xukumo dadkii iyo culumadii hore iyo salafkii umadda, oo lagu tilmaamo inay la mid yihiin dadka aan waxba qorin waxna aqrin oo uun Quraankana ka ogayn wax aan ahayn wax ay iska rajaynayaan, ooaayadaha tilmaamaha Alle ka hadlayaan ay noqdaan wax la mid ah sida xarxariiqa uu saaxirku sameeyo isagoo leh waa balaayo xijaab, laguna gaaro ganaha laleeyahay,waxyaabahaas uu xarxariiqayo oo aan la aqoon macnahooda.

# Rumaynta malaa’igta

Waa in si aan labolabayn lahayn loo citiqaadiyo inuu Ilaaheey u abuuray caabudistiisa malaa’ig, oo shaqadooda ka dhigay adeecidiisa oo kali ah, uuna gaar uga dhigay inay yihiin kuwa isaga u dhow, uuna dejiyey samada, uuna siiyey awood ay ku fuliyaan amarkiisa.

In larumeeyaana mid dhamaystiran noqon mayso haddii aan la samayn arrimahaan soo socda:

**1.In la rumeeyo inay yihiin adoomo la karaameeyey oo baariyaal ah oo Alle u dhow,Rabbigoodna u dhega-nugul oo ka cabsanayaan.**

Ma ay lahan wax kamid ah tilmaamaha Rabinimada iyo Ilaahnimada.Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَقَالُوا اتَّخَذَ الرَّحْمَنُ وَلَدًا سُبْحَانَهُ بَلْ عِبَادٌ مُكْرَمُونَ (٢٦) لا يَسْبِقُونَهُ بِالْقَوْلِ وَهُمْ بِأَمْرِهِ يَعْمَلُونَ (٢٧) يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلا يَشْفَعُونَ إِلا لِمَنِ ارْتَضَى وَهُمْ مِنْ خَشْيَتِهِ مُشْفِقُونَ (٢٨) } الأنبياء:٢٦-٢٨

“ Mushrikiintu waxay yiraahdeen Ilaaheey wuxuu leeyahay ilmo, Alle wuu ka nasahan yahay inuu ilmo yeesho, malaa’igtu waa adoomo la karaameeyey, war kalama ay hormarayaan oo ma ay hadlayaan ee waxay sameeyaan oo kali ah wixii uu faro, Alle wuu ogyahay wixii ay sameeyeen iyo waxa ay samayn doonaan, mana u shafeeco qaadan qof uu raalli ka yahay ma ahane qof kale, maadaama ay Alle ka cabsanayaana waxay iska jiraan inay isaga khilaafaan” (Al anbiyaa: 26-28).

Waxaa kale oo Eebbe wayne yiri:

{ يَخَافُونَ رَبَّهُمْ مِنْ فَوْقِهِمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ } النحل:٥٠

“Waxay ka cabsanayaan Rabigooda oo kasareeya, waxayna sameeyaan waxa lafaro” (Al naxli:50).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ لا يَعْصُونَ اللَّهَ مَا أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ} التحريم:٦

“Ma ay caasiyaan oo ma khilaafaan waxa Alle faro, waxayna sameeyaan waxa la faro” (Al taxriim:6).

Waxaa kale oo uu yiri:

“Waa kuwo wanwanaagsan oo baariyaal ah” (Cabasa: 16).

Waxaa sidoo kale uu yiri:

{ وَيَوْمَ يَحْشُرُهُمْ جَمِيعًا ثُمَّ يَقُولُ لِلْمَلَائِكَةِ أَهَؤُلَاءِ إِيَّاكُمْ كَانُوا يَعْبُدُونَ (٤٠) قَالُوا سُبْحَانَكَ أَنْتَ وَلِيُّنَا مِنْ دُونِهِمْ بَلْ كَانُوا يَعْبُدُونَ الْجِنَّ أَكْثَرُهُمْ بِهِمْ مُؤْمِنُونَ (٤١) } سبأ:٤٠-٤١

“Nabiyoow, waxaad dadka uga sheekaysaa maalinta aan isku keeni doono mushrikiinta iyo malaa’igtii ay caabudi jireen, ka dibna uu Alle ku dhihi doono malaa’igta isagoo canaananaya: kuwaasi ma adinka ayey idin cabudi jireen, markaas oo ku jawaabayaan Ilaahoow adiga ayaa ceeb iyo nusqaan ka nasahan, adiga ayaa ah innaga waligeena iyo qofka aan ku tiirsanahay namana aysan caabudi jirin ee waxay caabudi jireen jinniga oo intooda badani ay rumaysan yihiin” (Saba’:40-42).

Waxaa sidoo kale oo yiri:

{ قَالُوا سُبْحَانَكَ لا عِلْمَ لَنَا إِلا مَا عَلَّمْتَنَا إِنَّكَ أَنْتَ الْعَلِيمُ الْحَكِيمُ } البقرة:٣٢

“Malaa’igtii waxay yiraahdeen: innagu ma aan lihin cilmiaan ahayn midkii aad nabartay,waxaad tahay Ilaaheeyoow mid cilmi iyo xikmo kaliya ah” (Al baqarah:32).

2.**In ay yihiin kuwo loo bixiyey magacyo wanaagsan,** midkii an ogaano magaciisa waan rumaynaynaa, midkii aanan magaciisa ogaanna si guud Ayaan urumaynaynaa. Waxaa ka mid ah magacyada malaa’igta ooaan ogaanay: Jibriil, Miikaa’iil, Israafiil, Malakulmawt, Maalik, Ridwaan, Munkar iyo Nakiir,sida ku xusanba kitaabka iyo sunnada.

3. **In laga abuuray nuur oo ay leeyihiin garbo, iyagoo ah kuwo leh qaabdhismeedyo waawayn oo kala duwan.**

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ الْحَمْدُ لِلَّهِ فَاطِرِ السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضِ جَاعِلِ الْمَلائِكَةِ رُسُلا أُولِي أَجْنِحَةٍ مَثْنَى وَثُلاثَ وَرُبَاعَ يَزِيدُ فِي الْخَلْقِ مَا يَشَاءُ إِنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ } فاطر:١

“Waxaa amaan oo dhan leh Allihii abuuray samada iyo dhulka, malaa’igtana ka dhigay rasuullo loo diro cidii la rabo, kuwaas oo leh garbo ay ku duulaan oo labo labo, saddex saddex iyo afar afar, uunkiisa wuxuu ku soo daraa waxa uu rabo, wax walbana wuu awoodaa” (Faadir:1).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: "Malaa'igta waxaa laga abuuray nuur" (w.w.Muslim).

Waxaa ku xusan Bukhaari iyo Muslim in Rasuulku (n.n.k.h) uu arkay Jibriil isagoo leh muuqaalkii lagu abuuray, isagoo leh lix boqol oo garab" (waxaa soo warinaya xadiiskaan Caa'isho iyo Ibnu Mascuud).

Waxaa kale oo uu yiri: "waxaa la ii idmay inaan idin kaga sheekeeyo malag ka mid ah kuwa sida Carshiga, waxaa u dhexeeya dhegtiisa bayrac-deeda iyo garabkiisa in loosocdo mudo gaaraysa todobo boqol oo sano" "w.w.Abuu Daawuud).

Waa wax la abuuray oo xaqiiqo ah ee ma ahan awood macnawi ah (aan lahayn abuur xaqiiqo ah), sida ay ku andacoodeen dadka aan wax u fiirsan qaarkood.

Iyagu waa uun tiro badan oo uusan tirakoobi karin cid aanahayn Allihii abu-uray. Waxaa ku jiray xadiis uu soo wariyey Anas oo ku xusan Bukhaari iyo Muslim oo ka hadlaya qisadii ahayd in Nabiga looqaaday samada ka kor , ayaa waxaa ku jiray"in Nabiga (n.n.k.h) la tusay Albayt Almacmuur oo ku yaal samada todobaad, maalin walba waxaa ku tukada todobaatan kun oo malag, oo haddii ay ka baxaan aan weligood u soo noqonaynin oo markoo-dii ugu dambaysey".

### 4. **In ay yiihiin cibaado u istaaga iyagoo safan oo Alle ku tasbiixsan-aya.**

Waxaa lagu ilhamiyey inay Alle ku tasbiixsadaan oo amarkiisa fartoomaan,wuxuuna siiyey awood ay ku filiyaan amarka.

Alle wuxuu yiri:

{ وَمَا مِنَّا إِلا لَهُ مَقَامٌ مَعْلُومٌ (١٦٤) وَإِنَّا لَنَحْنُ الصَّافُّونَ (١٦٥) وَإِنَّا لَنَحْنُ الْمُسَبِّحُونَ (١٦٦)}
الصافات:١٦٤-١٦٦

"Malaa'igtu waxay tiri: malag walbaaba wuxuu leeyahay meel la yaqaan oo samada ku taal, waxaan nahay kuwo u istaaga cibaadada Alle iyaga oo safan, waxaan nahay kuwo Ilaaheey ka nasaha wax kasta oo nusqaan ah" (Al saafaad:164-166).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ فَإِنِ اسْتَكْبَرُوا فَالَّذِينَ عِنْدَ رَبِّكَ يُسَبِّحُونَ لَهُ بِاللَّيْلِ وَالنَّهَارِ وَهُمْ لا يَسْأَمُونَ} الأنبياء:٢٠

“Hadii ay mushrikiintu iska kibriyaan in ay Alle u sujuudaan, malaa’igta Alle agjoogta iskama kibriso oo weliba way ku tasbiixsadaan habeen iyo maal-inba iyaga oo aan ka daalaynin” (Al anbiyaa:20). Waxaa ku jirtey suuradda Al anbiyaa (aayada:20) in ay yihiin kuwo aan ka daalin shaqada loodiro.

Waxaa laga soo wariyey saxaabiga la yiraahdo Xakiim bin Xizaam (a.k.n) inuu yiri: mar uu Nabigu (n.n.k.h) la joogay asaxaabtiisa ayuu wuxuu ku yiri: ma maqlaysiin waxa aan maqlayo? Waxay yiraahdeen waxba ma maqalno, wuxuu yiri: waxaan maqlaa samada jiiqjiiqdeeda, mana lagula eedi karo inay sidaas samayso, sababtoo ah kuma jirto hal taako oo uusan malag ku rukuucsanayn ama ku sujuudsanayn” (w.w.Dabaraani, Albaanina waxaa uu yiri: waa saxiix).

5.**In ay yihiin kuwo laga qariyey in la arko**: iyagu waa caalam naga qarsoon oo aysan ogaan Karin dareemayaasha insaanku inta ay aduunka joogaan, marka laga reebo dad uu Rabbi sidaas u ogolaaday, sida Nabigeena (n.n.k.h) oo arkay Jibriil oo sidii lagu abuuray ah, laakiin waxaa lagu arkayaaaakhiro. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ يَوْمَ يَرَوْنَ الْمَلائِكَةَ لا بُشْرَى يَوْمَئِذٍ لِلْمُجْرِمِينَ وَيَقُولُونَ حِجْرًا مَحْجُورًا } الفرقان:٢٢

“Maalinta ay gaaladu malaa’igta arkayaan (marka ay naftu ka bixi rabto, marka ay qabriga ku jiraan iyo qiyaamaha) uguma ay bishaaraynayaan janno ee waxay ku leeyihiin jannadu waa meel la idinka xaaraanti nimeey-ey “ (Al furqaan:22).

“Malaa’igtuna waxay uga soo gelayaan albaab walba” (Al racdi:23).

Ilaaheey wuxuu malaa’igta siiyey awood ay isugu ekaysiin karaan banii-aadamka, Alle wuxuu yiri:

{ فَأَرْسَلْنَا إِلَيْهَا رُوحَنَا فَتَمَثَّلَ لَهَا بَشَرًا سَوِيًّا } مريم:١٧

“Waxaan Maryam u soo dirnay malakul Jibriil, markaas ayuu wuxuu isugu soo ekeeyey sida qof  banii-aadam ah oo dhamaystiran” (Maryam:17).

Waxaa Ilaaheey yiri:

{ وَلَقَدْ جَاءَتْ رُسُلُنَا إِبْرَاهِيمَ بِالْبُشْرَى قَالُوا سَلامًا قَالَ سَلامٌ فَمَا لَبِثَ أَنْ جَاءَ بِعِجْلٍ حَنِيذٍ (٦٩) فَلَمَّا رَأَى أَيْدِيَهُمْ لا تَصِلُ إِلَيْهِ نَكِرَهُمْ وَأَوْجَسَ مِنْهُمْ خِيفَةً قَالُوا لا تَخَفْ إِنَّا أُرْسِلْنَا إِلَى قَوْمِ لُوطٍ (٧٠) } هود:٦٩-٧٠

“Malaa’igtii ayaa waxay u yimaadeen Ibraahiim iyagoo ugu bishaaraynaya inuu Isxaaq u dhalan doono,uuna sii dhali doono Yacquub, waa salaameen, isna waa ka qaaday, ka dibna inta baxay ayuu durbaba keenay dibi la soo solay, markii uu arkay inaysan hilibka cunaynin ayuu falkooda saluugay,cabsi ayaana gashay isaga, waay ku yiraahdeen: ha cabsan waxaan nahay malaa’ig loo soo diray qawmka Luud” (Huud:69-70).

Eebbe wayne wuxuu yiri:

} وَلَمَّا جَاءَتْ رُسُلُنَا لُوطًا سِيءَ بِهِمْ وَضَاقَ بِهِمْ ذَرْعًا وَقَالَ هَذَا يَوْمٌ عَصِيبٌ (٧٧) وَجَاءَهُ قَوْمُهُ يُهْرَعُونَ إِلَيْهِ وَمِنْ قَبْلُ كَانُوا يَعْمَلُونَ السَّيِّئَاتِ قَالَ يَا قَوْمِ هَؤُلاءِ بَنَاتِي هُنَّ أَطْهَرُ لَكُمْ فَاتَّقُوا اللَّهَ وَلا تُخْزُونِ فِي ضَيْفِي أَلَيْسَ مِنْكُمْ رَجُلٌ رَشِيدٌ {هود:٧٧-٧٨

“Markii ay malaa’igteenu u timid Luud waa ka xumaaday, waana kamurugooday, wuxuuna yiri: waa maalin belo, (sababtoo ah ma uusan ogayn inay malaa’ig yihiin), waxaa u yimid qawmkiisii iyagoo ordaaya, waxayna ahaayeen kuwo sameeya xumaanta, makaas ayuu wuxuu ku yiri: waa kuwaas gabdhahaygii ee guursada, iyaga ayaa idin kaga wanaagsan waxa aad doonaysaan, Alle ka cabsada oo ha igu ceebaynina oo ha igu fadeexaynina martidayda, ma wuusan idin ku jirin nin waxgarad ah oo idinka celiya waxa aad samaynaysaan” (Huud:77-78). Malaa’igtaasi waxay ahaayeen kuwo isku soo ekaysiiyey rag. Sidaas oo kale Nabiga (n.n.k.h) ayaa waxaa u yimid Jibriil, isagoo isku soo ekaysiiyey nin wata dhar aad u cad, timihiisu aad u madoow yihiin. Marmarna wuxuu u imaan jirey isagoo isku soo ekaysiiyey Dixya Alkalbi (a.k.n).

6.**In ay yihiin kuwo loo wakiishay shaqooyin kala duwan,** oo garab socota shaqadoodii aasaaska ahayd oo ahayd cibaadada Alle iyo ku tasbiixsigiisa. Waxaa ka mid ah shaqooyinkooda:

- In ay waxyiga soo gaarsiiyaan rususha, sidaasi waa shaqadii Jibriil,Ilaaheey wuxuu yiri:

{ قُلْ نَزَّلَهُ رُوحُ الْقُدُسِ مِنْ رَبِّكَ بِالْحَقِّ لِيُثَبِّتَ الَّذِينَ آمَنُوا وَهُدًى وَبُشْرَى لِلْمُسْلِمِينَ }النحل:١٠٢

"Waxaad ku tiraahdaa anigu ma aanan soo samaysan Qur'aanka, ee waxaa Qur'aanka soo dejiyey Jibriil isagoo run iyo cadaalad miiran ah, kana keenay Ilaaheey, si uu ugu noqdo mu'miniinta mid suga oo hanuuniya, muslimiintana uu ugu noqdo bishaaro" (Al naxli:102).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ وَإِنَّهُ لَتَنْزِيلُ رَبِّ الْعَالَمِينَ (١٩٢) نَزَلَ بِهِ الرُّوحُ الأَمِينُ (١٩٣) عَلَى قَلْبِكَ لِتَكُونَ مِنَ الْمُنْذِرِينَ (١٩٤) }
الشعراء:١٩٢-١٩٤

"Qur'aankaani wuxuu ka yimid Ilaaheeygii lahaa caalamka oo dhan, waxaana soo dejiyey oo keenay Jibriilkii aaminka ahaa, isagaa kuu aqriyey ilaa uu qalbigaagu ka xafiday, si aad uga mid noqoto rususha dadkooda uga digaan cadaabta iyo ciqaabta Alle" (Al shucaraa:192-194).

- Soo di'inta roobka iyo doog soo dhalinta: shaqadaasi waa midda Miikaa'iil. Waxaa uu soo wariyey Cabdulaahi bin Cabaas in yuhuudu ay Nabiga (n.n.k.h) ku yiraahdeen hadii aad na dhihi lahayd in Malaga diinta kugu soo dejiyaa uu yahay Miikaa'iil waan ku rumayn lahayn" (w.w. Axmad bin Xanbal).
- In la yeeriyo buunka aakhir: shaqadaasi waa midda uu qabto Israafiil, laba goor ayaa la yeerinayaa, marka hore waxaa dhimanaya wax kasta oo noole ah, marka labaadna qabriyada ayaa laga soo baxayaa. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَنُفِخَ فِي الصُّورِ فَصَعِقَ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَمَنْ فِي الأَرْضِ إِلا مَنْ شَاءَ اللَّهُ ثُمَّ نُفِخَ فِيهِ أُخْرَى فَإِذَا هُمْ قِيَامٌ يَنْظُرُونَ } الزمر:٦٨

"Waxaa la afuufayaa buunka markaas waxaa dhimanaya noole kasta oo jooga cirka ama dhulka markii laga reebo cidii aan loogu talagelin, ka dib hadana waa la afuufayaa, markaas ayaa dadku ka soo istaagayaan qabriyadooda iyagoo fiirinaya waxa lagu samaynayo" (Al zuar:68).

Sadexdaas malag oo kala ah Jibriil, Miikaa'iil iyo Israafiil iyaga ayaa maax u ah malaa'igta, sababtoo ah shaqadoodu waxay la xiriirtaa nolosha, waxaa Jibriil loo xilsaaray nolosha quluubta, Miikaa'iilna nolosha waxa dhulka ka soo baxa, Israafiilna nolosha oogada insaanka.

Waxaana ugu sharaf badan Jibriil (c.s) waana Ruuxul-qudsi.

- Ilaalinta iyoxafidida banii-aadamka: Ilaaheey wuxuu yiri:

{ لَهُ مُعَقِّبَاتٌ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِ يَحْفَظُونَهُ مِنْ أَمْرِ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ لا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّى يُغَيِّرُوا مَا بِأَنْفُسِهِمْ وَإِذَا أَرَادَ اللَّهُ بِقَوْمٍ سُوءًا فَلا مَرَدَّ لَهُ وَمَا لَهُمْ مِنْ دُونِهِ مِنْ وَالٍ } الرعد:١١

"Ilaaheey wuxuu leeyahay malaa'ig insaanka ka xigaan horay iyo gadaal oo isaga ilaalinayaan maadaama uu Ilaaheey sidaas amray, Alle ma bedelo nicmo uu dad siiyey hadii aysan iyagu bedelin wixii la faray, hadii uu Ilaaheey qolo la damco dhibaatana cid ka celin kartaa ma jirto, iyaguna ma ay lahan cid arrintooda gacanta ku haysa oo dhibka ka celisa, dheeftana u soo jiida" (Al racdi:11).

- Ilaalinta camalka ay dadku qabtaan:Ilaaheey wuxuu yiri:

{ إِذْ يَتَلَقَّى الْمُتَلَقِّيَانِ عَنِ الْيَمِينِ وَعَنِ الشِّمَالِ قَعِيدٌ (١٧) مَا يَلْفِظُ مِنْ قَوْلٍ إِلَّا لَدَيْهِ رَقِيبٌ عَتِيدٌ (١٨) } ق:١٧-١٨

"Marka ay malaa'igta qofka ka jiraan midig iyo bidix ay qorayaan acmaashiisa, midka midigta ka jiraa wuxuu qorayaa xasanaadka (samaanta) midka bidixda ka xigaana wuxuu qorayaa xumaha, markii uu war ku hadlana waxa isha ku haya oo u diyaarsan mala oo wuu qorayaa warkaas " (Qaaf:17-18).

- In ay mu'miniinta u gargaaraan oo ay sugaan.Alle wuxuu yiri:

{ إِذْ يُوحِي رَبُّكَ إِلَى الْمَلائِكَةِ أَنِّي مَعَكُمْ فَثَبِّتُوا الَّذِينَ آمَنُوا سَأُلْقِي فِي قُلُوبِ الَّذِينَ كَفَرُوا الرُّعْبَ فَاضْرِبُوا فَوْقَ الأَعْنَاقِ وَاضْرِبُوا مِنْهُمْ كُلَّ بَنَانٍ }الأنفال:١٢

"Xasuusta markii uu Rabigaa (nabiyoow) u waxyooday malaa'igta (waa kuwii lagu biiriyey ciidankii muslimiinta markii lagu jirey dagaalkii Beder) : aniga ayaa idin la jira oo idin garab siinaya ee xoojiya mu'miniinta go'aamadooda iyo niyadooda, aniguna waxaan ku ridayaa gaalada qalbigooda argagax, ee gaalada qoorta ka jara, kuna dhifta kala goys kasta" (Al anfaal:12).

- In ay noolaha nafta ka soo qaadaan:waa shaqada Malakul-mawt. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ قُلْ يَتَوَفَّاكُمْ مَلَكُ الْمَوْتِ الَّذِي وُكِّلَ بِكُمْ ثُمَّ إِلَى رَبِّكُمْ تُرْجَعُونَ }السجدة:١١

“Waxaad ku tiraahdaa,waxaa nafta idin ka qaadaya Malakul-mawtkii la idiin xil-saaray,ka dibna Alle ayaad u soo noqonaydiin” (Al sajdah:11).

Alle wuxuu yiri:

{ حَتَّى إِذَا جَاءَ أَحَدَكُمُ الْمَوْتُ تَوَفَّتْهُ رُسُلُنَا وَهُمْ لا يُفَرِّطُونَ } الأنعام:٦١

“Qofka dhimashadiisa marka lagaaro waxaa nafta ka qaadaya Malakul-mawt iyo kaaliyeyaashiisa, mana ahan kuwo dayacaya wixii loo diray” (Al ancaam:61).

- In ay maydka wax ku su’aalaan qabriga: su’aashaasna waxaa qaabilsan labada mala gee la yiraahdo Munkar iyo Nakiir.

Waxaa laga soo wariyey Anas bin Maalik (a.k.n) inuuNabigu  yiri: “Marka qofka ladhigoqabrigiisa oo dadku ka tagaan ayaa waxaa u yimaada isagoo weli maqlaya dadkii ka tagey kabahooda shanqartooda ka dibna way soo fariisinayaan, waxayna ku oranayaan: maxaad ka leedahay ninkaan Muxamad ah (n.n.k.h)?markaas ayaa qofka mu’minka ah wuxuu leeyahay: waxaan yaqiinsanahay inuu yahay addoonkkii iyo Rasuulkii Ilaaheey, waxaa markaas lagu oranayaa fiiri booskii aad ku lahayd naarta waxaa laguugu bedelay boos jannada ku yaalla,  labadabana wuu arkayaa. Haddii uu munaafiq iyo gaal yahayna waxaa lagu leeyahay maxaad ka leedahay ninkaan Muxamad ah (n.n.k.h)? markaas ayuu wuxuu leeyahay ma garanayo,waxaan dhihi jirey waxa dadku yiraahdiin, waxaa lagu oranayaa: ma aadan garan waxa xaqa ah, mana aadan raaciin dadkii badbaaday, markaas ayaa waxaa lagu dhifanayaa bir wax lagu garaaco markaas ayuu inta qayliyo ayaa waxaa qayladiisa maqlaya wax kasta oo aan jinniga iyo insiga ahayn” (w.w.Bukhaari iyoMuslim).

Waxaa Tirmidiga ku jirey: marka maydka la geliyo qabriga waxaa u imaanaya labo mala goo madmadoow, oo midkood la yiraahdo”Munkar” midka kalena la yiraahdo “Nakiir” markaas ayey waxay ku leeyihiin maxaad ka oran jirtey ninkaan ?...” ilaa xadiiska dhamaadkiisa.

- In ay daryeelaan ilmaha uurka ku jira: in nafta lagu afuufo,risqigiisa la qoro, cimrigiisa la qoro, camalkiisa la qoro in uu yahay mid ayaan daran ama ayaan badan.

Waxaa laga soo wariyey C/hi bin Mascuud (a.k.n) inuu yiri: wuxuu Nabigu (n.n.k.h) noo sheeay [waana runloow, isagana run loo soo sheego] in qofka marka la abuurayo uu hooyadiis caloosheeda ku jirayo isagoo mani ah, ka dibna xinjir ayuu ahaanayaa intaa oo kale, ka dibna cad hilib ah ayuu ahaanayaa into kale, ka dibna waxaa loo soo dirayaa malag, waxaana la soo farayaa inuu soo qoro afar arimood: inuu soo qoro camalkiisa, risqigiisa,cimrigiisa iyo inuu yahay mid Ayaan daran ama Ayaan badan, ka dibna naf ayaa lagu afuufayaa…" ilaa xadiiska dhamaadkiisa (w.w.Bukhaari iyoMuslim).

- In ay xafidaan oo ilaaliyaan naarta: Alle wuxuu yiri:

{ وَمَا جَعَلْنَا أَصْحَابَ النَّارِ إِلا مَلائِكَةً } المدثر:٣١

"Kama aanan dhigin kuwa u xilsaaran naarta wax aan malaa'ig ahayn" (Al mudathir:31).

Waxaa uu yiri:

{ وَنَادَوْا يَا مَالِكُ لِيَقْضِ عَلَيْنَا رَبُّكَ قَالَ إِنَّكُمْ مَاكِثُونَ } الزخرف:٧٧

"Markii dembiileyaashii la geliyo ayey waxay u dhawaaqayaan Maalik oo ah maamulaha naarta, waxayna ku dhahayaan: rabbigaa nafta ha naga qaado si aan uga nasano dhibka aan ku jirno, markaas ayuu ku leeyahay meeshiina ayaad ku nagaanaysiin" (Al zukhruf:77).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قُوا أَنْفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا وَقُودُهَا النَّاسُ وَالْحِجَارَةُ عَلَيْهَا مَلائِكَةٌ غِلاظٌ شِدَادٌ لا يَعْصُونَ اللَّهَ مَا أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ }التحريم:٦

"Kuwa xaqqa rumeeyayoow, naftiina iyo ehelkiinaba ka ilaaliya naar, waxa lagu shidaa ay yihiin dad iyo dhagax, waxaa u xilsaaran inay dadka ku cadaabaan malaa'ig adadag oo naxariis daran oo aan Ilaaheey ka diidin waxa uu faro, oo sameeyaan waxa la faro" (Al taxriim:6).

- U dembi-dhaaf waydiinta mu'miniinta, uducayntooda, u bishaarayntooda iyo ku karaamayntooda jannada:

Alle wuxuu yiri:

{ الَّذِينَ يَحْمِلُونَ الْعَرْشَ وَمَنْ حَوْلَهُ يُسَبِّحُونَ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ وَيُؤْمِنُونَ بِهِ وَيَسْتَغْفِرُونَ لِلَّذِينَ آمَنُوا رَبَّنَا وَسِعْتَ كُلَّ شَيْءٍ رَحْمَةً وَعِلْمًا فَاغْفِرْ لِلَّذِينَ تَابُوا وَاتَّبَعُوا سَبِيلَكَ وَقِهِمْ عَذَابَ الْجَحِيمِ (٧) رَبَّنَا وَأَدْخِلْهُمْ جَنَّاتِ عَدْنٍ الَّتِي وَعَدْتَهُمْ وَمَنْ صَلَحَ مِنْ آبَائِهِمْ وَأَزْوَاجِهِمْ وَذُرِّيَّاتِهِمْ إِنَّكَ أَنْتَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ (٨) وَقِهِمُ السَّيِّئَاتِ وَمَنْ تَقِ السَّيِّئَاتِ يَوْمَئِذٍ فَقَدْ رَحِمْتَهُ وَذَلِكَ هُوَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ (٩) { غافر:٧-٩

"Malaa'igta sidaan Carshiga iyo kuwa ku wareegsan waxay Ilaaheey ka nasahaan nusqaan oo dhan iyagoo kuna amaanaya wax kasta oo uu mudan yahay, way rumeeyaan, waxayna dembidhaaf u warsadaan kuwa mu'miniinta ah, iyagoo leh "Ilaahoow wax walba waad ogtahay waadna u naxariisataa ee u dembidhaaf toobad keeneen oo wadadaadana raaceen, kana ilaali cadaabta Jaxiimo, Rabbigeenoow, iyaga geli jannooyinkii aad u balanqaaday,sidoo kalena Jannada geli dadka saalixiinta ah oo dhalay ama u dhaxay ama ay dhaleen dadkaa mu'miniinta ah, waxaad tahay Alle caziiz ah oo xikmad badan, Rabbiyoow ka ilaali waxa xun oo ka dhashay acmaashoodii xumayd, qofkii aad waxaas ka ilaaliso waa qof naxariis loogu roonaaday, waana liibaan wayn oo wax u dhigmaa aysan jirin" (Ghaafir:7-9).

Waxaa kale oo Ilaaheey uu yiri:

{ إِنَّ الَّذِينَ قَالُوا رَبُّنَا اللَّهُ ثُمَّ اسْتَقَامُوا تَتَنَزَّلُ عَلَيْهِمُ الْمَلَائِكَةُ أَلَّا تَخَافُوا وَلَا تَحْزَنُوا وَأَبْشِرُوا بِالْجَنَّةِ الَّتِي كُنْتُمْ تُوعَدُونَ (٣٠) } فصلت:٣٠

"Kuwa yiraahdeen: Rabigeenu waa Allaah, ka dibna ku toosnaadeen sharcigiisa, waxaa ku soo degaya marka ay dhimanayaan malaa'ig ku oranayaan:ha cabsanina hana murginina kuna bishaaraysta jannadii la idiin balan qaaday" (Fussilat:30).

Waxaa sidoo kale uu Alle yiri:

{ وَالْمَلَائِكَةُ يَدْخُلُونَ عَلَيْهِمْ مِنْ كُلِّ بَابٍ (٢٣) سَلَامٌ عَلَيْكُمْ بِمَا صَبَرْتُمْ فَنِعْمَ عُقْبَى الدَّارِ{ الرعد:٢٣-٢٤

"Malaa'igtu waxay albaab walba uga soo gelayaan ahlu-jannaha, iyagoo ku dhahaya: dhib oo dhan oo nabad gasheen maadaama aad ku soo samirteen Alle adeecistiisa, waxaana amaanan waxa la idinku abaalmariyey oo ah jannada" (Alracdi:23-24).

# Rumaynta kutubta

Waxaa laga wadaa in kutabta la rumeeyo rumayn aan labo-labayn lahayn in uu Alle ku soo dejiyey nabiyadiisa kutub oo dadka hanuun u ah, naxariis u ah, u caqlicelin iyo wacdi u ah, wax walbana cadaynayaan.

**In la rumeeyana waxaa ka dhalanaya arrimahaan:**

1.**In la rumeeyo inay Alle ka timid iyadoo xaq ah.**

Alle wuxuu yiri:

{ نَزَّلَ عَلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ وَأَنْزَلَ التَّوْرَاةَ وَالإِنْجِيلَ }آل عمران:٣

“Wuxuu Alle kugu soo dejiyey Qur’aanka isaga oo xaq ah, oo rumaynaya kutubtii ka horaydey, wuxuuna soo dejiyey Tawreed iyo Injiil” (Aalu cimraan:3).

Waa kutubtii Illaaheey, waana hadaladiisii,ma ay ahan malag warkiis, sidoo kalena ma ahan nabi la soo diray warkiis, waxay leedahay kutubtaasi ceeb ka ilaalin iyo daahirsanaan.

2.**In la rumeeyo si gaar ah kuwii magacooda nala baray, kuwii kalena si guud loo rumeeyo**.

Waxaana ugu waawayn kutubtaas saddex kala ah:

- Tawreed: oo lagu soo dejiyey Muuse (n.n.k.h).

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ قَالَ يَا مُوسَى إِنِّي اصْطَفَيْتُكَ عَلَى النَّاسِ بِرِسَالاتِي وَبِكَلامِي فَخُذْ مَا آتَيْتُكَ وَكُنْ مِنَ الشَّاكِرِينَ (١٤٤) وَكَتَبْنَا لَهُ فِي الأَلْوَاحِ مِنْ كُلِّ شَيْءٍ مَوْعِظَةً وَتَفْصِيلا لِكُلِّ شَيْءٍ فَخُذْهَا بِقُوَّةٍ وَأْمُرْ قَوْمَكَ يَأْخُذُوا بِأَحْسَنِهَا سَأُرِيكُمْ دَارَ الْفَاسِقِينَ (١٤٥) } الأعراف:١٤٤-١٤٥

“Illaheey wuxuu yiri: Muusoow waxaan kaa soo dooray dadka waxaana aan gaar kaaga dhigay inaan kuu dhiibo risaaladayda (diintayda) iyo inaan kula hadlo ee qaado oo ku camalfal wixii aan ku siiyey, kana mid noqo kuwo ku shukriya Allihii wax siiyey, waxaan ugu qornay looxyada wax kasta oo uu u baahnaa oo axkaamta diintiisa la xiriira oo ah wax lagu waansamo iyo taaasiisha axkaamta diinta ah, ee u qabso kitaabkaas  si ay ku jirto, dhab iyo dhiifoonaan, dadkaagana far inay ku camal falaan waxa ku jira,

qofkii diinta qaadan waayana waxaan tusayaa daarta loogu talogalay faasiqiinta (oo ah naarta)" (Al acraaf:144-145).

Waxaa Alle yiri:

{إِنَّا أَنْزَلْنَا التَّوْرَاةَ فِيهَا هُدًى وَنُورٌ يَحْكُمُ بِهَا النَّبِيُّونَ الَّذِينَ أَسْلَمُوا لِلَّذِينَ هَادُوا وَالرَّبَّانِيُّونَ وَالأَحْبَارُ بِمَا اسْتُحْفِظُوا مِنْ كِتَابِ اللَّهِ وَكَانُوا عَلَيْهِ شُهَدَاءَ } المائدة:٤٤

"Innaga ayaa soo dejinay Tawreed iyadoo sida hanuun iyo nuur, waxaana wax ku xukumay nabiyadii u hogaansameen xukunka Ilaaheey, waxaana aan u soo dejinay yuhuuda, waxaa kale oowax ku xukuma caabidiinta iyo fuqahadooda, maadaama lagu amaanaystay Tawreed inay dadka gaarsiiyaan, waxayna marag ka ahaayeen in nabiyadoodu ay kitaabkaas dadka gaarsiiyeen" (Al maa'idah:44).

2. Injiil oo lagu soo dejiyey Ciise, Ilaaheey wuxuu yiri:

} ثُمَّ قَفَّيْنَا عَلَى آثَارِهِمْ بِرُسُلِنَا وَقَفَّيْنَا بِعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ وَآتَيْنَاهُ الإِنْجِيلَ { الحديد:٢٧.

"Waxaan raacsiinay raadkii Nuux iyo Ibraahiim rususheena, waxan kale oo aan raacsiinay Ciise, waxaana aan siinay Injiil) (Al xadiid:27).

Waxaa kale oo yiri:

{ وَآتَيْنَاهُ الإِنْجِيلَ فِيهِ هُدًى وَنُورٌ وَمُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ التَّوْرَاةِ وَهُدًى وَمَوْعِظَةً لِلْمُتَّقِينَ} المائدة:٤٦

"Waxaan siinay Injiil iyadoo ay ku jiraan hanuun iyo nuur, isagoo kitaabkaasi ah mid rumaynaya oo sii xoojinaya kitaabkii ka horeeyey ee Tawreed ahaa, waxaan aan soo dejinay kitaabkaas isagoo hanuun iyo wacdi u ah dadka Alle kabaqayaan" (Al maa'idah:46).

3. AL-Qur'aan oo Ilaaheey uu ku soo dejiyey Muxamad (n.n.k.h): waana kutubta midka ugu wayn. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَأَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ الْكِتَابِ وَمُهَيْمِنًا عَلَيْهِ }المائدة:٤٨

"Waxaan kugu soo dejinay Qur'aanka isagoo xaq ah oo ka marqaati kacaya run nimada kutubtii ka horaysey iyo sax ahaantooda" (Al maa'idah:48).

Waxaa Alle yiri:

{ تَبَارَكَ الَّذِي نَزَّلَ الْفُرْقَانَ عَلَى عَبْدِهِ لِيَكُونَ لِلْعَالَمِينَ نَذِيرًا } الفرقان:١

"Waxaa khayrkiisu batay Allihii Qur'aanka ku soo dejiyey adoonkiisa Muxamad ah si uu u noqdo rasuul loo diray caalamka oo dhan" (Al furqaan:1).

Kutubta Ilaaheey waxaa kamid ah Zabuur oo Ilaaheey uu siiyey Daawuud (n.n.k.h). Ilaaheey wuxuu yiri: “Waxaan Daawuud siinay zabuur” (Al israa:55).

Iyo suxuftii (warqadihii) la siiyey Ibrahiim, Ilaaheey wuxuu yiri:

{ إِنَّ هَذَا لَفِي الصُّحُفِ الأُولَى (١٨) صُحُفِ إِبْرَاهِيمَ وَمُوسَى (١٩) } الأعلى:١٨-١٩

“Waxa suuradaan la idin kugu sheegay waa wax ujeedkoodu ay ku yiileen suxuftii la soo dejiyey Qur’aanka hortiis oo ahaayeen suxuftii Ibraahiim iyo Muuse (n.n.k.h)” (All aclaa:18-19).

- **Waxaa kale oo la iska rabaa in kutubtii ka horraydey Qur’aanka la rumeeyo intooda aan bedbedelku ku dhicin.**

Waxaa Ilaaheey sheegay in kutubtii reer banii israa’iil uu ku dhacay wax ka bedbedelid dhinaca erayada iyo dhinaca macnahaba ah.Wuxuu yiri: “Waxay kalimooyinka ka bedelaan boosaskooda” (Al maa’idah:13).

Waxaa kale oo uu yiri: “Waxay bedbedelaan warka Ilaaheey ka dib marka ay fahmaan oo ay gartaan” (Al maa’idah:41).

Waxaa Eebbe wayne yiri:

{ وَإِنَّ مِنْهُمْ لَفَرِيقًا يَلْوُونَ أَلْسِنَتَهُمْ بِالْكِتَابِ لِتَحْسَبُوهُ مِنَ الْكِتَابِ وَمَا هُوَ مِنَ الْكِتَابِ وَيَقُولُونَ هُوَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ وَمَا هُوَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ وَيَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ وَهُمْ يَعْلَمُونَ (٧٨) } آل عمران:٧٨

“Waxaa ka mid ah yuhuudda kuwo bedelayaan warka Ilaaheey si aad ugu malaysaan inuu ka mid yahay warkii la soodejiyey iyadoo xaqiiqaduna tahay inuusan ka mid ahayn, waxay leeyihiin Alle ayuu ka yimid mana uusan ka imaanin, Allena been ayey ka sheegaan iyaga oo og” (Aalu cimraan:78).

Qur’aanka kariimka ah waxaa kafaalo qaaday xafidistiisa Ilaahii soo dejiyey, wuxuuna yiri:

}إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا الذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُ لَحَافِظُونَ { الحجر: ٩

“Innaga ayaa Qur’aanka soo dejinay, innaga ayaana xafidayna” (Al xijri:9).

Wuxuuna ka dhigay mid la ilaaliyey, oo wuxuu yiri:

{ إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا بِالذِّكْرِ لَمَّا جَاءَهُمْ وَإِنَّهُ لَكِتَابٌ عَزِيزٌ (٤١) لا يَأْتِيهِ الْبَاطِلُ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِ وَلا مِنْ خَلْفِهِ تَنْزِيلٌ مِنْ حَكِيمٍ حَمِيدٍ (٤٢) } فصلت:٤١-٤٢

“Kuwa Qur’aankaan diideen oo beeniyeen waa kuwo halaagsamaya, kitaabkaanina waa mid ciso iyo sharaf leh oo aysan xumaani meelna ka soo geli Karin, waxaana laga ilaaliyey in wax lagu daro ama laga dhimo, waxaana soo dejiyey Alle xakiim ah oo ah mid amaanan” (Fussilat:41-42).

Sidaas awgeed qisooyinka iyo wararka ku yaalla kutubta Ahlu-kitaabka (Yuhuuda iyo Nasaarada) qisooyinkaas oo loo yaqaan israa’iiliyaat waxay u qaybsamaan saddex qaybood:

Qaybta koowaad: waa qayb waafaqsan waxa ku yaalla Qur’aanka.

Waxaan rumaynaynaa inay sax tahay maadaama uu u marqaati kacay kitaabkeenu, sida ka hadlida duufaantii dhacday waqtigii nabi Nuux (n.n.k.h), qisadii Ibraahiim, Yuusuf, Muusaa, in biyo lagu halaagay Fircoon iyo intii la socotay, mucjisooyinkii Ciise iwm iyadoo guud ahaan sax ah laakiin tafaasiishooda oo dhan aysan qasab ahayn inay sax u sheegeen.

Qaybta labaad: waa mid qilaafsan Qur’aanka, qaybtaas waxaan rumaynaynaa inay baadil tahay oo tahay wax ay iyagu gacanta ku sameeyeen, sida warkooda ah in nabi Luud uu qamri cabey uuna ka sinaystay labadiisa gabdhood, [Allaha Luud karaameyee], iyo inay ku andacoodeen in Ciise uu ilaah yahay, ama wiilkii Alle, ama uu ka mid yahay saddex uu ka kooban yahay ilaah,Ilaaheey waa ka sarreeyaa waxaas ay ku hadleen.

Qaybta saddexaad: waa qayb aan waafaqsanayn sidoo kalena aan khilaafsanayn waxa ku xusan Qur’aanka, qaybtaas ma rumaynayno mana beeninayno, sababtoo ah Nabiga (n.n.k.h) ayaa wuxuu yiri: “haddii ay idiin waramaan ahlu-kitaabku ha rumaynina hana beeninina waxa ay idiin sheegaan, waxaadna tiraahdaan: waxaan rumaynay Ilaaheey, kutubtiisa iyo rusushiisa, waxaas ay idiin sheegeen hadii ay xaq ahaayeen ma aadna beenin, hadii ay baadil ahaayeena ma aadna rumaynin” (w.w.Axmad iyo Abuu Daawuud). Laakiin waxaa banaan in laga sheekeeyo oo la sheego, maadaama uu Nabigu (n.n.k.h) yiri : soo qaata oo ka sheekeeya warkooda, mana lahan wax dhib ah” (w.w.Bukhaari).

Sida badana waxyaabahaa ay ka sheekeeyaani ma ahan wax faa’iido leh ama loo baahan yahay.

### 4. **In la isku xukumo sharciga Qur'aanka**.

Ilaaheey wuxuu soo dejiyey Qur'aanka wayn isagoo ah mid u marqaati kacaya kutubtii ka horaysey oo wata  wax kasta oo maslaxad iyo wanaag ah oo ku jirey, wixii axkaam ah oo ku jireyna qaarna nasaqay, qaarna uu sidoodii u daayey, waxna intaas ku sii kordhiyey, sidaas awgeed ma banaana in la raaco shareeco aan ahayn midda Qur'aanka.    Ilaaheey wuxuu yiri:

{٦ وَأَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ الْكِتَابِ وَمُهَيْمِنًا عَلَيْهِ فَاحْكُمْ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ عَمَّا جَاءَكَ مِنَ الْحَقِّ لِكُلٍّ جَعَلْنَا مِنْكُمْ شِرْعَةً وَمِنْهَاجًا وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَلَكِنْ لِيَبْلُوَكُمْ فِي مَا آتَاكُمْ فَاسْتَبِقُوا الْخَيْرَاتِ إِلَى اللَّهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ (٤٨) وَأَنِ احْكُمْ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ وَاحْذَرْهُمْ أَنْ يَفْتِنُوكَ عَنْ بَعْضِ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ إِلَيْكَ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَاعْلَمْ أَنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ أَنْ يُصِيبَهُمْ بِبَعْضِ ذُنُوبِهِمْ وَإِنَّ كَثِيرًا مِنَ النَّاسِ لَفَاسِقُونَ (٤٩)  أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ (٥٠) } المائدة:٤٨-٥٠

"Rasuulkii Alloow, waxaan kugu soo dejinay Qur'aanka isagoo ka marqaati kacaya in in kutubtii ka horaysay ay xaq ahaayeen oo Alle uu soo dejiyey, ee waxaad yuhuuda kuu soo dacwoonayaan ku kala xukmisaa wixii uu Alle soo dejiyey, inta ka tagto wixii lagugu soo dejiyeyna ha raacin sida ay jecel yihiin, umad walba waxaan u samaynay shareeco iyo waddo cad oo ay qaadaan. Hadii uu Illaaheey rabo wuxuu shareecooyinka aad ku dhaqmaysaan uu ka dhigi lahaa hal mid, laakiin ma uusan samayn sidaas oo wuxuu rabey inuu  idin imtixaano si uu u cadaado qofka adeecaya iyo midka khilaafaya, ee u tartama khayraadka, meesha aad u noqonaysiin waa Allaah, markaas ayuu wuxuu idiin sheegi doonaa wixii aad isku khilaafteen. Waxaad ku kala saartaan oo aad ku kala xukmisaa yuhuudda wixii uu Alle kugu soo dejiyey oo ah Qur'aanka, hana raacin hawadooda iyo sida ay jecel yihiin marka uu ku soo xukun doontaan, iskana  jir inay kaa leexiyaan wixii uu Alle kugu soo dejiyey oo aad iyaga raacdo, hadii ay diidaan xukunkaaga waxaad ogaataa inuu Alle rabo inuu hanuunka ka leexiyo dembiyo ay horay u galeen awgood, in badan oo dadka ka mid ahi waxay ka baxaan adeecida Ilaaheey. Kuwaas yuhuudda ahi ma waxay rabaan in lagu kala xukmiyo xeerarkii waqtigii jaahiliyada, sidaasi munaasib ma ahan, dadka sharciga fahmay oo rumeeyey yaa uga caadilsan xukunka Ilaaheey" (Almaa'idah:48-50).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ إِنَّا أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ لِتَحْكُمَ بَيْنَ النَّاسِ بِمَا أَرَاكَ اللَّهُ وَلا تَكُنْ لِلْخَائِنِينَ خَصِيمًا } النساء:١٠٥

“waxaan kugu soo dejinay Qur’aanka isagoo uu ka buuxo xaq, si aad dadka ugu kala xukmiso waxa uu Alle kuu waxyooday oo uu ku tusay, ha noqon mid u dooda khaa’iniinta” (al nisaa:105).

Waxaa kale oo uu yiri:

}أَفَتُؤْمِنُونَ بِبَعْضِ الْكِتَابِ وَتَكْفُرُونَ بِبَعْضٍ فَمَا جَزَاءُ مَنْ يَفْعَلُ ذَلِكَ مِنْكُمْ إِلا خِزْيٌ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ يُرَدُّونَ إِلَى أَشَدِّ الْعَذَابِ وَمَا اللَّهُ بِغَافِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ {آل عمران:١١٩

“Yuihuudeey ma waxaad rumaynaysiin Tawreed qaarkiis, qaarka kalena ma ku kufrinaysiin, dadka sidaas sameeya abaalmarintoodu waa dulinimo adduunka ah, marka qiyaamaha la gaarana waxay leeyihiin cadaab midka ugu daran, Allena ma mooga waxa aad samaynaysaan” (Aalu cimraan:119).

5. **In ay xaaraan tahay qarinteeda,** wax ka bedelkeeda xaga eray ahaan ama macne ahaan, isku khilaafideeda iyo la iska horkeeno warka Ilaaheey oo qaarba qaarka kale lagu garaaco. Alle wuxuu yiri:

{ وَإِذْ أَخَذَ اللَّهُ مِيثَاقَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ لَتُبَيِّنُنَّهُ لِلنَّاسِ وَلا تَكْتُمُونَهُ فَنَبَذُوهُ وَرَاءَ ظُهُورِهِمْ وَاشْتَرَوْا بِهِ ثَمَنًا قَلِيلا فَبِئْسَ مَا يَشْتَرُونَ }آل عمران:١٨٧

“Waxaad u sheegtaa waqtigii uu Alle balanta ka qaaday ahlu kitaabka oo ku yiri waa inaad dadka u cadaysaan oo aadna ka qarin waxa kutubtiina ku yaalla, sidaasna kuma aysan dhaqmin oo waxay xoogaa yar oo maal ah ku qaateen inay xaqqa qariyaan oo aysan sheegin, waxaa wax aad u xun ahaa waxa ay la soo wareegeen oo ay ku qaateen inay ka tagaan wixii lagula balamay” (Aalu cimraan:187).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ إِنَّ الَّذِينَ يَكْتُمُونَ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ مِنَ الْكِتَابِ وَيَشْتَرُونَ بِهِ ثَمَنًا قَلِيلا أُولَئِكَ مَا يَأْكُلُونَ فِي بُطُونِهِمْ إِلا النَّارَ وَلا يُكَلِّمُهُمُ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَلا يُزَكِّيهِمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ (١٧٤) أُولَئِكَ الَّذِينَ اشْتَرَوُا الضَّلالَةَ بِالْهُدَى وَالْعَذَابَ بِالْمَغْفِرَةِ فَمَا أَصْبَرَهُمْ عَلَى النَّارِ(١٧٥) ذَلِكَ بِأَنَّ اللَّهَ نَزَّلَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ وَإِنَّ الَّذِينَ اخْتَلَفُوا فِي الْكِتَابِ لَفِي شِقَاقٍ بَعِيدٍ (١٧٦)} البقرة:١٧٤-١٧٦

“kuwa qariya waxa uu Ilaaheey soo dejiyey oo ku qoran kutubtiisa sida tilmaamaha nabi Muxamad (n.n.k.h) oo qarintoodaas ku bedelanayaan xoogaa maal ah, kuwaasi waxa ay sidaas ku cunayaani oo calooshooda ay gelinayaani waa naar, Aakhirana lama uu hadlayo Ilaaheey, mana uu ka

daahirinayo dembiyadoodii, waxayna leeyihiin cadaab aad xanuujisa. Kuwaasi waa kuwo baadinimo ku soo iibsaday hanuunkii, cadaabna ku soo bedeshay dembidhaaf, waa yaabe u adkaysa ogaa cadaabta. Cadaabtaas waxaa u keenay in uu Alle kutubtiisa ku soo dejiyey rusushiisa iyadoo xaq miiran ah, oo kuwa isku khilaafeen oo qaarna rumeeyeen qaarna beeniyeen waxay aad uga fohyihiin xaqqa" (Albaqarah:174-176).

Waxaa kale oo uu Alle yiri:

{ فَوَيْلٌ لِلَّذِينَ يَكْتُبُونَ الْكِتَابَ بِأَيْدِيهِمْ ثُمَّ يَقُولُونَ هَذَا مِنْ عِنْدِ اللَّهِ لِيَشْتَرُوا بِهِ ثَمَنًا قَلِيلا فَوَيْلٌ لَهُمْ مِمَّا كَتَبَتْ أَيْدِيهِمْ وَوَيْلٌ لَهُمْ مِمَّا يَكْسِبُونَ (٧٩) } البقرة:٧٩

"Waxaa halaag u sugnaaday culumada yuhuuda oo inta kitaabka gacantooda ku qoraan dhahayaan Illaaheey ayuu ka yimid iyagoo sidaas u samaynaya si ay xoogaa maal ah ugu qaataan, waxay ciqaab wayn ku mutaysanayaan waxa ay gacmahooda ku qoreen, waxaa kale oo ay cadaab ku mutaysanayaan maalka ay sidaas ku shaqaysteen" (Albaqarah:79).

Nabiga (n.n.k.h) ayaa waxaa uu maqlay dad isqil-qilaafayaan Qur'aanka oo murmayaan, markaas ayuu yiri: "dadkii idinka horeeyey sidaan ayey ku halaagsameen, kitaabkii Ilaaheey ayey qaarba qaarkiisa kale ka horkeeneen, kitaabka Ilaahayna wuxuu soo degay iyadoo qaarba qaarka kale uu taageeraayo oo rumaynayo, ee ha ka dhiginina in qaarkiis uu beeninayo qaarka kale, ee wixii aad cilmi u leedihiina ka hadla, wixii aadnan cilmi u lahayna u daaya cidda taqaana" (w.w.Axmad).

# Rumaynta rususha

Waxaa sidaas laga wadaa in si go'an loo aamino in Ilaaheey uu dadka ka soo doortay rag uu u waxyooda, uuna soo diray iyagoo dadka ugu bishaaraynaya janno, ugana digayaan naar, khalqigiisana soo gaarsiinayaan diintiisa iyagoo u sheegaya in ay caabudaan Alle kaligiis ayna ka fogaadaan inay caabudaan wax kasta oo isaga ka soo haray, marka ay sidaas samaynayaana waxay u naxayaan dadka, cidii xaqqa diidana ay ka baabi'inayaan wixii marmarsiyo ah oo ay ku dhihi karaan inuusan xaqqu u cadaanin.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ اللَّهُ يَصْطَفِي مِنَ الْمَلائِكَةِ رُسُلا وَمِنَ النَّاسِ إِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ بَصِيرٌ } الحج:٧٥

Ilaaheey waxaa uu ka soo xushaa malaa'igta iyo dadka rusul, Alle waa mid wax walba maqla, wax walbana arka" (Alxaj:75).

Waxaa uu Eebbe wayne yiri:

{ وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ إِلا رِجَالا نُوحِي إِلَيْهِمْ فَاسْأَلُوا أَهْلَ الذِّكْرِ إِنْ كُنْتُمْ لا تَعْلَمُونَ } النحل:٤٣

"Nabi Muxamadoow, waxaan hortaa soo dirnay rag aan u waxyoonay, ee mushrikiinta carbeedeey hadii aadnaan sidaas rumaynaynin waxaad warsataan dadkii kutubtii hore loo soo dejiyey si ay idin kugu sheegaan in rusushu ay dad ahaayeen, hadii aadnaan ogayn inay sidaas ahaayeen" (ALnaxli:43).

Waxaa kale oo uu yiri:

{رُسُلا مُبَشِّرِينَ وَمُنْذِرِينَ لِئَلا يَكُونَ لِلنَّاسِ عَلَى اللَّهِ حُجَّةٌ بَعْدَ الرُّسُلِ وَكَانَ اللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا } النساء:١٦٥

"Waxaan u diray khalqigayga rusul ugu bishaareeyaan inaan sawaab siinayo, ugana digaan ciqaabtayda, si aysan dadku u helin wax dambe oo ay ku marmarsiyoodaan maadaama rusushaas loo soo diray ayna u cadeeyeen waxa laga rabo iyo waxa ay helayaan, Ilaahayna waa mid awood buuxda leh oo xikmad badan" (AL nisaa:165).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ وَلَقَدْ بَعَثْنَا فِي كُلِّ أُمَّةٍ رَسُولا أَنِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَاجْتَنِبُوا الطَّاغُوتَ) }النحل:٣٦

“Waxaan u soo dirnay umad walba rasuul u sheega Ilaaheey kaligiis caabuda, kana fogaada inaad caabudaan cid aan isaga ahayn” (Al naxli:36).

*Waxaa soo hoosgelaya rumaynta rususha arrimahaan soo socda:*

1. **In la rumeeyo in diinta ay keeneen ay ka timid Ilaaheey,** ayna sidaasi ku timid Alle xikmadiisa iyo rabitaankiisa. Alle wuxuu yiri:

{ وَإِذَا جَاءَتْهُمْ آيَةٌ قَالُوا لَنْ نُؤْمِنَ حَتَّى نُؤْتَى مِثْلَ مَا أُوتِيَ رُسُلُ اللَّهِ اللَّهُ أَعْلَمُ حَيْثُ يَجْعَلُ رِسَالَتَهُ }الأنعام:١٢٤

“mushrikiinta carabta marka ay u timaado cadayn sheegaysa nabi-nimada Muxamad waxay leeyihiin ma aan rumaynayno ilaa nala siiyo  waxa la siiyey rususha Ilaaheey  oo kale, Alle isaga ayaa yaqaan meesha uu diintiisa dhigayo iyo cidda ehelka u ah inay qaaddo” (Al ancaam:124).

Ilaaheey waxaa kale oo uu yiri:

{ وَقَالُوا لَوْلا نُزِّلَ هَذَا الْقُرْآنُ عَلَى رَجُلٍ مِنَ الْقَرْيَتَيْنِ عَظِيمٍ (٣١) أَهُمْ يَقْسِمُونَ رَحْمَةَ رَبِّكَ نَحْنُ قَسَمْنَا بَيْنَهُمْ مَعِيشَتَهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَرَفَعْنَا بَعْضَهُمْ فَوْقَ بَعْضٍ دَرَجَاتٍ لِيَتَّخِذَ بَعْضُهُمْ بَعْضًا سُخْرِيًّا وَرَحْمَةُ رَبِّكَ خَيْرٌ مِمَّا يَجْمَعُونَ (٣٢) }الزخرف:٣١-٣٢

“waxay yiraahdeen mushrikiinta reer Quraysh: hadii Qur’aanku uu yahay xaq Alle ka yimid maxaa loogu soo deji waayey nin wayn oo ka mid ah dadka Makko ama Daa’if, ma iyaga ayaa nabi-nimada qaybinayaan? innaga ayaa qorshaynay noloshooda adduunka, oo dadka kala sare marinay, si qaarkood ay u noqdaan kuwo u shaqeeya oo u sakhiran kuwa kale, naxariista Ilaaheey iyo jannadiisa ayaa ka wanaagsan aduunyada ay aruursanayaan” (Al zukhruf:31-32).

Nabinimada laguma gaaro nafta oo la tababaro iyo dadaal la sameeyo, sida ay ku andacoodaanba  suufiyada kuwooda diinxumadu ku dhacday, sidoo kalena laguma gaaro isku imaatinka saddexda awoodood voo kala ah awoodda daahirka ah [waa awood iyo nuur uu qofku marka uu helo uu ku gaarayo inuu daalacdo ghaybka uuna ogaado asraarta ku duugan uunka, waxaana yeesha dadka qaarkood sida nabiyada], awoodda lagu macaabo: Altakhayuliyah [oo  ah awooda kaydisa xogta ay dareemayaashu soo gudbiyaan ka dibna u bandhigta awood caqliyeedka] iyo awooda la yiraahdo Al ta’siiriyah, sida ay ku andacoodaanba falsafad-yahanadu, ee waxaa nabinimada lagu gaaraa in Ilaaheey uu qofka doorto oo kali ah, uuna u arko inuu

ehel u yahay inuu diin xambaari karo, iyadoo qofkaasi uu yahay mid laga soo xushay khalqiga kuwooda wanaagsan.

2. **In la rumeeyo rususha Ilaaheey oo dhan,** iyadoo midkii magaciisa la yaqaan si gaar ah loo rumaynayo, midkii aan magaciisa la aqoona si guud loo rumaynayo.

Kuwa aan magacyadooda ogaanay waxaa ka mid ah kuwa ku xusan aayadaan, Ilaaheey markii uu Ibraahiim k ahadlay ka dib ayuu wuxuu yiri:

{ وَوَهَبْنَا لَهُ إِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ كُلا هَدَيْنَا وَنُوحًا هَدَيْنَا مِنْ قَبْلُ وَمِنْ ذُرِّيَّتِهِ دَاوُدَ وَسُلَيْمَانَ وَأَيُّوبَ وَيُوسُفَ وَمُوسَى وَهَارُونَ وَكَذَلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ (٨٤) وَزَكَرِيَّا وَيَحْيَى وَعِيسَى وَإِلْيَاسَ كُلٌّ مِنَ الصَّالِحِينَ (٨٥) وَإِسْمَاعِيلَ وَالْيَسَعَ وَيُونُسَ وَلُوطًا وَكُلا فَضَّلْنَا عَلَى الْعَالَمِينَ (٨٦) }الأنعام:٨٤-٨٦

“waxaan Ibraahiim u hibaynay Isxaaq iyo Yacquub [oo uu isxaaq dhalay] iyaga oo dhanna waan hanuuninay, waxaan hortood hanuuninay Nuux, ilmihiisana waxaa ka mid ah Daa’uud, Sulaymaan, Ayuub, Yuusuf, Muuse, Haaruun, sidaas ayaana aan ku abaalmarinaynaa muxsiniinta iyo inta wanaaga sameeyaan oo dhan. Waxaa kale oo aan hanuuninay Sakariye, Yaxye, Ciise iyo Ilyaas, nabiyadaas oo dhan waxay ka mid ahaayeen saalixiinta. Sidoo kale waxan hanuuninay Ismaaciil, Alyasac, Yuunus, iyo Luud, rusushaas oo dhan waxaan ka fadli badnaysiinay dadkii ku waqtiga ahaa” (Al ancaam:84-86).

Waxaa Alle yiri:

{ وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلا مِنْ قَبْلِكَ مِنْهُمْ مَنْ قَصَصْنَا عَلَيْكَ وَمِنْهُمْ مَنْ لَمْ نَقْصُصْ عَلَيْكَ }غافر:٧٨

“Nabi Muxamadoow, waxaan hortaa soo dirnay rusul aan qaarkood kaaga sheekaynay, qaarna aanan kaaga sheekaynin” (Ghaafir:78).

Waxaa waajib ah in dhamaantood la wada rumeeyo, sababtoo ah dacwada iyo diinta ay wadeen waa hal mid ah. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ شَرَعَ لَكُمْ مِنَ الدِّينِ مَا وَصَّى بِهِ نُوحًا وَالَّذِي أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ وَمَا وَصَّيْنَا بِهِ إِبْرَاهِيمَ وَمُوسَى وَعِيسَى أَنْ أَقِيمُوا الدِّينَ وَلا تَتَفَرَّقُوا فِيهِ } الشورى:١٣

“waxaa Alle idiin sharciyeey [iyagoo ka mid ah diinta laguu soo dhiibay oo islaamka ah] wixii uu Alle faray Nuux, iyo wixii aan kuu soo waxyoonay  iyo wixii aan farnay Ibraahiim, Muuse iyo Ciise oo ah diinta ku ooga tawxiidka iyo Alle adeecista, hana isku khilaafinina diintii aan idin faray” (Alshuuraa:13).

Hal nabi in la beeniyaana waxay u dhigan tahay in iyaga oo dhan la beeniyey. Ilaaheey wuxuu yiri: “Qoladii Nuux waxay beeniyeen rusushii oo dhan” (Al shucaraa:105). Wuxuu sheegay inay rusushii beeniyeen iyadoo uu Nuux ahaa midkii ugu horeeyey rususha.

Ma banaana in la kala saaro rususha Ilaaheey ama qaar la rumeeyo, qaarna la beeniyo, qofkii sidaas sameeyaana waa gaaloobay. Alle wuxuu yiri:

{ إِنَّ الَّذِينَ يَكْفُرُونَ بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ وَيُرِيدُونَ أَنْ يُفَرِّقُوا بَيْنَ اللَّهِ وَرُسُلِهِ وَيَقُولُونَ نُؤْمِنُ بِبَعْضٍ وَنَكْفُرُ بِبَعْضٍ وَيُرِيدُونَ أَنْ يَتَّخِذُوا بَيْنَ ذَلِكَ سَبِيلًا (١٥٠) أُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ حَقًّا وَأَعْتَدْنَا لِلْكَافِرِينَ عَذَابًا مُهِينًا (١٥١) وَالَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ وَلَمْ يُفَرِّقُوا بَيْنَ أَحَدٍ مِنْهُمْ أُولَئِكَ سَوْفَ يُؤْتِيهِمْ أُجُورَهُمْ وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَحِيمًا (١٥٢) }النساء:١٥٠-١٥٢

“kuwa Alle ku kufrinayaan oo raba inay kala geeyaan Alle iyo rusushiisa oo leh qaarna waan rumaynaynaa, qaarna waan beeninaynaa oo raba inay samaystaan waddo ay u qaadaan baadinimada iyo bidcada ay soo kordhiyeen, kuwaasi waa kuwa ah gaalada dhabta ah, waxaana aan u diyaarinay gaalada cadaab aad u ihaanaysa. Kuwase rumeeyey Alle iyo rusushiisa oo aan kala saarin ee iyaga dhan wada rumeeyey, kuwaas wuxuu Alle siin doonaa abaalmarintooda, Allena waa mid dembi-dhaafid iyo naxariis badan” (Alnisaa:150-152).

3. **In la rumeeyo oo la aqbalo wixii ay Alle ka keeneen.** Alle wuxuu yiri:

{ يَا أَيُّهَا النَّاسُ قَدْ جَاءَكُمُ الرَّسُولُ بِالْحَقِّ مِنْ رَبِّكُمْ فَآمِنُوا خَيْرًا لَكُمْ وَإِنْ تَكْفُرُوا فَإِنَّ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا } النساء:١٧٠

“War dadoow, waxaa idiin yimid rasuulkii Muxamad ahaa oo wada diin xaq ah ee rumeeya, inaad rumaysiin ayaa idiin khayr badan, hadii aad ku adkaysataan gaalnimadiina waxaa uu Alle leeyahay oo u hogaansan waxa ku jira samaawaadka iyo dhulka, Allena waa mid cilmi iyo xikmad miiran ah” (Al nisaa:170).

Waxaa kale oo uu yiri: “Kan runta la yimid xag war iyo xag camalba ( oo ah nabiyada) iyo kan rumeeyey oo raacay, kuwaasi waa kuwa iska ilaaliyey Ilaaheey caradiisa iyo ciqaabtiisa” (Alzumar:33).

Waa kale oo Alle uu yiri:

{ وَالنَّجْمِ إِذَا هَوَى (١) مَا ضَلَّ صَاحِبُكُمْ وَمَا غَوَى (٢) وَمَا يَنْطِقُ عَنِ الْهَوَى (٣) إِنْ هُوَ إِلا وَحْيٌ يُوحَى (٤) عَلَّمَهُ شَدِيدُ الْقُوَى (٥) } النجم:١-٥

"Waxaan ku dhaartay xidigaha marka ay dhacaan oo ay miqaan inuusan Muxamad ka leexan wadada xaqqa ah oo uusan ka bixin hanuunsanaanta, kumana hadlo wax ku salaysan sida uu isagu iska jecel yahay, Qur'aanka iyo sunnaduna ma ahan wax aan ahayn waxyi xag rabbi uga yimid, waxaana Muxamad wax baray malag aad u awood badan" (Al najmi:1-5).

Wax kasta oo sugnaaday oo ka mid ah akhbaartii ka timid nabiyadii hore oo Alle uu kitaabkiisa ku sheegay  ama nabiga ka sugnaatay waxaa waajib ah in la rumeeyo. Laakiin waxyaabaha ku xusan kutubta yuhuuda iyi nasaarada oo qisooyin iyo warar ah waxaa loola dhaqmayaa sidii aan uga soo hadlnay kutubta la soo dejiyey. Wixiise la sheegay in nabi Muxamad uu yiri waxaa loo bandhigayaa qawaaniinta culumada xadiiska oo lagu aqbalo ama lagu diido wixii nabiga xagiisa loo leexiyo, oo markaas waxaa waajib noqonaya in la rumeeyo wixii ay cadaato saxnimadoodu.

4.**In la adeeco oo la raaco, xukunkana iyaga loo aado.** Ilaaheey wuxuu yiri: "Rasuulkii aan soo dirnayba waxaan u soo dirnay in la maqlo oo la adeeco, maadaama uu Alle sidaas amray oo uu xukmiyey" (Al nisaa:64).

Waxaa umad walba ku waajib ah inay adeecdo nabigii loo soo diray. Maadaama uu ahaa nabigii u dambeeyey Muxamad ayaa shareecadiisu waxay noqotay mid nasakhday wax alla wixii sharci ahaa oo iyada ka horeeyey, sidaas awgeedna adeecidiisa iyo raacidiisu waxay waajib ku tahay qof kasta oo maqla.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ الَّذِينَ يَتَّبِعُونَ الرَّسُولَ النَّبِيَّ الأُمِّيَّ الَّذِي يَجِدُونَهُ مَكْتُوبًا عِنْدَهُمْ فِي التَّوْرَاةِ وَالإِنْجِيلِ يَأْمُرُهُمْ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَاهُمْ عَنِ الْمُنْكَرِ وَيُحِلُّ لَهُمُ الطَّيِّبَاتِ وَيُحَرِّمُ عَلَيْهِمُ الْخَبَائِثَ وَيَضَعُ عَنْهُمْ إِصْرَهُمْ وَالأَغْلالَ الَّتِي كَانَتْ عَلَيْهِمْ فَالَّذِينَ آمَنُوا بِهِ وَعَزَّرُوهُ وَنَصَرُوهُ وَاتَّبَعُوا النُّورَ الَّذِي أُنْزِلَ مَعَهُ أُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ (١٥٧) قُلْ يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنِّي رَسُولُ اللَّهِ إِلَيْكُمْ جَمِيعًا الَّذِي لَهُ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضِ لا إِلَهَ إِلا هُوَ يُحْيِي وَيُمِيتُ فَآمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ النَّبِيِّ الأُمِّيِّ الَّذِي يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَكَلِمَاتِهِ وَاتَّبِعُوهُ لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ (١٥٨) } الأعراف:١٥٧-١٥٨

"Naxariista waxaan siinayaa kuwa raacay nabiga aan waxna qorin waxna aqrin oo tilmaantiisu ay ku taalo kutubta ay haystaan oo Tawreed iyo Injiil ah,  wuxuu farayaa wanaagga, wuxuuna ka reebayaa xumaanta, wuxuu

u xalaalaynayaa wax kasta dayib iyo wax fiican ah, wuxuuna ka xaaranti nimaynayaa wax kasta wax xun ah (sida doofaarka cunistiisa), wuxuuna ka qaadayaa waxyaabihii cuslaa oo awel lagu waajibiyey (sida in la gooyo meesha ay nijaasadu dharka ka gaarto), kuwa raacay nabigaas oo garabsiiyey oo darajeeyeen isla markaasna raaceen diintii loo soo dhiibay kuwaasi waa kuwa ku guulaystay wixii loo yaboohay mu'miniinta. Waxaad Muxamadoow ku tiraahdaa: dadoow waxaan ahay rasuulkii Ilaaheey ee la idiin soo diray dhamaantiin, waa rasuulka Allihii lahaa mulkiga circa iyo dhulka, aysana jirin cid xaq lagu caabudo oo aan isaga ahayn, isaga ayaa wax nooleeya, waxna dila, ee rumeeya Alle iyo rasuulkiisa aan waxna qorrin waxna aqrin, rasuulkaas oo ah mid isagu rumeeyey Alle iyo wax kasta oo lagu soo dejiyey nabiyadii ka horeeyey, ee nabigaas raaca si aad u hanuuntaan" (Al acraaf:157-158).

Waxaa kale oo Ilaaheey uu yiri:

{ قُلْ إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ (٣١) قُلْ أَطِيعُوا اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَإِنَّ اللَّهَ لا يُحِبُّ الْكَافِرِينَ (٣٢) }آل عمران:٣١-٣٢).

"Waxaad tiraahdaa: hadii aad Alle jeceshihiin aniga I soo raaca, waxaa markaas idin jeclaanaya Ilaaheey, waana idiin dembi dhaafayaa, Allena waa mid dembidhaaf iyo naxariis badan. Waxad ku tiraahdaa: adeeca Ilaaheey iyo rasuulka, hadii ay sidaas ka dhega-adaygaan Ilaaheey ma uu jecla kaafiriinta" (Aalu cimraan: 31-32).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ فَلا وَرَبِّكَ لا يُؤْمِنُونَ حَتَّى يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لا يَجِدُوا فِي أَنْفُسِهِمْ حَرَجًا مِمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا } النساء:٦٥

"Ilaaheey ayaan ku dhaartaye si dhab ma ay kuu rumaynayaan ilaa ay kaa dhigtaan qofka ay xukunka u dhiibtaan marka uu isqabad dhexmaro , ka dibna ay u hogaansamaan xukunkaaga si buuxda iyagoo weliba raali ku ah oo ku qanacsan" (Alnisaa:65).

5.**In la jeclaado oo la darajeeyo lana salaamo**. Ilaaheey waxaa uu yiri:

{ إِنَّمَا وَلِيُّكُمُ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَالَّذِينَ آمَنُوا الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَهُمْ رَاكِعُونَ (٥٥) وَمَنْ يَتَوَلَّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَالَّذِينَ آمَنُوا فَإِنَّ حِزْبَ اللَّهِ هُمُ الْغَالِبُونَ (٥٦) }المائدة:٥٥-٥٦

“Cidda idiin gargaaraysa mu’miniinay waa Ilaaheey, rasuulkiisa iyo mu’miniinta slaadda oogaan, sakadana bixiyaan iyagoo Alle u hogaansan, qofkii ku garab iyo gargaar ka dhigta Alle, rasuulkiisa iyo mu’miniinta wuxuu ka mid yagay xisbiga Ilaaheey, xisbiga Ilaahayna waa kuwa gacanta saraysa leh” (Al maa’idah:55-56).

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ فَلَمَّا أَحَسَّ عِيسَى مِنْهُمُ الْكُفْرَ قَالَ مَنْ أَنْصَارِي إِلَى اللَّهِ قَالَ الْحَوَارِيُّونَ نَحْنُ أَنْصَارُ اللَّهِ آمَنَّا بِاللَّهِ وَاشْهَدْ بِأَنَّا مُسْلِمُونَ }آل عمران:٥٢

“markii uu Ciise dareemay inay ku adkaysteen gaalnimada ayuu wuxuu ku yiri saxaabta saafiga ah: yaa igu gacan siinaya u gargaarida diinya Alle, markaas ayey waxay ku yiraahdeen: inaga ayaa kugu garab siinayna u gargaarida diinta Alle, waxaan rumaynay Ilaaheey, kana marqaati kac inaan u hogaansanay Ilaaheey” (Aalu Cimraan:52).

Waxaa Alle yiri:

{ قُلْ إِنْ كَانَ آبَاؤُكُمْ وَأَبْنَاؤُكُمْ وَإِخْوَانُكُمْ وَأَزْوَاجُكُمْ وَعَشِيرَتُكُمْ وَأَمْوَالٌ اقْتَرَفْتُمُوهَا وَتِجَارَةٌ تَخْشَوْنَ كَسَادَهَا وَمَسَاكِنُ تَرْضَوْنَهَا أَحَبَّ إِلَيْكُمْ مِنَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ وَجِهَادٍ فِي سَبِيلِهِ فَتَرَبَّصُوا حَتَّى يَأْتِيَ اللَّهُ بِأَمْرِهِ وَاللَّهُ لا يَهْدِي الْقَوْمَ الْفَاسِقِينَ (٢٤) } التوبة:٢٤

“Haddii ay yihiin aabeyaashiin, ilmihiina, walaalihiin, lamaaneyaashiina, xigtadiina iyo xoolo aad aruursateen iyo ganacsi aad ka cabsanaysaan inay idinka baarto iyo guryo wanaagsan oo degan tihiin, hadii intaas oo dhan hadioi ay yihiin kuwo idin kaga fiican oo aad ka jeceshihiin Ilaaheey iyo rasuulkiisa iyo inaad ku jihaadaan diintaan sare u qaadideeda, hadii ay arrintu sidaas tahay haddaba suga ciqaabta Ilaaheey, Allena ma hanuuniyo dadka faasiqiinta ah” (Altawbah:24). Wuxuuna yiri : “nabadgelyo Allaha siiyo mursaliinta (nabiyaasha)” (Alsaafaat:181).

Alle isagoo ka hadlaya nabigiisa Muxamad ah (n.n.k.h) ayuu8 wuxuu yiri:

{ إِنَّا أَرْسَلْنَاكَ شَاهِدًا وَمُبَشِّرًا وَنَذِيرًا (٨) لِتُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَتُعَزِّرُوهُ وَتُوَقِّرُوهُ وَتُسَبِّحُوهُ بُكْرَةً وَأَصِيلا } الفتح:٩

“Waxaan ku soo dirnay adiga oo ah mid ka marqaati kacaya inuu umadiisa gaarsiiyey diinta, uguna bishaaraynaya mu’miniinta janno, ugana digaya gaalada naar, si aad u rumaysiin Ilaaheey iyo rasuulkiisa, oo aad u waynaysaan, uguna tasbiixsataan gelin hore iyo gelin dambeba” (Alfatxi:9).

Waxaa Ilaaheey uu yiri:

{ إِنَّ اللَّهَ وَمَلائِكَتَهُ يُصَلُّونَ عَلَى النَّبِيِّ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا صَلُّوا عَلَيْهِ وَسَلِّمُوا تَسْلِيمًا } الأحزاب:٥٦

“Ilaaheey wuxuu amaanayaa nabigiisa, malaa’igtuna way amaanayaan wayna u ducaynayaan ee dadka xaqqa rumeeyayoow ku salliya oo salaama nabiga” (Al axzaab:56).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: “Qofka iimaankiisu kaamil ma noqonayo ilaa aan noqdo qof uu isaga ka jecel yahay waalidkiis, ilmihiisa iyo dadka oo dhan” (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

# Rumaynta maalinta aakhiro

Waa in si aan shaki lahayn loo rumeeyo in Ilaaheey uu dadka la sugayo maalin la soo bixinayo oo lagala xisaabtamayo wixii ay aduunka ku soo sameeyeen, laguna abaalmarinayo janno ama naar. Ilaaheey wuxuu yiri "Wuxuu dib ugu dhigayaa waqti ay indhuhu libirsi beelayaan" (Ibraahiim:42).

Waxaa Alle yiri:

{ زَعَمَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَنْ لَنْ يُبْعَثُوا قُلْ بَلَى وَرَبِّي لَتُبْعَثُنَّ ثُمَّ لَتُنَبَّؤُنَّ بِمَا عَمِلْتُمْ وَذَلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرٌ }التغابن:٧

"waxay ku andacoodeen gaaladu inaan la soo bixinaynin ee waxaad ku tiraahdaa: haa, waa la idin soo bixinayaa Allaah ayaan ku dhaartaye, ka dibna waxaa la iddin sheegi doonaa wixii aad samaydeen, arrintaasina waa mid Alle u fudud" (Al taghaabun:7).

{ وَيَوْمَ تَقُومُ السَّاعَةُ يَوْمَئِذٍ يَتَفَرَّقُونَ (١٤) فَأَمَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَهُمْ فِي رَوْضَةٍ يُحْبَرُونَ (١٥)
وَأَمَّا الَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَلِقَاءِ الْآخِرَةِ فَأُولَئِكَ فِي الْعَذَابِ مُحْضَرُونَ (١٦) }الروم:١٤-١٦

"marka qiyaamaha la gaaro dadku way kala baxayaan, oo kuwa xaqqa rumeeyey isla markaasna camal saalix ah sameeyey waxaa lagu karaamaynayaa janno, kuwa gaaloobayna oo beeniyeen wixii ay rusushu keeneen oo inkireen in la isi soo bixin doono kuwaasi waxay ku nagaanayaan naarta" (Alruum:14-16).

*Waxyaabaha soo hoos-gelaya rumaynta maalinta aakhiro waxaa ka mid ah:*

***Rumaynta waxa dhacaya dhimashada ka dib**, sida arkida malaa'igya marka la nafbixi rabo, iyo isku imtixaanida qabriga oo ah in qabriga la isku su'aalayo oo laba malag ay qofka waydiinayaan rabigiisa,diintiisa iyo nabigiisa, ka dibna ay dhici doonto in qabriga la isku cadaabo ama la iskugu nicmeeyo, waxyaabahaas oo dhamaantood ka mid ah waxa dhacaya inta lagu jiro nolosha barzakha oo ah nolosha u dhexaysa midda aduunka iyo midda aakhirada. Ilaahey wuxuu yiri:

{ إِنَّ الَّذِينَ قَالُوا رَبُّنَا اللَّهُ ثُمَّ اسْتَقَامُوا تَتَنَزَّلُ عَلَيْهِمُ الْمَلَائِكَةُ أَلَّا تَخَافُوا وَلَا تَحْزَنُوا وَأَبْشِرُوا بِالْجَنَّةِ الَّتِي كُنْتُمْ تُوعَدُونَ (٣٠) }فصلت:٣٠

"kuwa yiraahdeen Rabbigeen waa Allaah ka dibna toosnaadeen malaa'igta ayaa u imaanaysa marka ay nafbixi rabaan iyagoo ku dhahaya: ha cab-

sanina, hana tiiraanyoonina, kuna bishaaraysta jannadii la idiin yaboohi jirey intii aad aduunka joogteen" (Fussilat:30).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ وَحَاقَ بِآلِ فِرْعَوْنَ سُوءُ الْعَذَابِ (٤٥) النَّارُ يُعْرَضُونَ عَلَيْهَا غُدُوًّا وَعَشِيًّا وَيَوْمَ تَقُومُ السَّاعَةُ أَدْخِلُوا آلَ فِرْعَوْنَ أَشَدَّ الْعَذَابِ (٤٦) }غافر:٤٥-٤٦

"waxaa ku dhacay Fircoon iyo intii la jirtey cadaab xun, inta qiyaamaha laga gaarayo waxaa la gaynayaa naarta subaxdii iyo galabtiiba, marka qiyaamaha la gaarana waxaa la oranayaa: geliya Fircoon iyo inta la jirtey cadaab midda ugu daran" (ghaafir:45-46).

Waxaa Anas (a.k.n) uu Rasuulka (n.n.k.h) ka soo wariyey in uu yiri: "marka qofka la dhigo qabriga oo dadku ka kala tagaan ayaa waxaa uu maqlayaa kabahooda shanqartooda, waxaana u imaanaya labo malag, way soo fariisinayaan, waxayna kuoranayaan: maxaad ka oran jirtey ninkaan Muxamad ah? markaas ayaa mu'minku wuxuu leeyahay:waxaan yaqiinsanahay in uu yahay addoonkii Ilaaheey iyoRasuulkiisa , markaas ayaa waxaa lagu leeyahay fiiri booskii aad kulahayd naarta, waxaa Alle uu kuugu bedelay boos janada ku yaalla, labadabana wuu arkayaa. munaafiqa iyo gaalkuna waxaa lagu oranayaa maxaad ka oran jirtayninkaan, wuxuu leeyahay ma aan garanayo, waxaan dhihi jirey waxa dadku ay leeyihiin, markaas ayaa lagu oranayaa: ma aadan ogaan, mana aadan raacin, ka dibna waxaa lagu dhifanayaa bir,wuxuuna qaylinayaa qaylo ay maqlayaan waxa u dhow oo dhan oo aan ahayn insi iyo jinni" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

waxaa Ibnu Cabaas(a.k.n) yiri: Nabiga (n.n.k.h) ayaa wuxuu soo maray labo qabri, wuxuu yiri waa la cadaabayaa, mana lagu cadaabayo wax la waynaa, midkood iskama ilaalin jirin kaadida, midka kalena dadka ayuu isku diri jirey, ka dibna inta laan qoyan kala jeexay ayuu mid walba qabrigiisa mid ku talaalay, markii la waydiiyey sababta uu sidaas u sameeyeyna wuxuu yiri: waxaan rajaynayaa in cadaabka laga qafiifiyo ilaa inta aysan engegin" ( w.w.Bukhaari iyo Muslim).

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ اللَّهُ الَّذِي أَنْزَلَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ وَالْمِيزَانَ وَمَا يُدْرِيكَ لَعَلَّ السَّاعَةَ قَرِيبٌ (١٧) يَسْتَعْجِلُ بِهَا الَّذِينَ لا يُؤْمِنُونَ بِهَا وَالَّذِينَ آمَنُوا مُشْفِقُونَ مِنْهَا وَيَعْلَمُونَ أَنَّهَا الْحَقُّ أَلا إِنَّ الَّذِينَ يُمَارُونَ فِي السَّاعَةِ لَفِي ضَلالٍ بَعِيدٍ (١٨)}
الشورى ١٧-١٨

“Ilaaheey waa Allihii soo dejiyey Qur’aanka iyo kutubtiikaleba iyagoo run iyo xaq ah, soona dejiyey miisaanka (cadaalada), maxaa ku ogaysiiyey in saacada ay dhacayso qiyaamadu uu dhow yahay, qiyaamaha dhici deeda waxaa soo degdegsada dadka aan rumaysnayn iyagoo ku jeesjeesaya, laakiin juwa rumeeyeen way ka cabsanayaan,waxayna ogyihiin inay xaq tahay, kuwa ka murma arrinta dhicitaanka qiyaamaha waa kuwo ku jira baadinimo fog” (Al shuuraa:17-18).

Waxaa kale oo Alle yiri:

{ فَهَلْ يَنْظُرُونَ إِلا السَّاعَةَ أَنْ تَأْتِيَهُمْ بَغْتَةً فَقَدْ جَاءَ أَشْرَاطُهَا فَأَنَّى لَهُمْ إِذَا جَاءَتْهُمْ ذِكْرَاهُمْ (١٨) }محمد:١٨

“Kuwaas xaqa beeniyeeni ma ay sugayaan wax aan ahayn in saacadii qiyaamuhu ay kadis ugu dhacdo, waxaa yimid calaamadaheedii mana aysan wax ku dheefin ee sidee ayey ugu waansamayaan hadii timaado” (Muxamad:18).

Calaamadaheeda waawayn waxaa ka mid ah waxa ku xusan warka Nabiga (n.n.k.h) oo ahaa “ Qiyaamuhu ma dhacayoilaa aad horteed aragtaan toban calaamadood: markaas ayuu wuxuu sheegay: Qaacam dajjaal, daabada soo baxaysa, qoraxda oo ka soo baxaysa galbeedka, Ciise oo soo degaya, Ya’juuj iyo Ma’juuj, iyo saddex qorax madoobaad: mid ka dhacaya bariga, mid galbeedka ah iyo mif ka dhacaya jasiirada Carabta, intas oo dhan waxaa ugu dambeeya dab iyo naar ka imaanaysa Yaman oo dadka u kaxaynaysa meesha lagu kulminayo” (w.w.Muslim).

Imaatinka saacada qiyaamuhu waa mid degdeg ku dhacaya oo kadis ah. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ يَسْأَلُونَكَ عَنِ السَّاعَةِ أَيَّانَ مُرْسَاهَا قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِنْدَ رَبِّي لا يُجَلِّيهَا لِوَقْتِهَا إِلا هُوَ ثَقُلَتْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضِ لا تَأْتِيكُمْ إِلا بَغْتَةً يَسْأَلُونَكَ كَأَنَّكَ حَفِيٌّ عَنْهَا قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِنْدَ اللَّهِ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لا يَعْلَمُونَ (١٨٧) }الاعراف:١٨٧

“Waxay lu waydiinayaan kufaarta Makaad goorta ay dhacayso saacada qiyaamuhu, ee waxaad ku tiraahdaa waxaa og Ilaaheey, mana soo saarayo isaga qof aan ahayni, ogaanshaheedu waa cuslaaday, waana ka qarsoonaaday waxa ku jira dhulka iyo cirka, si aan kadis ahayna kuimaan mayso, wayku waydiinayaan sida inaad tahay qof raadinaya inuu ogaado, ee waxaad ku tiraahdaa waxaa og Ilaaheey, dadka intooda badanina ma oga in uu Alle kaliya ogyahay” (Al acraaf:187).

Waxaa kale oo uu Eebbe wayne yiri: “Arrinta qiyaamuha iyo ay degdegta ugu dhacayso waxay la mid tahay sida isha libirsigeeda oo kale amaba ka dhaqso badan” (Al naxli:77).

Dhicitaanka qiyaamuhuna waa in ay dhaco in buunka la yeeriyo ka dibna ay nooluhu wada dhintaan, Ilaaheey wuxuu yiri:

{وَنُفِخَ فِي الصُّورِ فَصَعِقَ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَمَنْ فِي الأَرْضِ إِلا مَنْ شَاءَ اللَّهُ } الزمر:٦٨

“Waxaa la yeerinayaa buunka, ka dib waxaa dhimanaya waxa jooga cirka iyo dhulka, marka laga reebo inta uusan Alle rabin in dhintaan” (Alzumar:68)

## Rumaynta isi soo bixinta

Waa soo bixinta uu Alle ka soo bixinayoqubuuraha iyaga oo nool, qaawan oo aan kaba ilanayn, buuryoqaba oo aan waxba wadan, waxayna soo bixintu dhacaysaa marka la yeeriyo buunka mar labaad. Ilaaheey wuxuu yiri: “Buunka ayaa la yeerinayaa mar kale markaas ayaa dadku soo istaagayaan iyagoo fiiriya bal waxa uu Alle ku sameeyo” ( Alzumar:68).

Waxaa kale oo uu yiri: “Waxaa la afuufayaa markaas ayaas ayaa dadku ka soo baxayaan qabuuraha iyagoo degdegaya oo u socda Ilaahood”(Yaasiin:51).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: dadka waxaa aakhiro la soo bixinayaa iyagoo qaawan, aan kabo ilanayn, buuryoqabna ah” (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

## Rumaynta arrimaha iyo xaaladaha ay leedahay qiyaamaha wayni

Ilaaheey wuxuu yiri: “Maalinta ay dadku u soo istaagayaan Rabil-caalamiinka” (Al mudafifiin:6). Waxaa laga wadaa in dadku ay Alle u taagnaadaan banka qiyaamaha dadka la isgu keenayo, waxaa codka la kala gaara malaga u yeeraya, araguna wuu kala gaarayaa,qoraxdu way u soo dhowaanaysaa, waxaa qalka u gaaraya dhididka, waxaa loo aroorinayaa xawdka, waxaa la kala furayaa qoraaladii laga qoray, waxaa la dhigayaa miisaanka, siraadkana waa naarta ayaa laga dul-taagayaa, iyagoo kuwaasi ka mid yihiin dhacdooyin waawayn iyo xaalado laga cabsado.

## Rumaynta isxisaabinta

Ilaaheey wuxuu yiri: “Dadku marka ay dhintaan innaga ayey noo soo noqonayaan, ka dibna xisaabintooda iyo abaalmarintoodu waa wax innaga nalaka rabo” (Al ghaashiya:25-26).

Waxaa Eebbe yiri:

{ فَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَابَهُ بِيَمِينِهِ (٧) فَسَوْفَ يُحَاسَبُ حِسَابًا يَسِيرًا (٨) } الانشقاق:٧-٨

“Qofkii midigta laga siiyo faylkiisa acmaasha, waxay xisaabintiisu noqon doontaa mid fudud” (Al inshiqaaq:7-8).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ فَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ خَيْرًا يَرَهُ (٧) وَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ شَرًّا يَرَهُ (٨) }الزلزلة:٧-٨

“Qofkii sameeya wax khayr ah oo la eg quraanyo wuu arkayaa abaalmarintooda, qofkii sameeya wax shar ah oo la eg quraanyo wuu arkayaa abaalmarintooda” (Al zalzalah:(7-8).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ وَنَضَعُ الْمَوَازِينَ الْقِسْطَ لِيَوْمِ الْقِيَامَةِ فَلَا تُظْلَمُ نَفْسٌ شَيْئًا وَإِنْ كَانَ مِثْقَالَ حَبَّةٍ مِنْ خَرْدَلٍ أَتَيْنَا بِهَا وَكَفَى بِنَا حَاسِبِينَ (٤٧) }الانبياء:٤٧

“Waxaan maalinta qiyaamaha soo dhigaynaa miisaan cadaalad ah, cidna loo gaysan mayo wax dulmi ah, xataa hadii uu mir la egyahay waan keenaynaa, Ilaah ayaana ku filan inuu tirokoobo acmaasha adoomadiisa uuna ka abaalmariyo” (AL anbiyaa:47).

## Xisaabinta khalqiguna waa labo nooc:

1. xisaabinta mu’miniinta, waxayna noqonaysaa tusid ( bandhigid) ama la xisaabtamid. waxaana sidaas tusinaya xadiiska Ibnu Cumar (a.k.n) oo ahaa in Nabigu (n.n.k.h) yiri: “Ilaaheey wuxuu soo dhowaynayaa mu’minka, wuxuuna gelinayaa asturkiisa si inta kale aysan ula socon waxa dhexmaraya isaga iyo Ilaaheey, markaasayuu ku leeyahay: ma taqaan dembi hebel iyo dembi hebel, wuxuu leeyahay haa Ilaaheeyoow, marka uu qirto dembiyadiisa oo dhan oo uu u maleeyo inay u dhamaatay oo uu halaagsamay ayuu wuxuu kuleeyahay: waan kuu asturay intii aad aduunka joogtay, maantana waan kuu dhaafayaa, markaas ayuu wuxuu siinayaa faylkiisa ay

ku yaalaan xasanaadkiisu” (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

La xisaabtanka adag iyo la doodistu waxay qabsanaysaa dadka dembiyada waawayn (kabaa’irta) galay oo muwaxidiinta ah, oo ka mid ah dadka uu Alle dembiyadooda ku cadaabayo ka dibna ciribtoodu tahay jannada.Waxaana sidaas tusinaya xadiiskii Caa’isho (a.k.n) oo ahaa “ Qofkii aakhiro la xisaabiyo waa u dhamaatay oo waa halaagsamay,waxan ku iri ayey tiri: ma wuusan Ilaaheey dhihin: qofkii kitaabkiisa midigta laga siiyo si fudud ayaa loo xisaabinayaa, markaas ayaa Rasuulku (n.n.k.h) wuxuu yiri: sidaas waxaa laga wadaa laga wadaa tusinta iyo u bandhida dembiyadiisa, ee qofkii lala xisaabtamo waa la cadaabayaa” (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

2. Xisaabinta gaalada: kuwaas lama xisaabinayo xisaab la isbarbar dhigayo xumaanta iyo samaha, sababtoo ah ma ay lahan xasanaad iyo wanaag u yaalla. Alle isagoo arintaas ka hadlaya ayaa wuxuu yiri:

“Waxaan u qasadnay wixii ay sameeyeen oo wanaag ahaa, markaas ayaan waxaan ka dhignay wax aan jirin oo la mid ah boor la firdhiyey” (Al-furqaan:23).

Waxaa la tusayaa acmaashii ay sameeyeen waana la qirsiinayaa. Waxaa ku jiray xadiiskii Ibnu Cumar ee hore in”gaalada iyo munaafiqiinta loo dhawaaqayo iyadoo khalqiga oodhan ay maqlayaan, waxaana lagu oranayaa: kuwaasi waa kuwii Alle ka beensheen,lacnadi ha ku dhacdo ku daalimiinta ah [Huud:18]” (w.w.Bukhaariiyo Muslim.

## Rumaynta abaalmarinta

waa rumaynta in jannadu ay xaq tahay, naartu ay xaq tahay. Jannadu waa daarta uu Alle u diyaariyey inuu ku abaalmariyo adoomadiisa isla ilaaliyey ciqaabtiisa, waxyaabaha dadka loogu nicmeeyo oo nooc walba ah ayaa laga helaa, weliba waxaa laga helaa wax aysan il aysan arkin, dhegna aysan maqlin, qof qalbigiisna aan ku soo dhicin. Naartuna waa meesha uu Alle u diyaariyey si ay abaalgud ugu noqoto gaalada, waxaana ku jira wax walba oo noocyada cadaabka ka mid ah ha noqdo mid jirka loogu talogalay ama ha noqdo mid aan ahayn wax la taaban karo sida ihaanada iyo sharaf dilka.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ ثُمَّ أَوْرَثْنَا الْكِتَابَ الَّذِينَ اصْطَفَيْنَا مِنْ عِبَادِنَا فَمِنْهُمْ ظَالِمٌ لِنَفْسِهِ وَمِنْهُمْ مُقْتَصِدٌ وَمِنْهُمْ سَابِقٌ بِالْخَيْرَاتِ بِإِذْنِ اللَّهِ
ذَلِكَ هُوَ الْفَضْلُ الْكَبِيرُ (٣٢) جَنَّاتُ عَدْنٍ يَدْخُلُونَهَا يُحَلَّوْنَ فِيهَا مِنْ أَسَاوِرَ مِنْ ذَهَبٍ وَلُؤْلُؤًا وَلِبَاسُهُمْ فِيهَا حَرِيرٌ
(٣٣) وَقَالُوا الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي أَذْهَبَ عَنَّا الْحَزَنَ إِنَّ رَبَّنَا لَغَفُورٌ شَكُورٌ (٣٤) الَّذِي أَحَلَّنَا دَارَ الْمُقَامَةِ مِنْ فَضْلِهِ لَا
يَمَسُّنَا فِيهَا نَصَبٌ وَلَا يَمَسُّنَا فِيهَا لُغُوبٌ (٣٥) وَالَّذِينَ كَفَرُوا لَهُمْ نَارُ جَهَنَّمَ لَا يُقْضَى عَلَيْهِمْ فَيَمُوتُوا وَلَا يُخَفَّفُ
عَنْهُمْ مِنْ عَذَابِهَا كَذَلِكَ نَجْزِي كُلَّ كَفُورٍ (٣٦) وَهُمْ يَصْطَرِخُونَ فِيهَا رَبَّنَا أَخْرِجْنَا نَعْمَلْ صَالِحًا غَيْرَ الَّذِي كُنَّا
نَعْمَلُ أَوَلَمْ نُعَمِّرْكُمْ مَا يَتَذَكَّرُ فِيهِ مَنْ تَذَكَّرَ وَجَاءَكُمُ النَّذِيرُ فَذُوقُوا فَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ نَصِيرٍ (٣٧)} فاطر:٣٢-٣٧

“Markii aan umadihii hore halaagnay ayaan Qur’aanka waxaan siinay adoomadeenii aan dooranay oo ka mid ah umada nabi Muxamad (n.n.k.h), dadkaas waxaa ku jira daalimiin ah oo naftooda dulmiyeen, waxaa ka mid kuwo dhexdhexaad ah, waxaa kale oo ku jira kuwo u dhaqsada khayraadka idanka Ilaaheey awgiis, in kitaabkaas la siiyaa oo la doortaahi waa fadli wayn, kuwaasi waxay gelayaan janooyin lagu nagaanayo, waxaa lagu qurxinayaa jijimo ka samaysan dahab iyo luul, dharkooda caadiga ahina waa xariis.Marka ay janada galaana waxay dhahayaan: waxaa mahadsan Allihii na dhaafsiiyey murug oo dhan, Rabigeen waa mid dembidhaaf badan oo adoomadiisa ku shukriya, waxaa amaanan Allihii na dejiyey janadaan lagu nagaanayo iyadoo aysan na soo gaaraynin daal iyo waxqabad waa.

Kuwa gaalada ah waxay yeelanayaan naarta jahanamo, ma dhimanayaan mana laga qafiifinayo cadaabta,sidaas ayeyna noqonaysaa abaalmarinta gaal kasta. Gaaladaasi ayey ku dhex-cabaadayaan iyagoo leh: Rabiyoow naga bixi oo aduunyada noo celi, waxaan soo samaynaynaa camal wanaagsan oo ka duwan wixii xilka lahaa oo aan samayn jirnay,markaas ayuu Alle wuxuu ku leeyahay ma waanan idiin sugin oo cimri fiican idin siinin oo uu ku hanuuni karo qofkii hanuun rabaa, oo ma wuusan idiin imaan nabi idiin digaahi, oo hadana aadnaan qaadan wayn hanuunkii,maadaama ay sidaasi jirto dhedhemiya cadaabka,mana ay haystaan gaaladu cid u soo baxda oo garab siisa” (Faadir:32-37).

# Rumaynta qadarta

Waa in citiqaad kama dambays ah la citiqaadiyo in Ilaaheey uu cilmigiisa ku sii qorsheeyey wax kasta oo khalqigu marayo, ka dibna uu ku dhigay Lawxul-maxfuudka, ka dibna uu ku socodsiiyey rabitaankiisa, uuna ku abuuray awoodiisa.Alle wuxuu yiri: “Wax walba oo aan abuurnay waxaan ku abuurnay in iyo si aan horay u sii qorshaynay” (Alqamar:49) .Waxaa kale oo uu yir: “Wax walba wuu abuuray, wuuna sii qaadaray oo sii qorsheeyey” (Alfurqaan:2).

Waxaa soo hoos gelaya rumaynta qadarta:

1. **Rumaynta cilmiga Ilaaheey ee weligiis jiraha ah,** oo wax walba ka warqaba si guud iyo si gaar ahaaneedba,wuxuuna ogyahay wax walba oo ficilaiisa ka mid sida qorshaynta wax walba waqtiga ay dhamaanayaan, risqiyada, ama la xiriira adoomada ficiladooda iyo waxa ay samaynayaan, sida adeecista ama ku caasinta Ilaaheey,Ilaaheey wuxuu yiri:”Wuu og yahay wax walba” (Albaqarah:29).

Waxaa kale oo uu yiri:”Socodsiintaas qoraxda iyo dayaxa lagu socodsiiiyey xisaab la yaqaan waa qorshayntii Allaha leh awooda iyo cilmiga buuxa” (Al ancaam:96). Wuxuu Alle siiogaa cida adeeci doonta iyo cida caasin doonta sida uu u ogyahay oo kale inta uu la ekaanayo qofka cimriga la siiyey cimrigiisu iyo waxa laga nusqaaminayo cimrigiisa.

2.**Rumaynta in uu Alle sii qoray wax kasta oo la qadaray,** uuna ku qoray Lawxul-maxfuudka.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ مَا أَصَابَ مِنْ مُصِيبَةٍ فِي الأَرْضِ وَلا فِي أَنْفُسِكُمْ إلا فِي كِتَابٍ مِنْ قَبْلِ أَنْ نَبْرَأَهَا إِنَّ ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرٌ (٢٢) } الحديد:٢٢

“Waxa idinku dhaca dadoow oo ka dhaca dhulka ama naftiina waxay ku qornaayeen kitaab (Lawxul-maxfuudka) iyadoo lagu qoray inta aan khalqigaba la abuurin,arrinkaasina waa wax u fudud Ilaaheey” (Al xadiid:22).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ لا يَعْزُبُ عَنْهُ مِثْقَالُ ذَرَّةٍ فِي السَّمَاوَاتِ وَلا فِي الأَرْضِ وَلا أَصْغَرُ مِنْ ذَلِكَ وَلا أَكْبَرُ إِلا فِي كِتَابٍ مُبِينٍ (٣) } سبأ:٣

“Ilaaheey kama qarsoomo wax la’eg quraanyo ugamana qarsoomo cirka iyo dhulka midnaba, kaas wax ka sii yar ama ka sii wayn midna kama qarsoomayo oo waxa oo dhan waxay ku qoran yihiin waadix ah oo cad” (Saba’: 3).

Waxaa laga soo wariyey Cabdullaahi ibn Camr ibnul Caas (a.k.n) inuu yiri waxaan maqlay Nabiga (n.n.k.h) oo leh “Ilaaheey wuxuu qoray wax kasta oo loo qorsheeyey khalqiga konton kun oo sano ka hor inta uusan abuurin circa iyo dhulka,carshigiisuna wuxuu ka koreeyey biyo” (w.w.Muslim).

Waxaa laga soo wariyey Cubaada ibnu Saamit (a.k.n) inuu yiri waxaan maqlay Rasuulka (n.n.k.h)  oo leh:”wixii ugu horeeyey oo Ilaaheey uu abuuray waxay ahaayeen qalinka,wuxuuna ku yiri: qor, wuxuu yiri: Rabbiyoow maxaan qoraa, wuxuu ku yiri: waxaad qortaa wax kasta waxa loo qorsheeyey ilaa laga gaarayo ilaa aduunku ka dhamaado” (W.w.Abuu Daawuud iyo Tirmidi).

Ilaaheey wuxuu uga wada hadlay oo iskugu keenay cilmiga iyo qoraalka la xiriira wax kasta oo la abuuray marka uu yiri:

{ أَلَمْ تَعْلَمْ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي السَّمَاءِ وَالأَرْضِ إِنَّ ذَلِكَ فِي كِتَابٍ إِنَّ ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرٌ (٧٠) }الحج:٧٠

“Ma waadan ogayn in Alle uu ogyahay wax walba oo cirka ama dhulka jooga, waxaas oo dhan waxay ku qoran yihiin kitaan, arrinkaasina waa u fudud yahay Alle” (Alxaj:70).

3. **Rumaynta rabitaanka Alle oo aan la hor-istaagi karin,** waxaa dhacay wixii uu Alle rabey inay dhacaan, wixii uusan rabin inay dhacaana ma aysan dhicin, wax celi karaa ma ay jiraan wixii uu bixiyo, cid bixin kartaana ma jirto wixii uu diido, lamana hor-istaagi karo wixii uu xukmiyo, kamana dhacaan mulkigiisa wax uusan rabin, qofkii uu rabo wuxuu ku hanuuniyaa fadligiisa, wuxuuna cadaaladiisa ku baadiyeeyaa qofkii uu rabo, cid jebin karta xukunkiisana ma ay jirto.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا اقْتَتَلَ الَّذِينَ مِنْ بَعْدِهِمْ مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَتْهُمُ الْبَيِّنَاتُ وَلَكِنِ اخْتَلَفُوا فَمِنْهُمْ مَنْ آمَنَ وَمِنْهُمْ مَنْ كَفَرَ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا اقْتَتَلُوا وَلَكِنَّ اللَّهَ يَفْعَلُ مَا يُرِيدُ } البقرة: ٢٥٣.

“Hadii uu Ilaaheey rabo ma aysan dagaali lahayn kuwii yimaadeen rususha kadib, ka dib markii cadaymuhu soo gaareen oo ay diinta heleen, laakiin kuwaasi way isqilaafeen, oo qaarkood waxay rumeeyeen xaqqa, qaarna way ku kufriyeen, hadii Alle uu rabo ismaaysan dagaaleen, laakiin Ilaaheey wuxuu sameeyaa wixii rabo oo xikmadiisu keento” (Al baqarah:253).

Waxaa kale oo uu yiri: “waanada Ilaaheey waxaa qaata dadka raba inay xaqqa ku toosnaadaan, mana awoddaan toosnaanta inuu Rabbi rabo ma ahane” (Al takwiir:28-29).

4. **Rumaynta inuu Alle abuuray khalqiga oo dhan.** Ilaaheey waa midka wax abuuray, inta ka soo hartayna waa la abuuray, wax walba waa la abuuray xataa tilmaamaha ay wuxu leeyihiin iyodhaqdhaqaaqooda, waxaana abuuray Allaah, Alle wuxuu yiri: “Ilaaheey waa midka wax walba abuuray, wax walbana isaga ayaa xafida” (Al zumar:62).

Waxaa kale oo uu yiri: “Alle ayaa abuuray adinka iyo waxa aad samaynaysan” (Alsaafaad:96). Ficilka adoomadu waa wax uu Alleabuuray, iyaguna waa wax ay kasbadeen, ILaaheey wuxuu yiri: “Naftu waxay leedahay wixii ay kasbato,waxaana dusheeda ah wixii shaqaysatay oo xume ah” (Albaqarah:286).

5. **Rumaynta inaysan isku xirnay rabitaanka (mashii’ada) Ilaaheey iyo jeclaantiisa.** Waxaa laga yaabaa inuu rabo inay dhacaan wax uusan jeclayn, waxaana dhici karta inuu jecel yahay wax uusan rabin inay dhhacaan,iyadoo waxaas oo dhan ay ka dambayso xikmad wayn, Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَلَوْ شِئْنَا لآتَيْنَا كُلَّ نَفْسٍ هُدَاهَا وَلَكِنْ حَقَّ الْقَوْلُ مِنِّي لأَمْلأَنَّ جَهَنَّمَ مِنَ الْجِنَّةِ وَالنَّاسِ أَجْمَعِينَ (١٣) } السجدة:١٣

“hadii aan rabno waxaan hanuunin lahayn naf walba, laakiin waxaa dhacay oo ay lagama maarmaan ahayn inuu dhaco warkii ahaa: inaan ku dhaartay inaan Jahanamo aan ka buuxiyo jinni iyo insi iyagoo wada jira” (Al sajdah:13).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ إِنْ تَكْفُرُوا فَإِنَّ اللَّهَ غَنِيٌّ عَنْكُمْ وَلا يَرْضَى لِعِبَادِهِ الْكُفْرَ وَإِنْ تَشْكُرُوا يَرْضَهُ لَكُمْ } الزمر:٧

“hadii aad kufrisaan Alle waa idinka deeqtoon yahay,mana la jecla adoomadiisa gaalnimo, mana faro, hadii aad ku shukrisaan nicmooyinkiisa waa sida uu idinla jecel yahay” (Al zumar:7).

6.**Rumaynta inaysan is diidayn sharciga iyo qadartu.** Ilaaheey wuxuu yiri:

{ إِنَّ سَعْيَكُمْ لَشَتَّى (٤) فَأَمَّا مَنْ أَعْطَى وَاتَّقَى (٥) وَصَدَّقَ بِالْحُسْنَى (٦) فَسَنُيَسِّرُهُ لِلْيُسْرَى (٧) وَأَمَّا مَنْ بَخِلَ وَاسْتَغْنَى (٨) وَكَذَّبَ بِالْحُسْنَى (٩) فَسَنُيَسِّرُهُ لِلْعُسْرَى (١٠) } الليل:٣-١٠

“Ilhaaheey inta dhaartay ayuu wiri: camalka aadqabanaysiin waa kala fog yahay waana kala bedelan yahay, oo qofna aduunyo ayuu ushaqaysanayaa, qofna aakhiro ayuu u shaqaysanayaa, qofkii maalkiisa bixiya, Allen aka baqa, waxa ay sheegayso kalimada tawxiidkuna rumeeya waxaan u sahlaynaa oo aan waafajinaynaa khayrka iyo wadooyinka loo maro, laakiin qofkii bakhiila oo maalkiisa bixin waaya, kana maarma abaalmarinta Alle, kuna kufriya waxa ay sheegayso kalimada tawxiidka waxaan u sahlaynaa oo aan waafajinaynaa xumaanta iyo wadooyinka loo maro” (Al layl:3-10).

Sababta aysan isaga hor-imaanaynin waa in sharcigu yahay kitaab furan, qadartuna ay tahay wax maqan oo dahsoon, Allena waa qadaray wax kasta oo la xiriira khalqiga,waana ka qariyey oo wixii loo qadaray, waxyaabo ayuu faray, kuwo kalena waa ka reebay, wuxuuna u diyaariyey oo siiyey wixii ay ku fartoomi lahaayeen amarkiisa, wixii uu ka reebayna ay uga fogaan lahaayeen, waana u cudurdaaray hadii ay ku yimaadaan wax ay la gudan waayaan waajibaadkii saarnaa, sidaas awgeed qofna ogolaansho iyo xujo uma haysto inuu dembi sameeyo, Alle adeecidana uu ka tagoisagoo xujo iyo sabab ka dhiganaya wixii loo qadaray.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ سَيَقُولُ الَّذِينَ أَشْرَكُوا لَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا أَشْرَكْنَا وَلا آبَاؤُنَا وَلا حَرَّمْنَا مِنْ شَيْءٍ كَذَلِكَ كَذَّبَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ حَتَّى ذَاقُوا بَأْسَنَا قُلْ هَلْ عِنْدَكُمْ مِنْ عِلْمٍ فَتُخْرِجُوهُ لَنَا إِنْ تَتَّبِعُونَ إِلا الظَّنَّ وَإِنْ أَنْتُمْ إِلا تَخْرُصُونَ (١٤٨) قُلْ فَلِلَّهِ الْحُجَّةُ الْبَالِغَةُ فَلَوْ شَاءَ لَهَدَاكُمْ أَجْمَعِينَ (١٤٩) } .الأنعام:١٤٨-١٤٩

“waxay dhihi doonaan kuwa shirkiga sameeyey oo gaalada ah[iyagoo marmarsiyoonaya] hadii Ilaaheey uu rabi lahaa ma aanan gaaloownayn innaga iyo aabeyaasheen toona, waxna maaanan xaaraantinimaynayn uusan id-

min, sidaasina waa sidii ay sameeyeen gaaladii ka horeeyeen oo ay xaqqa ku diideen ilaa ay cadaabta Alle ku dhacday, waxaad ku tiraahdaa [Muxamadoow] ma u haysiin sidaas aad sheeganaysaan (oo ah waxyaabaha ay xaaraantinimeeyeen iyo Alle sidaas u qadaray) wax cilmi iyo cadayn ah oo aad noo soo bixin kartaan, waxa kaliya oo aad (gaalooy) ku raacaysiin arimaha diintiina waa malaha oo kali ah, wax aan been ahayna ma shaagaysiin, waxaad ku tiraahdaa: caddaynta lagu kala baxo waxaa haya Ilaaheey,hadii uu rabi lahaa inuu idin hanuuniyo wuu idin hanuuni lahaa" (Al ancaam:148-149).

Halkaas ayuu ilaaheey ku burburiyey beentii ay ku andacoonayeen, uuna cadaabtiisa ku geliyey, hadii ay haysan lahaayeen wax ay xujo ka dhigtaan sida qadarka oo kale Ilaaheey ma uusan cadaabeen iyaga, daboolkana kama uusan qaadeen in waxa ay ku andacoonayaan ay been yihiin. Iyagu ma aysan daalacan wixii loo qoray oo markaas waxay noqon laahaayeen dad cilmi ku hadlaya, waxayna sidaasi u noqon lahayd caddayn ay keensadaan, ee waxa ay wateen ayaa waxaa ay ahaayeen malo-awaal, sidaas awgeed ayaa waxaa lahaa xujada iyo cadaynta aan la hor-istaagi karin Allihii iyaga abuuray.

**Qadarta waxaa garab maray oo aan sida ay tahay u qaadan laba qolo**:

b) Kuwa ku talaxtageen in ay sugaan in adoomadu waxa ay sameeyaan ay iyaga uun sameeyeen, oo diideen in Alle uu horay u sii qadaray oo u sii qorsheeyey.Kuwaasina waxay kala leeyihiin labo heer:

1. Kuwo xagjir ah: waa qadariyada kuwa loo yaqaan kuwoodii hore, oo soo bexeen dhamaadkii waqtigii asaxaabta, waxaana qaladkooda cadeeyey asaxaabta, sida Ibnu Cabbaas, Ibnu Cumar (a.k.n).Kuwaasi waagaas waxay diideen in Ilaaheey uu sii ogaa afcaasha adoomadiisa uuna horayu sii qoray, waxaa kale oo ay diideen in Alle uu rabey in afcaashaas ay adoomadu sameeyaan, iyoin uu isagu abuuray afcaashooda.

2. Kuwo dhexdhexaad ah: kuwaasi waa qolada loo yaqaan Muctazilada, kuwaasi waxay ogolaadeen sii ogaanta iyo qoraalka afcaasha adoomada,laakiin waxay diideen abuurista iyo rabitaanka Alle, waxayna ku andacoodeen in adoonku uu isagu abuuro afcaashiisa.

t) Jabriyada: waa kuwo ku talaxtageen sugida afcaasha Ilaaheey, ilaa ay arrintu gaartay in adoonka ay ka xayuubiyeen inuu awood leeyahay ama

uu wax dooran karo, sidaas awgeed waxayka dhigeen adoonka afcaashiisa mid uusan khiyaar isagu u lahayn sida dhaqdhaqaaqa qofka jaraynaya oo kale. Waxayna meesha ka saareen in ficilada Ilaaheey ay ku qotomaan xikmad ayna leeyihiin sababo. Kuwaas ayaa waxay u sii kala qaybsameen labo qaybood:

1.Kuwo xagjir ah: waa diinxumayaasha suufiyada, oo iyagu daalacanayaan sida dhabta ah oo uunkaan lala rabo, sidaas awgeedna ay wax kasta samayn karaan iyagoo marmarsiyo ka dhiganayaan in ficilkoodu uu waafaqsan yahay sidii Alle uu qadaray,ilaa mid iyaga kamid ahi uu yiri: “wax kasta oo aan samaynayaa adeecid Alle, sababtoo ah waxa uu rabo meesha ay ku fulayaan oo doonista Alle ay muuqanayso ayaan ahay”.

2. Kuwo dhexdhexaad ah: waa Ashcariyada, iyagu waxay yiraahdaan : adoonku wuxuu leeyahay inuu kasbado oo sameeyo ficilka, laakiin awoodiisu saamayn ma lahan.

Labada kooxoodba (qadariya iyo jabriyadaba) waxaa warkooda burinaya sharciga iyo waaqica ( sida xaqiiqada ah ee jirta).

1.Kuwa qadarka diida [afartiisa heerba: cilmiga, qoraalka, rabitaanka iyo abuurisata oo aan soo sheegnay] waxaa warkooda burinaya aayado iyo axaadiis cad cad oo sidaas sugayaan, waaqicuna wuxuu tusayaa in qofku uu go’aansanayo inuu wax sameeyo ka dibna wax ka hor-istaagayaan.

2.Jabriya kutalaxtageen qadarta inay sugaan waxaa iyagana radinaya oo waxkooda baabi’inaya aayado iyo axaadiis sheegayaan in adoonku uu leeyahay ficil iyo doorasho,waaqicuna wuxuu tusinayaa in qof walbaaba uu kala sooci karo falalka uu isagu doortay iyo kuwa uu ku qasban yahay. Waxaana buuxda aayado iyo axaadiis sugayaan in ficilka Ilaaheey uu ku qotomo sabab iyo xikmad.

# Qur’aanka

Qur’aanku waa kalaamkii Ilaaheey. Alle wuxuu yiri:

{وَإِنْ أَحَدٌ مِنَ الْمُشْرِكِينَ اسْتَجَارَكَ فَأَجِرْهُ حَتَّى يَسْمَعَ كَلامَ اللَّهِ ثُمَّ أَبْلِغْهُ مَأْمَنَهُ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لا يَعْلَمُونَ (٦)}
النور:٦

“Hadii qof gaalada dagaalka lagula jiraa uu kaa dalbado in la amaan gelayo amaan geli si uu u maqlo kalaamka Ilaaheey, ka dibna celi oo gaarsii meel uu amaan ku yahay, sababta sidaas loo samaynayaa waa in gaaladu ay yihiin dad aan aqoon u lahayn xaqiiqada dhabta ah ee islaamka” (Al nuur:6).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri isagoo gabiilooyinka isku bandhigaya waqtiga isku imaatinka carbeed uu jiro :”ma jiraa  nin ii gayn kara tolkiis,  quraysh way diideen inaan gaarsiiyo kalaamka Ilaaheey” (w.w.Axmad, Abuu Daawuud, Timidi, Nasaa’I iyo Ibnu Maajah).

Qur’aanku dhab ahaan waa kalaamkii Ilaaheey, xagga xuruuftiisa iyo macnihiisaba, mana u eka kalaamka khalqiga,waxaa lasoo dejiyey isaga oo aan ahayn wax la abuuray, Ilaaheey ayaa ku hadlay, ka dibna wuxuu u waxyooday Jibriil, isaguna wuxuu ku soo dejiyey nabi Muxamad (n.n.k.h) qalbigiisa isagoo qayb qayb ah, markaas ayuu dadka u aqriyey. Alle wuxuu yiri:

{ وَقُرْآنًا فَرَقْنَاهُ لِتَقْرَأَهُ عَلَى النَّاسِ عَلَى مُكْثٍ وَنَزَّلْنَاهُ تَنْزِيلا (١٠٦) }الإسراء:١٠٦

“Waxaan kugu soo dejinay Qur’aan  aan kala dhigdhignay, si aad si tartiib tartiib ah aad dadka ugu aqrido, waxaana aan soo dejinay isagoo qayb qayb ah oo aan halmar wada socon” (Al israa:106).

Hadii ay dadku aqriyaan ama ay musxafka ku qoraan amaay laabta ku xafidaan, sidaas ugama baxaayo inuu yahay kalaamkii Ilaaheey oo xaqiiqo ah, warka waxaa iska leh ayaa layiraahdaa:qofkii isagu bilaabay ku hadlidiisa, ee looma leexiyo qofka isagu dadka soo gaarsiiyey, aqrintu way ka duwan tahay waxa la aqrinayo, qoristuna way ka duwan tahay waxa la qoray, xafididuna way ka duwan tahay waxa la xafiday, waaana sidaas waxa la samaynayo oo dhan.Ficilku waa ficilka aqriyaha, ama qoraaga ama xafidahalaakiin kalaamku waa kalaamkii Allaah.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ قُلْ نَزَّلَهُ رُوحُ الْقُدُسِ مِنْ رَبِّكَ بِالْحَقِّ لِيُثَبِّتَ الَّذِينَ آمَنُوا وَهُدًى وَبُشْرَى لِلْمُسْلِمِينَ (١٠٢) وَلَقَدْ نَعْلَمُ أَنَّهُمْ يَقُولُونَ إِنَّمَا يُعَلِّمُهُ بَشَرٌ لِسَانُ الَّذِي يُلْحِدُونَ إِلَيْهِ أَعْجَمِيٌّ وَهَذَا لِسَانٌ عَرَبِيٌّ مُبِينٌ (١٠٣)} النحل ١٠٢-١٠٣

"Waxaad ku tiraahdaa Muxamadoow: Qur'aanku ma ahan wax aan soo dhoobdhoobtay ee waxaa soo dejiyey Jibriil oo kakeenay Ilaaheey isagoo Qur'aankaasi run iyo cadaalad ah si loogu sugo kuma mu'miniinta ah, uuna uu hanuun iyobishaaro ugu noqdo muslimiinta, waxaan la soconaa inay gaaladu leeyihiin:waxaa Qur'aanka soo bara Muxamad qof , been ayeey sheegeen, qofka ay kugu xaglinayaan inuu wax ku baro waa qof aysan luuqadiisu carabi ahayn, meesha Qur'aankaanina uu yahay mid afcarabi ah oo aad u cad" (Al naxli:102-103).

Waxaa Ilaaheey uu gaalnimo ku xukumay qofkii Qur'aankaan u tiiriya inuu yahay war dadeed, wuxuuna ugu dhaartay naarta Saqara ah, wuxuuna yiri: "Waxaan gelinayaa Saqara" (Al mudathir:26).

Waxaa Qur'aanka aan sidii laga rabey aan u rumaynin oo sidaas awgeed ku baadiyoobay labo qolo:

1. Jahmiyada oo ah kuwo diideen sifooyinka iyo tilmaamaha Ilaaheey, sidaas awgeedna diideen kalaamkiisa, oo ku andacoodeen in hadii Qur'aanka loo tiiriyo Ilaaheey ay arrintaasi noqonayso in wax makhluuq ah loo naaqatullaahi C\hi , baytullaahi, ee sidaasi ma noqonayso tilmaan loo tiiriyey oo lagu tilmaamay ciddii ku tilmaaneed.

Waxaa radinaya oo warkooda burinaya in waxa Alle loo tiiriyaa ay u qaybsamaan labo: in loo tiiriyo wax cayn ah oo iskood u taagan, markaas waxay noqonayaan wax makhluuq ah oo loo tiiriyey Allihii abuuray.

Iyo in ay noqdaan tilmaamaysan caqligal ahayn inay kaligeed istaagto, sida nolosha, maqalka, aragga, cilmiga iyo hadalka, markaas waxay noqonaysaa in loo tiiriyey Ilaaheey tilmaan uu leeyahay oo uu ku tilmaaman yahay. Intaas waxaa dheer in warkoodu uu khilaafsan yahay kitaabka, sunnada iyo ijmaaca.

2. Kullaabiyada, Ashcariyada iyo Maaturiidiyada: kuwaas oo ah qolooyin iyagu sugeen oo ogolaadeen kalaamka Ilaaheey uu yahay yahay macne qadiim ah oo ay lahayd Ilaaheey naftiisu, laakiin waxay yiraahdeen in xuruufta iyo codka loo abuuray si ay u tusiso

> macnahaas qadiimka ah oo aan ahayn mid cusboonaada oo marar kala duwan dhaca isla markaana ma ahan mid ku tacaluqa oo la xiriira rabitaanka iyo doorashada Ilaaheey.

Maadaama ay kalaamka sidaas ku fasireen waxay kalaamka ka dhigeen mid ku kooban xagga macnaha, laakiin aan ku tacaluqin xuruufta iyo codka, sidaas awgeed waxay ka dhigeen wixii ay maqleen labada waalid (Aadam iyo Xaawo) ku maqleen jannada iyo wixii Muuse maqlay wax la abuuray oo aan ahayn kalaamkii Ilaaheey oo xaqiiqo ah.

Waxaa radinaya oo warkooda baadilka dhigaya in marka kalaam la yiraahdo loo isticmaalo macnaha oo lagu daray codka iyo xuruufta, oo aan kalaam xaqiiqo ah la dhihin waxa ay naftu ku sheekaysato iyada oo aan ku hadlin, intaas waxaa dheer in warkoodu uu khilaafsan yahay kitaabka, sunnada iyo ijmaaca.

# Arkida Ilaaheey

Waxaa ka mid ah rumaynta Ilaaheey iyo yawmul aakhiraha in la rumeeyo in mu'miniintu ay arkayaan Rabbigooda maalinta qiyaame, ayna indhahooda ku arkayaan marka ay joogaan laba meelood:

b) meesha dadka lagu xisaabinayo.

t) kadib marka ay jannada galaan.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ نَاضِرَةٌ (٢٢) إِلَى رَبِّهَا نَاظِرَةٌ (٢٣) } القيامة:٢٢-٢٣

"Wejiyada dadka ayaanka badani waa kuwo qurxoon oo imtiimaya, waxayna arkaysaa Rabigeedii abuuray" (Alqiyaamah:22-23).

Waxaa kale oo uu yiri: "Dadka ahlu jannaha ah Rabigooga ayey arkayaan iyagoo jooga kuraastooda" (Almudafifiina:23).

Waxaa kale oo uu yiri: "Kuwa wanaaga sameeyey waxay leeyihiin janno iyo dheeraad" (Yuunus:26).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu ku fasiray dheeraadkaas inuu yahay aragtida wejiga Ilaaheey ee wanaagsan, wuxuuna yiri: - ka dib markii uu dayaxa fiiriyey isaga oo afar iyo tobnaad ah-"Waxaad arki doontaan Rabigiin sida aad u aragtaan dayaxaan oo kale, mana la idinka qarinayo aragtidiisa oo wax idin kama xigsanayaan" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

Waxaa arkida iyo rumaynteeda garab maray laba qolo:

1. Waa kuwa diida sifooyinka iyo tilmaamaha Ilaaheey, kuwaas oo ah Jahmiyada, Muctazilada iyo kuwa raacsan oo ah Raafidada (shiicada) iyo Ibaadiyada (qolo ka soo jeeda Khawaarijta).

Kuwaasi waxay diideen in Alle la arkayo, waxayna soo daliishadeen warkii uu Ilaaheey ku yiri Muuse oo ahaa "I arki maysid" (Al acraaf:143), iyo warkiisii ahaa "Indhuhu aragtidiisa ma soo koobi karaan" (Al ancaam:103).

Waxaa radinaya oo warkooda baabi'inayain ujeedada laga leeyahay "I arki maysid" ay tahay oo kali ah inta aduunyada la joogo sida uu Muuseba dalbaday, eray ah "Lan" oo carabiga ahna kama dhalanayso in uu tusayo inuusan weligiis uusan arkayn.

Warkii kale oo ahaa inaysan indhuhu ka aragti buuxsan karin macnaheedu ma ahan inaan la arkayn ee waa in aysan ishu wada koobi Karin Ilaaheey,sidaas awgeed waxaa dhici karta in aragtiyi ay dhacdo laakiin ka indha-buuxsi uusan dhicin, sida aragtida qoraxda, dayaxa, buurta iwm, oo kuwaas waa la arkaa laakiin ishu sooma koobi karto qoraxda aragtideeda tusaale ahaan. Intaas waxaa dheer inay farabadan yihiin aayadaha iyo axaadiista sugayaan oo cadaynayaan arkida.

2. Khuraafifiinta kala ah Suufiyada iyo ahlu-bidcada

Kuwaasi waa kuwo ku talaxtagey arkida Alle dugisteeda,waxayna qabaan in xataa adduunyada lagu arki karo, oo ay arki karaan awliyadoodu, waxayna soo aruuriyeen axaadiis gacan ku samays ah oo ay yiraadeen inay tusinayso aragtidooda. Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: “ogaada inaadnaan Rabigiin arkaynin ilaa aad ka dhimataan”(w.w.Axmad, Nasaa’I iyo Aajurri).

# Xaqiiqada iimaanka

Iimaanku waa qawl (wax la dhaho) iyo camal la qabto. Waa:

- Qawlka qalbiga oo ah inuu la yimaado citiqaad, rumayn iyo aqbalid iyo hogaansan.
- Qawlka carrabka oo ah ku dhawaaqida kalimada islaamka iyo inuu banaanka soo dhigo shahaadataynka.
- Camalka qalbiga oo ah waxa uu samaynayo niyaysiga iyo doorashada iyo rabitaanka wanaagga, sida jacaylka, cabsida, rajada iyo-talosaarashada.
- Camalka carrabku waa waxa uu ku hadlayo oo dikriga, ducada iyo aqrinta.
- Camala xubnaha oo ah waxa ay samaynayso oo cibaadooyinka jirka laga qabto ah.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ (٢) الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ (٣) أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًّا لَهُمْ دَرَجَاتٌ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَمَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ (٤)}[الأنفال:٢-٤

"Mu'miniintu waa kuwa marka Alle la xuso ay quluubtoodu cabsato, marka Qur'aankiisa loo aqriyana uu iimaan u siyaado, Rabbigoodna talo-saartaan, mu'miniintu waa kuwa salaadda ooga, waxna ka bixiya waxa aan siino, kuwaasi waa mu'miniinta dhabta ah, waxay Alle agtiis ku leeyihiin darajooyin sare iyo risiq wanaagsan oo ah janno" (Al anfaal:2-4).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ ثُمَّ لَمْ يَرْتَابُوا وَجَاهَدُوا بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ أُولَئِكَ هُمُ الصَّادِقُونَ (١٥) } الحجرات:١٥

"Mu'miniintu waa kuwa rumeeyey Ilaaheey iyo Rasuulkiisa, sharcigiisana ku camal faleen, iimaankoodana aan kashakin, maalmoodii iyo naftoodiina ku bixiyeen jihaadka, kuwaasi waakuwo ka run-sheegeen iimaankooda" (Al xujuraat:15).

Naniguna (n.n.k.h) wuxuu yiri:

“Iimaanku waa dhawr iyo todobaatan [ama waa dhawr iyo lixdan] qaybood , qaybta ugu fadliga badanina waa in la yiraahdo Laa ilaaha illallaah, qaybta ugu hoosaydaana waa in waxa wax dhibaalka leh laga qaado wadada, xishoodkuna waa qayb kamid ah iimaanka” (w.w. Bukhaari iyo Muslim).

Iimaanku wuxuu ka kooban yahay wax lagu dhawaaqayo iyo camal la samaynayo, oo waa rumayn ay ka dhalanayaan qawlkaas iyo camalkaasi, haddii la waayo qawlkaas iyo camalkaasna waxay sidaasi tusinaysaa in aysan jirin rumayntii.

2.Iimaanka marka kaligiis la sheego: wuxuu la mid yahay marka islaamka kaligiis la sheego oo mid walba macnihiisu waa diinta oo dhan marka labadooda mid ka mid ah la sheego, laakiin marka labadooda la wada sheego mid walbaaba wuxuu yeelanayaa macne u gaar ah oo iimaanka waxaa laga wadaa citiqaadka qalbiga ku jira oo qarsoon, islaamkana waxaa laga wadaa camalka muuqda, sidaas awgeed mu’min kastaa waa muslim,laakiin muslim walbaa ma ahan mu’min. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ قَالَتِ الأَعْرَابُ آمَنَّا قُلْ لَمْ تُؤْمِنُوا وَلَكِنْ قُولُوا أَسْلَمْنَا وَلَمَّا يَدْخُلِ الإِيمَانُ فِي قُلُوبِكُمْ وَإِنْ تُطِيعُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ لا يَلِتْكُمْ مِنْ أَعْمَالِكُمْ شَيْئًا إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ (١٤) } الححرات :١٤

“kuwii reebaadiyahaa ahaa waxay yiraahdeen waxaan rumaynay Ilaah iyo Rasuulkiis rumayn dhamays tiran, ee waxaad ku tiraahdaa Muxamadoow: ma dhamaystirna iimaankiinu ee dhaha waan hogaansanay, iimaankuna weli ma uusan gelin qalbigiina, hadii aad Ilaaheey iyo Rasuulkiisa adeecdiin ma uu ka nusqaaminayo acmaashiisa waxbana, Ilaaheey waa mid dembi-dhaafid badan oo naxariis badan” (Al xujuraat:14).

3.Iimaanku wuu kordhaa, wuuna nusqaamaa: wuxuu ku kordhaa cilmiga iyo inmaskaxda lagu rogrogo aayadaha Ilaaheey ee la xiriira koonka [waxaa laga wadaa waxyaabaha loogu talogalay in lagu fekero oo lagu ogaado in cidda abuurtay ay tahay Allaah, sida cirka, dhulka, qoraxda, wabiyada,geedaha iwm], laguna tadaburo oo la dhuuxo aayadiisa sharciga iyo samaynta cibaadooyinka, iyo ka tekida dembiyada.Wuxuuna ku nusqaamaa in Alle laga jaahil yahay, la moogyahay aayadihiisa koonka la xiriira, in dhegaha laga furaysto aayadihiisa sharciga ah, in la dayaco cibaadooyinka iyo in la sameeyo dembiyada. Alle wuxuu yiri: “Marka loo aqriyo aayaadkiisa waxay u siyaadiyaan iimaan”. (Al anfaal:2). Waxaa kale

oo yiri: “Alle waa midka deganaanta ku soo dejiyey mu’miniinta quluub-tooda si ay u kororsadaan iimaan loogu sii daro iimaankoodii” (Alfatxi:4).

4.Iimaanku waa kala sarreeyaa, qaybihiisa qaarkoodna way ka sareeyaan qaarka kale, sida ku xusanba xadiiskii aan soo xusnay oo ahaa: “Iimaanku waa dhawr iyo todobaatan [ama waa dhawr iyo lixdan] qaybood , qaybta ugu fadliga badanina waa in la yiraahdo Laa ilaaha illallaah, qaybta ugu hoosaydaana waa in waxa wax dhibaalka leh laga qaado wadada, xishoodkuna waa qayb kamid ah iimaanka” (w.w. Bukhaari iyo Muslim).

5. Dadka iimaanka lehina way kala sareeyaan, oo qaarkood iimaankoodu wuu ka kaamilsan yahay kuwa kale iimaankooda, Ilaaheey wuxuu yiri:

{ ثُمَّ أَوْرَثْنَا الْكِتَابَ الَّذِينَ اصْطَفَيْنَا مِنْ عِبَادِنَا فَمِنْهُمْ ظَالِمٌ لِنَفْسِهِ وَمِنْهُمْ مُقْتَصِدٌ وَمِنْهُمْ سَابِقٌ بِالْخَيْرَاتِ بِإِذْنِ اللَّهِ ذَلِكَ هُوَ الْفَضْلُ الْكَبِيرُ (٣٢) } فاطر:٣٢

“Markii aan umadihii hore halaagnay ayaan Qur’aanka waxaan siinay adoomadeenii aan dooranay oo ka mid ah umada nabi Muxamad (n.n.k.h), dadkaas waxaa ku jira daalimiin ah oo naftooda dulmiyeen, waxaa ka mid kuwo dhexdhexaad ah, waxaa kale oo ku jira kuwo u dhaqsada khayraad-ka idanka Ilaaheey awgiis, in kitaabkaas la siiyaa oo la doortaahi waa fadli wayn” (Faadir:32).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: “Mu’miniinta waxaa iimaankoodu ugu dhamaystirnaan badan yahay kuwa ugu akhlaaqda wanaagsan” (w.w.Axmad, Abuu Daawuud iyo Tirmidi).

Qofkii labada shahaadatayn layimaada isagoo citiqaadsan macnahooda, kuna dhaqma sida ay tusinayaan wuxuu la yimid iimaanka guntiisa iyo salkiisa.Qofkii sameeya waajibaadka, iskana daaya xaaraanta wuxuu la yimid iimaankii waajibka ahaa. Qofkii sameeya sunooyinka, iskana daaya xaaraanta iyo karaahiyada wuxuu la yimid iimaan kaamil ah oo dhamaystiran.

6. In la yiraahdo anigu mu’min ayaan ahay inshaa Allaah waxay leedahay saddex xaaladood:

- In qofku uu sidaas u yiraahdo shaki uu ka qabo in iimaanka aasaaskiisii uu joogo markaas warkaasi waa xaaraan oo weliba waa gaalnimo, sababtoo ah iimaanku waa inaw go’naado.

- In uu sidaas u yiraahdo cabsi uu ka qabo inuu naftiisa amaanto oo ceebtiro maadaama uu sheeganayo inuu la yimid iimaan sugan ama dhamaystiran,markaas warkaasi waa waajib.
- In uu sidaas uyiraahdo barakaysi uu barakaysanayo earayga in-shaa Allaah,markaas way banana tahay.

7.Iimaanka tilmaantiisu kuma suulayso in dembi uun la galo haba ka mid noqdo kabaa'irtaee sidaas waa ku nusqaamaa iyadoo aasaaskiisu uu baaqi yahay.Qofka dembiga wayn galay iimaankiisu waa naaqis, laakiin iimaan waa leeyahay, waana faasiq dembigaas uu galay awgiis, inta uuaduunyada joogana ma ahan qof diinta ka baxay, kuna mutaysan mayo in aakhiro lagu waariyo naarta,ee wuxuu noqonayaa qof uu Alle ka yeelo sida uu rabo oo hadii uu rabo wuxuu ku cafinayaa naxariistiisa,jannada ayuuna gelinayaa, hadii uu rabana wuxuu ku ciqaabayaa in la'eg dembigiisa, ugu dambayna jannada ayuu gelayaa, ama waxaa lagu cadaabayaa dembigiisa inta uu la'eg yahay ka yar, naartana wuxuuuga soobaxayaa shafeeca qaadka kuwa shafeeca qaadaya, ama naxariista Allaha ah inta naxariisata midka ugu naxariista badan. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ إِنَّ اللَّهَ لا يَغْفِرُ أَنْ يُشْرَكَ بِهِ وَيَغْفِرُ مَا دُونَ ذَلِكَ لِمَنْ يَشَاءُ وَمَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَقَدِ افْتَرَى إِثْمًا عَظِيمًا (٤٨)}
النساء:٤٨

“Ilaaheey ma dhaafo in looshariig yeelo, wuxuuna u dhaafaa wixii intaas ka yar cidii uu rabo, qofkii Ilaaheey wax la wadaajiyaa abuurtay dembi aan u wayn” (Alnisaa:48).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri:

“Ahlu janadu waxay gelayaan janada, ahlunaarkuna waxay gelayaan naarta, markaas ayaa Ilaaheey leeyahay naarta ka soo bixiya qofkii ay qalbigiisa ku jirto in yar oo iimaan ah, waxay ka soo bixinayaan dad madoobaaday, waxaa lagu ridayaa wabiga nolosha” (w.w.Bukhaari).

Waxaa kale oo uu yiri: “waxaa naarta ka soo baxaya qofkii yiri:Laa ilaaha illallaahu, qalbigiisana uu ku jiray wax la eg mirta shaciirka (heedda), waxaa naarta ka soo baxaya qofkii yiri:Laa ilaaha illallaahu, qalbigiisana uu ku jiray wax la eg mirta burka, waxaa naarta ka soo baxaya qofkii yiri:Laa ilaaha illallaahu, qalbigiisana uu ku jiray wax la eg dhuuracaso” (W.w.Bukhaari). meesha xadiiskaani ka yiri “*wax khayr ah*” xadiiska qayb iyo riwaayo kale

oo uu leeyahay ayaa waxaa ku jiray “*wax iimaan ah*” tii hore bedelkeeda.

Waxaa mas’aladaan garabmaray labo qolo:

1.qolada qabsata nusuusta goodinta ah oo kali ah, qoladaas oo yiraahdaan wixii loogu goodiyey dadka waa hirgelayaan, oo sidaa awgeed diideen in loo shafeeco qaadi karo dadka dembiyada waawayn galay oo ka mid ah dadka ahlu tawxiidka ah oo dembiilayaasha ah. Qoladaasina waxay u qaybsamaan labo:

- Khawaarijta oo iyagu yiraahdaan qofka dembiga wayn galay waa ka baxay iimaanka, gaalnimana ma uusan gelin,sidaas awgeed inta aduunka la joogo waa gaal, aakhirana naarta ayuu ku waarayaa.
- Muctazilada oo iyagu yiraahdaan qofka dembiga wayn galay waa ka baxay iimaanka, gaalnimana ma uusan gelin, inta uu aduunyada joogo wuxuu taagan yahay meel u dhexaysa iimaanka iyo kufriga, mu’min ma ahan, gaalna ma ahan, aakhirana naarta ayuu ku waarayaa.

Waxaa kuwaas warkooda burinaya oo iyaga radinaya dhawr arimood:

b) Ilaaheey ayaa qofkaas dembiga wayn galay u sugay inuu iimaan leeyahay, kuna tilmaamay walaalnimo iimaan ku salaysan inta uu aduunka joogo, sida ku xusanba Ilaaheey warkiisa oo ahaa:

{ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الْقِصَاصُ فِي الْقَتْلَى الْحُرُّ بِالْحُرِّ وَالْعَبْدُ بِالْعَبْدِ وَالأُنْثَى بِالأُنْثَى فَمَنْ عُفِيَ لَهُ مِنْ أَخِيهِ شَيْءٌ فَاتِّبَاعٌ بِالْمَعْرُوفِ وَأَدَاءٌ إِلَيْهِ بِإِحْسَان } البقرة:١٧٨

“Kuwa xaqqa rumeeyayoow, waxaa la idinka rabaa in la qisaasto qofka ulakaca wax u dilay, iyadoo loo dilayo midka xorta ah mid xor ah, adoonkana loo dilayo adoon,haweentana loo dilayo haween, Qofkii walaalkiis ahaa oo uu dilay hadii dadkiisii ay wax u dhaafaan sida qisaastii ayna ku kaaftoomaan inay diyo ka qaataan, markaas waxaa laga rabaa midka wax dhaafay inuu xaqiisa u raadsado si aysan shiddo ku jirin, midkii wax laga rabeyna waa inuu si wanaagsan isaga gudo” ((Albaqarah:178).

Wuxuu ku tilmaamay qofkii dilka gaystey inuu walaal u yahay kii la dilay. Sidaas oo kalena waxay ku jirtaa ayaadda ah:

{ وَإِنْ طَائِفَتَانِ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ اقْتَتَلُوا فَأَصْلِحُوا بَيْنَهُمَا فَإِنْ بَغَتْ إِحْدَاهُمَا عَلَى الأُخْرَى فَقَاتِلُوا الَّتِي تَبْغِي حَتَّى تَفِيءَ إِلَى أَمْرِ اللَّهِ فَإِنْ فَاءَتْ فَأَصْلِحُوا بَيْنَهُمَا بِالْعَدْلِ وَأَقْسِطُوا إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ (٩) إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ فَأَصْلِحُوا بَيْنَ أَخَوَيْكُمْ وَاتَّقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ (١٠) } الحجرات:٩-١٠

“Hadii ay isdagaalaan labo qolo oo m’miniinta ka mid ah heshiisiiya, hadii midood ay ku gardarooto midda kale oo dagaalku qaado adinkuna dagaalku qaada midda gartadaran ilaa ay uga soonoqoto xukunka Ilaaheey iyo Rasuulkiisa, haddii ay soo noqoto si cadaalad ah u heshiisiiya, go’aanka aad qaadanaysaana ka cadaalad fala,Ilaaheey wuxuu jecel yahay kuwa marka ay wax xukumayaan cadaalada fala.Mu’miniintu waa walaalo, ee walaalihiin heshiisiiya, Ilaaheey ciqaabtiisana iska ilaaliya si la idin kugu naxariisto” (al xujuraat:9-10). Labadii qolo oo dirirayeen ayuu wuxuu ku tilmaamay inay yihiin mu’miniin, ssidaas awgeena wuxuu u daayey tilmaantii ahayd walaalnimada iimaanka ku salaysan.

t)Ilaaheey wuxuu dhaafaa wixii shirki ka hooseeya, isagoo u dhaafaya cidii uu rabo, wuxuuna naarta ka soo saaraya qofkii ay qalbigiisa ku jirto wax la’eg mir iimaan ah, sida ay sheegtayba axaadiis badan oo ku soo aroortay shafaacada.

2.Murji’ada oo iyagu qaba in acmaasha dib looga dhigo waxa lagu magacaabo iimaanka, camalka la samaynayaa sida ay qabaan kama tirsana oo kuma jiro qeexitaanka iimaanka. Marka ay rabaan inay iimaanka qeexaana way ku kala duwan yihiin oo qoloba si ayey ku sheegaan:

- Jahmiyada, iyagu waxay ku sheegaan in iimaanku yahay qalbiga oo rumeeya ama uun garta, sidaa awgeed waxba ma dhibo dembi maadaama uu iimaan joogo, sida hadii gaalnimo jirtaba aysan cibaado waxba u taraynin.
- Karraamiyada: waa in afka looga dhawaaqo oo kali ah.
- Murji’atul fuqahaa: qalbiga oo rumeeya iyo carrabka oo ku dhawaaqa oo kali ah, laakiin acmaashu kuma hirto xaqiiqada iimaanka ee acmaashu waa miraha ka dhasha iimaanka.

Waxaa radinaya Murji’adaarrimo ay ka mid tahay:

- Ilaaheey ayaa acmaasha ku tilmaamay iimaan, oo wuxuu ka yiri qoladii u tukadeen baytul-maqdis oo dhinteen inta aan qiblaga la bedelin “Ilaaheey ma dayacayo iimaankooda” (Albaqarah:143) oo laga wado salaadooda.
- Nabigu (n.n.k.h) wuxuu xayuubiyey qofka dembiga wayn galay inuu leeyahay iimaan dhamaystiran, wuxuuna yiri: “Sinaystuhu ma

sinaysto xaaladda uu sinada ku jiroisaga oo mu'min ah, tuuguna wax ma xado xaalada uu tuuganimada ku  jiro isaga oo mu'min ah, qofkuna qamri ma acabo isaga oomu'min ah, qofku boob iyo dhac kuma kaco isaga oo mu'min ah" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

Meesha labadaas qolo (Murji'ada iyo Waciidka qolada qabsata) dhibaat-adu ay  ka soo gaartay waa inay yiraahdeen iimaanku waa hal sheey, oo ay tahay in la wada helo ama la wada waayo.  Markaas ayaa Murji'adu waxay yirahdeen waxaa iimaan lagu yeeshaa in uun qalbiga laga qirto ama carrabka ama labadooda oo wada socda, weligiisba yuusan qofku camal faline, sidaas awgeed iyagu way gabood faleen, laakiin qolada waciidiyada la yiraahdaa waxay qabaan in looga baxayo iimaanka dembi wayn midka ugu yar hadii la sameeyo, sidaas awgeed waa kuwo dheereeyey oo tal-axtagey, waxaa ay ka midaysan yihiin in iimaanku uu hal wax yahay laakiin waxay ku kala duwan yihiin miraha ka dhashay.

# U talinta muslimiinta oo dhan iyo jamaacada

Muslimiintu waa ummad mid ah, arrimohooduna ma toosayaan, xaaladooduna ma hagaagayso, diintooduna ma ay hirgelayso haddii aan la helin arrimahaan soo socda:

- In ay waajib tahay in balan laga qaado madaxa muslimiinta in lagu adeecayo wixii wanaag ah. Nabigu (n.n.k.h) wuxuu yiri: "Qofkii dhinta isagoo aan imaamka muslimiinta balan ka qaadin inuu adeecayo wuxuu u dhimanayaa qaabkii jaahiliga ahaa oo jirey islaamka ka hor" (w.w.Muslim).
- In la maqlo lana adeeco dadka talada haya, iyadoo lagu adeecayo wixii wanaag ah.In lala xajiyo, lala ciido, lala jimcaysto madaxda oo aan la khilaafinha noqdeen kuwo wanaagsan ama aan wanaagsanayn, waa in loo naseexeeyo, hadii la isqabtana loo noqdo kitaabka iyo sunnada. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأُولِي الأَمْرِ مِنْكُمْ فَإِنْ تَنَازَعْتُمْ فِي شَيْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى اللَّهِ وَالرَّسُولِ إِنْ كُنْتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الآخِرِ ذَلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلا }النساء:٥٩

"Kuwa xaqqa rumeeyayoow, adeeca Ilaaheey, adeeca Rasuulkiisa iyo kuwa talada idiin haya, hadii aad wax isku qabatiina arrinta ula laabta Ilaaheey iyo Rasuulkiisa hadii aad rumaysan tihiin Ilaaheey iyo qiyaamaha, sidaas ayaa idinkaga wanaagsan isku khilaafida ra'yiga, sidaas ayaana idiin caaqibo wanaagsan" (Alnisaa:59).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri:"Qofka muslimka ah waxaa laga rabaa inuu maqlo oo adeeco dadka talada haya ama ha jeclaado waxa la farayo ama ha nebcaado, laakiin waa hadii aan dembi la farin, hadiise dembi la faro laguma laha loomana ogola inuu adeeco oou hogaansamo" (W.w.Bukhaari iyo Muslim).

Waxaa kale oo uu yiri: "Qofkii adeeci waaya hohaanka wuxuu Ilaaheey la kulmayaa isagoo aan haysan wax xujo ah" (w.w.Muslim).

3.In ay xaaraan tahay in la mucaarado oo dagaal lagala horyimaado, xataa hadii ay dulmi iyo cadaalad daro sameeyaan, marka laga reebo inay gaal-

nimo cad la yimaadaan oo cadayn diimeed aan u hayno, sidaasna waxaa sheegaya xadiiskii Cubaadah bin Saamit (a.k.n) oo ahaa inuu Nabigu (n.n.k.h) yiri:"Nabiga ayaa noo yeeray si aan balan ula galno, markaas ayaan waxaan u balanqaadnay inaan adeecayno marka ay arrintu na dhibayso iyo marka kale, marka ay nagu culus tahay iyo marka kale, iyo dadka talada haya inaanan ku qabsan, in la arko gaalnimo cad ma ahane" (W.w.Bukgaari iyo Muslim). Waxaa kale oo uu yiri: "Waxaad aniga ka dib arki doontaan eex iyo wax aad la yaabtaan, waxay yiraahdeen: maxaad na faraysaa hadii aan sidaas aragno, wuxuu yiri: xaqqa ay idinku leeyihiin ka soo baxa, Ilaahayna waydiista xaqiina" (W.w.Bukhaari iyo Muslim).

Ma banana in la iska dhiciyo oo lala dagaalo inshuruudahaan la helo ma ahane:

- In la hubsado inay gaaloobeen, sababtoo ah Nabiga (n.n.k.h) ayaa yiri: "Inaad aragtiin ma ahane gaalnimo cad". Wax ka soo qaad ma lahan hadii ay faafto inaygaaloobeen iwm.
- Waxa lagu helay oo la hubsaday waa in ay yihiin gaalnimo, lala dagaali mayo hadii faasiqiin noqdaan.
- Waa in gaalnimada ay ku dheceen mid iska muuqata oo aan lala gambanaynin, gaalnimo uqarsoon lagula dagaali mayo.
- Waa in loo hayo caddayn aan shaki lahayn oo sheegaysa inay gaaloobeen,sidaas awgeed lagula dagaali mayo wax malo ku dhisan oo aan la hubin ama mas'alo la isku khilaafsan yahay.
- Waa in awood loo leeyahay in dhibkooda la suuliyo, lala dagaali mayo hadii aan tabar loo haynin haba gaaloobeene, si aysan u dhicin in diinta xididada loo siibo. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ قِيلَ لَهُمْ كُفُّوا أَيْدِيَكُمْ وَأَقِيمُوا الصَّلاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ فَلَمَّا كُتِبَ عَلَيْهِمُ الْقِتَالُ إِذَا فَرِيقٌ مِنْهُمْ يَخْشَوْنَ النَّاسَ كَخَشْيَةِ اللَّهِ أَوْ أَشَدَّ خَشْيَةً } النساء:٧٧

"Ma waadan ogayn kuwii lagu yiri inta aan jihaadka loo idmin: gacmihiina ceshada oo ha dagaalaminina, salaadda ooga,sakadana bixiya, markii dagaalka lagu waajibiyeyna qolo xaaladoodii is bedeshay oo cadawgoodii ayey waxay uga cabsadeen sida ay Alle uga cabsadaan oo kale am aka daran" (Al nisaa:77). Waxaa la faray inaysan cadawgooda la dagaalamin markii ay tag darnaayeen,markii ay awood yeesheena jihaadka waa lagu waajibiyey.

# Asaxaabta

Saxaabi waxaa ah qofkii Suuanaha (n.n.k.h) lakulmay isagoo rumaysan, sidaasna ku dhintay. Asaxaabtu waa kuwa dadka ugu khayrka badan nabiyada ka dib, waana sidoo kale kuwa ugu fadliga badan umada jiilasheeda, Nabigu (n.n.k.h) wuxuu yiri: “dadka waxaa ugu khayr badan jiilkayga” waxaa kale oo uu yiri “ummadayda waxaa ugu khayr badan qarnigayga” (w.w. Bukhaari iyo Muslim).

Dhamaantood waa ku tilmaaman cadaalad, sababtoo ah Ilaaheey ayaa u doortay inay arday iyo asaxaab u noqdaan nabigiisa, waana ka raali noqday, waa ka toobad aqbalay, wuxuuna ku tilmaamay yilmaamaha kuwa ugu wanaagsan, wuxuuna u balan qaaday wax la balan qaado waxa u wanaagsan. Wuxuuna yiri:

{ مُحَمَّدٌ رَسُولُ اللَّهِ وَالَّذِينَ مَعَهُ أَشِدَّاءُ عَلَى الْكُفَّارِ رُحَمَاءُ بَيْنَهُمْ تَرَاهُمْ رُكَّعًا سُجَّدًا يَبْتَغُونَ فَضْلا مِنَ اللَّهِ وَرِضْوَانًا سِيمَاهُمْ فِي وُجُوهِهِمْ مِنْ أَثَرِ السُّجُودِ ذَلِكَ مَثَلُهُمْ فِي التَّوْرَاةِ وَمَثَلُهُمْ فِي الإِنْجِيلِ كَزَرْعٍ أَخْرَجَ شَطْأَهُ فَآزَرَهُ فَاسْتَغْلَظَ فَاسْتَوَى عَلَى سُوقِهِ يُعْجِبُ الزُّرَّاعَ لِيَغِيظَ بِهِمُ الْكُفَّارَ وَعَدَ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ مِنْهُمْ مَغْفِرَةً وَأَجْرًا عَظِيمًا } الفتح:٢٩

“Muxamad waa rasuul Ilaaheey,kuwa diintiisa raaceena waa kuwo u daran gaalada, una roon oo u naxariista mu’miniinta, waxaad arkaysaa marka ay tukanayaan iyaga oo rukuucsan, sujuudsan, waxayna rajaynayaan inuu janada geliyo kana raalli noqdo, calaamada sheegaysa sida ay Alle u adeecaan waxay ka muuqataa wejigooda, iyada oo ah raadkii sujuuda iyo cibaadada, tani waa tilmaantoodii ku tiilay Tawreed, tilmaantoodii ku tiilay Injiilna waa waa inayleeyihiin tilmaanta abuur soo baxay oo laamo la baxay, ka dibna laamihiisu bateen salkiisuna adkaaday, oo inta xoogaystay oo jiridiisa ku istaagay aad u qurxoonaaday, ayna ku farxeen dadkii beertay, si uu mu’miintaas aragoodu qurxoon yahay, tiradooduna badan tahay uu uga caraysiiyo gaalada,Ilaaheey wuxuu u balan qaaday kuwaas rumeeyeyhadana camalka wanaagsan sameeyeen inuu siiyo dembi dhaaf iyo ajar wayn oo janno ah” (al fatxi:29).

Iyagooasaxaabtu sidaas ah ah ayey haddana kala fadli badan yihiin si guud iyo si gaar ahba. Waxaa ka mid darajooyinka guud oo ay isdheer yihiin kuwaan soo socda:

1.Muhaajiriintu waxay ka fadli badan yihiin Ansaarta:  sababtoo ah iyagu waxay wada heleen soo haajiridii iyo u gargaarida Nabiga (n.n.k.h). Midda kalena marka Ilaaheey uu ka hadlayey labadaa qaybood wuxuu magacooda soo hormariyey Muhaajiriinta, wuxuuna yiri:

{ لِلْفُقَرَاءِ الْمُهَاجِرِينَ الَّذِينَ أُخْرِجُوا مِنْ دِيَارِهِمْ وَأَمْوَالِهِمْ يَبْتَغُونَ فَضْلا مِنَ اللَّهِ وَرِضْوَانًا وَيَنْصُرُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ أُولَئِكَ هُمُ الصَّادِقُونَ (٨) وَالَّذِينَ تَبَوَّءُوا الدَّارَ وَالإِيمَانَ مِنْ قَبْلِهِمْ يُحِبُّونَ مَنْ هَاجَرَ إِلَيْهِمْ وَلا يَجِدُونَ فِي صُدُورِهِمْ حَاجَةً مِمَّا أُوتُوا وَيُؤْثِرُونَ عَلَى أَنْفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ بِهِمْ خَصَاصَةٌ وَمَنْ يُوقَ شُحَّ نَفْسِهِ فَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ (٩) }الحشر:٨-٩

“Waxaa sidoo kale maalka lasiinayaa fuqarada Muhaajiriinta ee laga sooqaxiyey deegaanadoodii iyo maalkoodii iyagoo raba inIlaaheey uu aduunyadana risiq wanaagsan ku siiyo, aakhirana ka raalli noqdo, una gargaaraan diinta Ilaaheey iyo Rasuulkiisa, kuwaasi waa kuwo runloowyaal ah oo ay waafaqeen qawlkooda iyo ficilkoodu. Kuwa Madiino deganaayeen oo mu’miniin noqdeen Muhaajiriinta ka hor oo ah Ansaarta, kuwaasi waxay jecel yihiin walaalahooda u soo haajiray, mana ku xasdaan Muhaajiriinta wixii dhaqaaleiwmoo siiyo, waxayna naftooda ka hormariyaan Muhaajiriinta iyo danyarta xataa hadii iyaga uu hayo faqri iyo duruuf, qofkii ka nabadgala bakhiilnimo kuwaasi waa kuwo liibaanay oo gaaray wixii ay rabeen” (Al xashri:8-9).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ وَالسَّابِقُونَ الأَوَّلُونَ مِنَ الْمُهَاجِرِينَ وَالأَنْصَارِ وَالَّذِينَ اتَّبَعُوهُمْ بِإِحْسَانٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ وَأَعَدَّ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي تَحْتَهَا الأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا ذَلِكَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ (١٠٠) }التوبة:١٠٠

“Kuwa  u hormaray rumaynta Ilaaheey iyo Rasuulkiisa (n.n.k.h) oo ah Muhaajiriinta iyo Ansaarta iyo kuwa iyaga raacay in la wanaajiyo caqiidada iyo camalka,Ilaaheey wuu ka raalli noqday kuwaas, iyaguna raalli ayey ka noqdeen, wuxuuna u diyaariyey janooyin ay geedahooda hoostooda dureeraan wabiyo,iyagoo weligigood ku nagaan doona janooyinkaas,sidaasina waa liibaan wayn” (Al tawbah:100).

Waxaa kale oo uu yiri:

{ لَقَدْ تَابَ اللَّهُ عَلَى النَّبِيِّ وَالْمُهَاجِرِينَ وَالأَنْصَارِ الَّذِينَ اتَّبَعُوهُ فِي سَاعَةِ الْعُسْرَةِ مِنْ بَعْدِ مَا كَادَ يَزِيغُ قُلُوبُ فَرِيقٍ مِنْهُمْ ثُمَّ تَابَ عَلَيْهِمْ إِنَّهُ بِهِمْ رَءُوفٌ رَحِيمٌ (١١٧) }التوبة:١١٧

“Waxaa Ilaaheey ka toobad aqbalay Nabiga (n.n.k.h), Muhaajiriinta iyo Ansaarta nabiga u raaceen  duulaankii Tabuuk iyadoo lagu waqti adag,

wuxuu ka toobad aqbalay ka dib markii ay qolo iyaga ka mid ah ay quluubtoodu ku sigatay inay xaqqa kaleexato, laakiin Ilaaheey ayaa quluubtooda sugay, iyagana ka toobad aqbalay, Alle waa turid badan oo naxariis badan" (Al tawbah:117).

2.Qoladii wax labaxday inta aan la gaarin heshiiskii Xudaybiyah, jihaadkana ka qayb qaatay,kaas ayaa ka fadli badan kuwa markaas ka dib wax bixiyeen oo jihaadkana ka qayb qaateen.

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ لا يَسْتَوِي مِنْكُمْ مَنْ أَنْفَقَ مِنْ قَبْلِ الْفَتْحِ وَقَاتَلَ أُولَئِكَ أَعْظَمُ دَرَجَةً مِنَ الَّذِينَ أَنْفَقُوا مِنْ بَعْدُ وَقَاتَلُوا وَكُلا وَعَدَ اللَّهُ الْحُسْنَى وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ (١٠) } الحديد:١٠

"Ajarka kama sinna qoladii wax bixiday inta Makko la furan oo jihaadka ka qayb galay, kuwaasi way ka daraajo wayn yihiin kuwii wax bixiyey markaas Maako la furtay ka dib oo jihaadeen, labada qolanaba waxaa Ilaaheey u balanqaaday janno, wuxuuna xog-ogaal u yahay waxa aad samaynaysiin" (Alxadiid:10).

3.Al badar ayaa inta kale ka fadli badan,sababtoo ah Nabiga (n.n.k.h) ayaa Cumar (a.k.n) ku yiri iyadoo lagu jiro arrintii Xaadib bin Abii Baltaca "wuxuu Xaatim ka qaybgalay dagaalkii Beder, maxaa Cumaroow ku ogaysiiyey in Alle uu daalacday dadkii Beder ka qaybgalay ka dibna uu ku yiri: waxaad rabtiin sameeya, anigu waan idiin dembi dhaafay" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

4.Ahlu baycatir-ridwaani: Ilaaheey wuxuu yiri:

{ لَقَدْ رَضِيَ اللَّهُ عَنِ الْمُؤْمِنِينَ إِذْ يُبَايِعُونَكَ تَحْتَ الشَّجَرَةِ فَعَلِمَ مَا فِي قُلُوبِهِمْ فَأَنْزَلَ السَّكِينَةَ عَلَيْهِمْ وَأَثَابَهُمْ فَتْحًا قَرِيبًا }الفتح:١٨

"Ilaaheey ka raalli noqday mu'miniinta markii ay balanka iyo baycada kugula galeen geedka hoostiisa, Ilaaheey wuxuu ogaaday waxa mu'miniintaas quluubtooda ku jira oo runiyo iimaan ah,markaas ayuu ku soo dejiyey xasilooni, wuxuuna ugu abaalguday inuu siiyo furasho iyo fatxi dhow (heshiiskii Xudaybiyah)" (Al fatxi:18).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: "Naarta ma uu gelayo –inshaa Allaah- qof ka mid ah dadkii balanta kula galeen geedka hoostiisa" (w.w.Muslim).

Kala fadli badnaashaha gaarka ah waa sidaan:

Khulafaa'ur-raashidiinta afarta ah

Ummada waxaa ugu fadli badan Nabigeeda ka dib Abuu Bakar Alsiddiiq, ka,dibna Cumar, Cusmaan ugu dambayna Cali bin Abii Daalib, sidaas ayey isku waafaqeen Ahlu sunna wal jamaaca. Waxaana si aad u badan (in ka badan sideetan sanad) looga soo wariyey Cali bin Abii Daalib in uu ka sheegay minbarka masjidka Kuufa :"Umadaan waxaa ugu khayr badan nabigeeda ka dib Abuu Bakar ka dibna Cumar" (w.w.Axmad bin Xambal, sanadyo wada sax ah, iyo Ibnu Abii Caasim, waxaana saxiix ka dhigay sh Albaani. Calina sidaas iskama uusan dhaheen hadii uusan cilmi u lahayn.

Labadaas waxaa xagga fadliga ku xiga Cusmaan bin Caffaan (a.k.n) Bukhaari ayaa wuxuu ka soo wariyey C/hi bin Cumar (a.k.n) : "Dadka ayaan kala fadli badnaysiin jirnay waagii Nabiga (n.n.k.h),markaas ayaan waxaan ugu khayr badnaysiin jirney Abuu Bakar, ka dibna Cumar,ka dibna Cusmaan" qaababka xadiiska loo wariyey midkood ayaa wuxuu ahaa "in arrintaasi ay gaarijirtey Nabiga (n.n.k.h) uusana diidi jirin" .

Sufyaan Al thawri (a.u) ayaa wuxuu yiri: "qofkii Cali fadli badnaysiiya Abuu Bakar iyo Cumar wuxuu ceebeeyey oo uu liiday Muhaajiriinta iyo Ansaarta, maadaama ay iyagu ay Cusmaan u arkeen inuu Cali ka horreeyo xagga fadliga iyo madaxtinimadaba" (w.w.Ibnu Maciin, Khallaal, qaabka uu sheegay Khadiib al Baghdaadina waa: qofkii Cali ka fadli badnaysiiya Cusmaan wuxuu ceebeeyey oo uu liiday labo iyo toban kun oo uu Nabigu dhintay isagoo raalli ka ah). Sida ay khaliilnimada ugu kala horreeyaan ayey xagga fadligana ugu kala horreeyaan.

Kuwa jannada loogu bishaareeyey

Kuwaasina waa afarta khulaa'ur-raashidiinta ah, Cabduraxmaan bin Cawf, Sacd bin Abii Waqqaas, Dalxa bin Cubaydil-laahi,Alzubayr ibnul Cawwaam, Abuu Cubaydata Caamir bin Jarraax, Saciid bin Zayd (Allha ka raali noqdo dhamaantood, tobankaas waxaa uu Nabigu (n.n.k.h) u qiray inay janno leeyihiin, sida ku xusan xadiis sugan oo ay soo wariyeen Axmad, Abuu Daawuud, Tirmidi, Nasaa'I iyo Ibnu Maajah".

Sidoo kale waxay axaadiistu sheegtay in in asaxaab kalena loogu bishaareeyey janno, sida Bilaal (sida ku xusan Bukhari iyo Muslim), Thaabit bin Qays (Bukhari iyo Muslim), C/hi bin Salaam (Bukhari iyo Muslim), Allha ka raali noqdo dhamaantood.

Ahlu-baytka Nabiga:

Waa shan qayboob oo ay sakadu xaaraan ka tahay, oo kala ah: “reer Cali bin Abii Daalib, reer Jacfar, reer Caqiil, reer Cabbaas, reer Banil Xaarith bin Cabdulmuddalib. Nabigu (n.n.k.h) wuxuu yiri: “Ilaaheey (sare ahaaye) wuxuu Kinaana ka soo doortay wixii uu Nabi Ismaaciildhalay, Qurayshna wuxuu kazoo doortay Kinaana, Qurayshna wuxuu kasii doortay Banii Haashim,anigana wuxuu iga soo xushay reer Banii Haashim” w.w.Muslim).

Waxaa kale oo uu yiri”waxaan Alle idingugu dardaarmaa Ahlu-baytkayga, waxaan Alle idingugu dardaarmaa Ahlu-baytkayga” (w.w.Muslim).

Mar uu Cabbas bin Cabdilmuddalib uu ka dacwooday in Quaraysh qaarkeed ay gooyeen reer banii Haashim, ayaa Nabigu (n.n.k.h) wuxuu yiri: “Ilaah ayaan ku dhaartaye qofka qalbigiisa inuusan iimaan gelaynin ilaa uu idiin jeclaado Alle dartiis iyo qaraabanimadayda” (w.w.Axmad).

Waxaa ka mid ah ahlu-baytkiisa xaasaskiisa daahirka ah. Ilaaheey wuxuu yiri:

{ إِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ لِيُذْهِبَ عَنْكُمُ الرِّجْسَ أَهْلَ الْبَيْتِ وَيُطَهِّرَكُمْ تَطْهِيرًا (٣٣) } الأحزاب:٣٣

“waxaa Ilaaheey uu rabaa in (ahlu-baydoow) uu idinka fogeeyo xumaanta iyo sharta, naftiinana uu ka dhigo mid aad daahir u ah” (Al axzaab:33).

ILaaheey ayaa xaasaskaas u soo doortay Nabigiisa (n.n.k.h) wuxuuna ka dhigay kuwo xaasas u ah aduun iyo aakhiraba, wuxuuna ku magacaabay inay inay hooyooyin u yihiin mu’miniinta. Waxaana ugu fadli badan Khadiijo, haddana Caa’isho bint Abii Bakr (a.k.n), intooda kalena waa: Sawda bint Zamcah,Xafsa bint Cumar, Ummu Salama,UmmuXabiiba bint Abii Sufyaan, Safiya bint Xuyayin, Zaynab bint Jaxshi, Juwayriyah, Maymuunah, Zaynab bint Khuzaymah Allah aka raallinoqdo dhamaantood.

Asaxaabtu qaybtii iyo darajadii ay rabaanba ha ku jireene waxaawaajib ah in:

1.La jeclaado, Allah aka raalli noqdo la yiraahdo, loo dembi-dhaaf dalbo, la amaano si guud iyosi gaar ahaaneedba. Ilaaheey wuxuu yiri: “mu’miniintu waxay isku yihiin wali iyo gargaare” (Altawbah:71). Waxaa kale oo uu yiri: “Mu’miniintii ka dambeeyeen Muhaajiriinta iyoAnsaarta waxay yiraahdaan: Rabbigeenoow: noo dembidhaaf walaalaheena u dembidhaaf oo iimaanka nooga horeeyeen” (Alxashri:10).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: “Calaamada iimaanku waa jeclaanta Ansaarta, calaamada munaafiqnimaduna waa: nebcaanta Ansaarta” (w.w.Bukhaari).

Cali bin Abii Daalib (a.k.n) ayaa wuxuu yiri: “waxaan ku dhaartay Allihii mirta dilaaciyey oo geed baxaya ka dhigay, naftana abuuray ee Nabigii aan waxna qori jirin waxna aqrin jirin wuxuu iiga tagey in “mu’minka kaliyuhu I jeclaanayo, munaafiqa kaliyuhuna I nebcaanayo” (w.w.Muslim).

2.Loo xaaro quluuta oo aan wax xun loo malaynin, xumaana aan qalbiga loogu haynin, afka iyaga wax looga sheegayana la daahiriyo oo aan la caayin lana lacnadin. Ilaaheey wuxuu yiri isagoo ka hadlaya waxa ay mu’miniintu Alle ka warsadaan: “Ilaaheeyoow ,quluubteena ha gelin xasad iyo xumaan aan u hayno kuwii Rabigeen rumeeyey, waxaad tahay Alle turis badan oo naxariis badan” (Alxashri:10).

Rasuulkuna (n.n.k.h) wuxuu yiri: “ha caayinina asaxaabtayda, waxaan ku dhaartay Allaha ay nafsadaydu ay gacantiisa ku jirto ee hadii uu qofku bixiyo wax la’eg buurta Uxud oo dahab waxaase ma gaarayaan nus kilo ama barkiis uu bixiyey qof asaxaabta ka mid ahi” (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

3.Laga gaabsado khilaafaadkii ayaga dhexmaray, wanaagna loo maleeyo, looguna cudurdaaro inay ahaayeen dad dadaalay oo noqon kara kuwa xaqqa la helay oo asiibay oo labo ajar leh, ama qaldamay ooh al ajar leh. Waxayna leeyihiin acmaal iyo wanaagyo iyo xasanaad waawayn oo keenayaan in dembiyadooda la dhaafo hadii ay dembiyo ka dhacaan.

4.Laga beri noqdo qaabdhaqanka Shiicada (raafidada ah) ooah kuwo ku fogaaday ahlul-baytka arimahooda, caay iyo lacnadna u dhaamiyaan asaxaabta intooda kale. Sidoo kalena laga berinoqdo qaabdhaqanka qolada ahlulbaytka ku hayaan dhibka (waa Nawaasib) oo xiriirka u jareen ahlubaytkii Rasuulka (n.n.k.h).

# Awliyada

Mu'miniintu kuligood waa awliyo Ilaaheey, "Ilaaheey wali iyo gargaare u yahay mu'miniinta" (Albaqarah:257), mu'miniintana waxaa ugu karaamo iyoqiimo badan qofkooda ugu taqwada badan, "Waxaa idin kugu karaamo badan qofkiina ugu taqwada badan" (Alxujuraat:13).

Qofkii isla ilaaliya carada Ilaaheey wuxuu noqonayaa "wali Ilaaheey", Wilaayada xagga mu'miniinta ka imaanaysaa waa: jeclaanta iyo adeecida Ilaaheey, wilaayada dhanka Alle ka imaanaysaanawaa: inuu iyaga jeclaado, wanaagna siiyo.

b)Waligu waamu'min kasta oo iska ilaaliya carada Ilaaheey.Ilaaheeyna wuxuu yiri:

{ أَلا إِنَّ أَوْلِيَاءَ اللَّهِ لا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلا هُمْ يَحْزَنُونَ (٦٢) الَّذِينَ آمَنُوا وَكَانُوا يَتَّقُونَ (٦٣)} يونس:٦٢-٦٣

"Awliyada Ilaaheey aakhiro kama cabsanayaan ciqaabta Ilaaheey,man aka tiiraanyoonayaan wixii aduunka ku dhaafay. Kuwaasina waa kuwa iimaanka laga helay, Alle caradiisana iska ilaalin jireen" (Yuunus:62-63).

Darajooyinkooda walinimaduna waxay u kala sareeyaan sidii iimaankooda iyo taqwadoodu ay u kala sareeyeen, ee xag nasab ama andacoosho awgood kkuma kala saraynayaan,"Waxaa idinkugu karaamo badan qofkiina ugu taqwada badan" (Alxujuraat:13).

2.Karaamadu waa arrin ka duwan sida caadada dadku ku socotay oouu Ilaaheey ka muujinayo qof ka mid ah dadka isaga rumeeyey oo iska ilaaliyey caradiisa iyo ciqaabtiisa, isaga oo dadkaas ku karaamaynaya, isla markaasna rumayn iyo xoojin u noqonaysa Nabigii (n.n.k.h) ay dadkaasi raaceen. Waxayna u qaybsantaa labo qaybood:

- Mid ka muuqata waxa qalbigiisa lagu soo ridayo, waxa la ogaysiinayo iyo waxa uga muuqanaya waxa uu arko sida dadka oo uu sii saadaalin karo qofkaani sida uu mustaqbalka noqon karo.
- Mid ka muuqata xagga awoodda iyosaamaynta.

Karaamada waxaa leh awliyadii Ilaaheey ee umadihii tagey iyo umadaan caaradkeedii sida asaxaabta iyo taabiciinta, wayna sii jiraysaa ilaa qiyaamaha.

# Usuul  aan waxba ka tegaynin oo la xiriirta xagga aasaas u jeexida iyo wax daliisashada

Usuusha iyo aasaasyada aan wax aka tegaynin ee laga soo dhaansado caqiidada, shariicada iyo qaabdhaqanka waa saddex: kitaabka, sunnada saxda iyo ijmaaca sugan, mana banaana in lagu mucaarado ra’yi,qiyaas, qofka dooqiisa, wax la tusiyey oo daaha looga qaaday isagoo hurda ama soo jeeda ama war uu qof leeyahay qofka uu rababa ha noqdee.

Wadada loo maro in la fahmo kitaabka iyo sunnada waa wadadii ay mareen mu’miniinta bilaawgoodii oo ah Muhaajiriinta, Ansaarta  iyo kuwii iyaga wanaaga ku raaceen.Waana in la raacin wadooyinka aan saxda ahayn oo bidcada ah oo ay layimaadeen ahlul-kalaamka iyo suufiyada. Alle wuxuu yiri:

{ وَمَنْ يُشَاقِقِ الرَّسُولَ مِنْ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُ الْهُدَى وَيَتَّبِعْ غَيْرَ سَبِيلِ الْمُؤْمِنِينَ نُوَلِّهِ مَا تَوَلَّى وَنُصْلِهِ جَهَنَّمَ وَسَاءَتْ مَصِيرًا (١١٥) } النساء:١١٥

“Qofkii Nabiga khilaafa kadib marka xaqqu u cadaado oo raaca waddo aan ahayn mida ay mu’miniintu qaadeen waxaan u daynaynaa meeshaas uu aaday oo xaqqa ma aan waafajinayno,  waxaana aan gelinaynaa Jahannamo, waxaana liita meeshaas uu u noqonayo oo uu ku dambayn doono” (Alnisaa:115).

Caqliga fayoow oo ka caafimaadka qaba shubuhaadka (waxa caddaynta loo maleeyo oo aan saxda ahayn) iyo shahawaadka (waxa naftu rabto oo aan wanaagsanayn) kama horyimaado wixii la soonaqliyey  oo sax ah, oo ka badqaba cilladaha dhaawacaya, . Waxaa laga yaabaa in nusuustu la timaado wax ay caqliyadu ku daalaan, laakiin lama timaado wax caqliyadu ay qabaan inaysan suurtogalahayn. Qofkii ismoodsiiya in caqliga iyo nusuustu iska soo horjeedaan waxay dhibaatadu uga timid caqligiisa faasidka ah, waxaana markaas waajib ku ah inuu nusuusta ka hormariyo caqliga.

**Bidcadu** waa in diinta lagu soo daro wax aysan shaqo  ku lahayn, Nabigu wuxuu yiri: “Qofkii diinta ku soo biiriya wax aan ka mid ahayn isaga ayaa dib loogu soo celinayaa” (w.w.Bukhaari iyo Muslim). Waxaa Muslimka ku yiiley (iyo weliba bukhaariga qaabka looyaqaan mucallaqa) : “Qofkii sameeya camal aan diinteena ku socon isaga ayaa dib loogu soo celinayaa” .

***Bidcadaasi waa noocyo kala duwan***:

1. Mid caqiidada la xiriirta, sida shiicanimada, khawaarijnimada, qadariyanimada iyo murji’animada.
2. Mid xagga camalfalka la xiriirta: sida dariiqo ahaanta suufiyada, cibaado u go’ida iyadoo aduunyo iyo dadba laga fogaanayo.
3. Mid asal ah: sida mawliidka iyo wardiyada gacan ku samayska ah.
4. Mid aan asalahayn laakiin cibaadada  uga soo dhegta oo ka soo raacda xagga sababta, nooca cibaadada, inta ay lala ekaysiinayo, qaabka loo samaynayo, waqtiga la samaynayo ama meesha lagu samaynayo.
5. Mid wayn: sida shirkiga nooca uu rababa ha noqdee.
6. Mid qafiif ah: sida sida in si wadar ah loo qaado adkaarta iyo wardiyada.
7. Mid lagu gaaloobayo: sida in ladiido tilmaamaha Ilaaheey.
8. Mid lagu lagu faasiqoobo: sidahegaysiga waxa xaaraanta ah.

# Waxaa ka mid ah waxyaabaha dhamaystira caqiidada

1.In wanaaga la is faro, xumaantana la iska reebo. Ilaaheey wuxuu yiri:

{وَلْتَكُنْ مِنْكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى الْخَيْرِ وَيَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ (١٠٤)} آل عمران:١٠٤

“Mu’miniineey ha laydinka helo koox dadka ugu yeeraan khayrka oo sidaa awgeed wanaagana faraan, xumaantana reebaan, kuwaasi waa kuwa liibaanay” (Aalu Cimraan:104).

Waxaa laga soo wariyey AbiiSaciid Alkhudri (a.k.n) inuu yiri: “waxaan maqlay Rasuulka (n.n.k.h) oo leh :Qofkiinii arka munkar (dembi la samaynayo) gacantiisa wax ha uga qabto, hadii uusan awoodin afka wax ha uga qabto, hadii uusan awoodina qalbiga ha ka naco, intaasina waa inta ugu taagta-yar iimaanka” (w.w.Muslim).

Marka munkarka la reebayana waxaa lagama maarmaan ah saddex arrimood: in inta aan la reebin aqoon loo leeyahay waxa la reebayo, in marka la reebayo qaab dabacsan loo reebo iyo in marka la reebok a dib Samir la kaashado maadaama dhib ka imaan karo.

2.***In lagu dadaalo midnimada,la iskana diido ikhtilaafka.***

Ilaaheey wuxuu yiri:

{ وَاعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُوا وَاذْكُرُوا نِعْمَتَ اللَّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ كُنْتُمْ أَعْدَاءً فَأَلَّفَ بَيْنَ قُلُوبِكُمْ فَأَصْبَحْتُمْ بِنِعْمَتِهِ إِخْوَانًا وَكُنْتُمْ عَلَى شَفَا حُفْرَةٍ مِنَ النَّارِ فَأَنْقَذَكُمْ مِنْهَا كَذَلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ لَكُمْ آيَاتِهِ لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ (١٠٣) وَلْتَكُنْ مِنْكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى الْخَيْرِ وَيَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ (١٠٤) وَلَا تَكُونُوا كَالَّذِينَ تَفَرَّقُوا وَاخْتَلَفُوا مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَهُمُ الْبَيِّنَاتُ وَأُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ (١٠٥)} آل عمران:١٠٣-١٠٥

“Dhamaantiin qabsada kitaabka Ilaaheey iyo sunnada Nabigiina (n.n.k.h) , hana is khilaafinina, waxaadna xasuusataan nicmadii waynayn ee Alle idiin galay oo ahayd inaad islaamka ka hor aad col ahaydeen ka dibna uu quluubtiina isku keenay oo is ogolaysiiyey, nicmada Ilaaheeyna aad ku noqoteen walaalo, awelna Jahanamo ayaad qarka u saarnaydeen, Ilaah ayaana idinka badbaadiyey maadaama aad hanuunka qaadateen, sida uu Alle idinkugu bayaaniyey iimaanka saxda ah oo kale ayuu wuxuu idiin bayaaninayaa wax kasta oo wanaagiinu ku jiro si aad u hanuuntaan oo aad-

naan u lumen. Ha la idinka helo koox dadka wanaaga faraan,xumaantana ka reebaan,kuwaasina waa kuwa liibaaney. Hana la mid noqonina kuwii is khilaafeen ka dib markii ay xaqqa garteen, kuwaasi waxay mudan yihiin cadaab wayn"  (Aalu cimraana:103-105).

Waxaa kale oo uu yiri:"waxaan idiin sharciyeynay wixii aan anbiyada farnay oo  ahaa: diinta toosiya oo ooga, hana isku khilaafinina diinta" (Alshuuraa:13).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: "mu'minku wuu u yahay mu'minka kale sida dhismaha oo qaarkiis ay xoojiyaan qaarka kale" wuxuuna isdhexgeliyey farihiisa isagoo tusaalahaas bixinaya" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

Waxaa kale oo uu yiri: "tusaalaha mu'miniinta xagga isjeclaanta, isku naxariisashada waa sida jirka oo kale oo hadii xubin ka mid ahi ay xanuunsato ay inta kale isku habarwacdaan inay la xanuunsadaan oo la soo jeedaan" (w.w.Muslim).

3.***Akhlaaqda wanaagsan iyo dhaqanka suuban.***

Sida samirka, deeqsinimada, geesinimada,dulqaadka, tawaaduca, [la iskana daayo tilmaamahaaskuwa ka soo horjeeda] u baarinoqoshaha waalidka, qaraabo xiriirinta, deris wanaagga, u samafalida agoonta, masaakiinta iyo musaafirka.

Ilaaheey wuxuu yiri: "Nabi Aloow, dadka ka yeel oo ka aqbal wixii ka go'a oo camal ama akhlaaq ah oo intaas wixii ka badan ha ku sii qasbin, dadka wanaaga far, jaahiliintana iska daa inaad iyagoo kale noqoto" (Ala acraaf:199).

Waxaa laga soo wariyey Abuu Dardaa (a.k.n) inuu Nabigu (n.n.k.h) yiri: "ma jiraan wax miisaanka la saaro ooka culus akhlaaqda wanaagsan" (w.w.Abuu Daawuud, Tirmidi).

Waxaa laga soo wariyey Abuu Hurayra (a.k.n) inuu Nabigu (n.n.k.h) yiri: "Qofkii kurbo aduunyo ka fayda mu'min, waxaa Alle ka qaadayaa kurbo aakhiro. Qofkii u kaadiya daynqabe aan waxba haysan Ilaaheey ayaa isagana u fududaynaya oo aan ku adkaynayn aduun iyoaakhiraba. Qofkii u ceeb astura muslim waxaa u ceeb asturaya Ilaaheey aduun iyo aakhiraba, inta uu qofku ku jiro inuu dadka caawiyo waxaa isaga caawinaya Ilaaheey. Qofkii qaada wado uu cilmi barasho u aadayo waxaa sidaa awgeed uu Alle

ugu sahlayaa wado jannada gaysa.Dadkii ku kulma guri Ilaaheey iyagoo aqrinaya kitaabka Alle, oo kala dhegaysanayaan, waxaa ku soo degaysa xasilooni, waxaana dedaya naxariis, dhinac walbana waxaa kamaraya malaa'igta, Allena wuxuu amaantooda ku dhexsheegayaa malaa'igta la joogta. Qofkii uu camalkiisu la haro,nasabkiisu waxba uma soo kordhinayo" (w.w.Muslim).

## Diinta iyo dariiqa

Diinta Illaaheeywaa mid, waana islaamka. Ilaaheey wuxuu yiri: “Diintu xag-ga Alle waa islaamka” (Aalu Cimraana:19),waa diintii uu Alle siiyey dadkii hore iyo kuwii dambeba. Wuxuuna Eebe wayne yiri: “waxaan soo dejinay Tawreed, waxaana wax ku xukumay nabiyadii islaameen (hogaansameen)” (Almaa’idah:44).

Macnahaasi waa macnaha guud ee islaamka oo laga wado in Alle loo ho-gaansamo iyadoo la adeecayo,berina laga noqonayo shirkiga.

Waxaa jira macne kale oo kaas ka hooseeya oo islaamka loo isticmaalo,kaas oo ah in loo isticmaalo wixii uu Rabbi I soo dhiibay nabi Muxamad (n.n.k.h) oo ah hanuunka iyodiinta xaqqa ah, oo ka kooban caqiido saxan, shareeco caadil ah,acmaal saalix ah,akhlaaq toosan,wuxuuna diintaas ka dhigay mid nasakhda oo bedesha wixii ka horeeyey oo diimo ah, sidaas awgeed lama aqbalayo diin aan islaamka ahayn. Ilaaheey wuxuu yiri: “qofkii dal-bada diin aan ahayn islaamka ma laga aqbalayo, aakhirana wuxuu ka mid yahay dadka khasaaray” (Aalu cimraana:85).

Nabiguna (n.n.k.h) wuxuu yiri: “waxaan ku dhaartay Allaha ay gacantiisa ku jirto nafta Muxamad qofkii umadaanka mid ah oo I maqla oo yuhuudi ama nasraani (kirishtaan) ah oo dhinta isaga oo aan rumaynin diintii la ii soo dhiibay wuxuu ka mid noqonayaa Ahlu-naarka” (w.w.Muslim).

Waxaa Ilaaheey uu ku magacaabay adoomadiisii wanwanaagsanaa inay ahaayeen muslimiin,wuxuuna yiri; “Diintaani waa diintii aabihiin Ibraahiim,Ilaaheey ayaa idiin bixiyey Muslimiin oo sidaas ku xusay kutubtii hore iyo Qur’aankaba” (Alxaj:78). Laakiin maadaama sida ay sunnada Il-aaheey ku socotay ee la xiriirta khalqiga ay tahay in ay is khilaafaan sida uu Nabiguba (n.n.k.h) u yiri: “dadkii idinka horeeyeen oo ahlu-kitaabka ahaayeen waxay isku khilaafeen todobaatan iyo labo firqo,umadaanina waxay u qaybsami doontaa todobaatan iyo saddex firqo,oo todobaatan iyo labo ka mid ahi ay naarta gelayaan, hal midna ay jannada gelayso, waana jamaacada” (w.w.Axmad,Abuu Daawuud iyo Tirmidi). Firqada badbaday waa dadka ku dhegan kitaabka,sunnadana raaceen, sunadaas ka saafiga ah wax barxay, bido iyo waxa naftu iska jeceshahay. Kuwaasina waa kuwa dadka iyo firqada uu Nabigu (n.n.k.h) yiri:”waxaa mar walba jiri doona koox

umadayda ka mid ah oo ku taagan diinta Ilaaheey, oo ay aysan waxba ka dhibaynin dadka iyaga khilaafaan,sidaasna ayeyna ahaanayaan ilaa qiyaamaha agtiis iyagoo dadka ka awood badan" (w.w.Bukhaari iyo Muslim).

*Dadkaas ahlu-sunada ah waxay u dhexeeyaan labo dhinac, waa toosnaan u dhexaysa labo qalooc, waa hanuun u dhexeeya labo baadiyood*:

Waxay u dhexeeyaan:

1.Mushabbihada [kuwa Alle ku shabahaan khalqigiisa] iyo Mucadilada[kuwa Alle tilmaamihiisa ka qaadeen) xagga sifaadka Ilaaheey.

2.Jabriyada iyo qadariyada xagga afcaasha Ilaaheey.

3.Murji'ada iyo Waciidiyada xagga waciidka Ilaaheey iyo magacyada Aliimaan iyo Aldiin.

4.Khawaarijta iyo Shiicada (Raafidada) xagga asaxaabta Nabiga (n.n.k.h).

Waxay beri ka yihiin fekradahaas iyo mad-habyaashaas liita, wadooyinkaas lunsan, waa kuwo ku farxay in uu Alle ku galadaystay inuu jeclaysiiyey iimaanka, uuna nebcaysiiyey gaalnimada, faasiqnimada iyo caasin, "khayrkaas ay heleeni waa nicmo iyo fadli xag Alle ka yimid, Allena waa mid cilmi iyo xikmad badan" (Alxujuraat:8).

Allaha ku salliyo oo salaamo Muxamad oo ahaa adoonkiisa iyo nabigiisa, sidoo kalena Allaha ku salliyo asaxaabtiisa iyo ahalkiisa dhamaantood.

W.Q

Dr.Axmadbin C/raxmaan bin Cusmaan Alqaadi

Waxaa uu ka faaruqay qoraalkiisa: 15/02/1327 H.

Cunayzah

مركز أصول
Osoul Center
www.osoulcenter.com

حاصل على جائزة التميز في العمل الخيري
International Organization for Standardization
ISO
9001
حاصل على شهادة الاعتماد من الآيزو
عرض تعريفي عن مركز أصول ومجالاته ووحداته.. مشاهدة ممتعة لك
osoulcenter
+966504442532
www.osoulcenter.com